# Kaalay Isoo Raac

## Hagaha Lataliyaha

**Daabacaadda Caalamiga ah ee Labaad, 2017**

**Tim Green**

Ugu horrayn waxa lagu daabacay Ingiriiska sanadkii 2014, Lulu.com.

Daabacaadda labaad sidoo kale waxa lagasoo dejisan karaa iyadoo lacag la'aan ah come-follow-me.org

Xuquuqda daabacaadda © Tim Green 2014, 2017. Way dhawrantahay.

Hagahan Lataliyaha waa loo daabacan karaa isticmaal shaqsi ahaaneed.

***Waxa laga codsanayaa akhristayaasha***

Tani waa daabacaadda labaad ee Kaalay Isoo Raac Hagaha Lataliyaha, oo ah mid dib u habayn lagu samayeeyay iyadoo lala kaashanayo la talinta iyo soo jeedimaha dadku ku talo bixiyeen. Haddii aad hayso wax talo ama tusaaleyn ah, waxa lagaa codsanayaa inaad noogu soo dirto foomka soo jeedinta ee buugga xaggiisa danbe laga heli karo.

Koorsadani waxay in badan ku tiirsantahay daraasaynta xaalado gaara, maragfurro, qisooyin dhaba, suugaan iyo sawirro kasoo jeeda dunida Islaamka. Fadlan naga caawi inaad nala wadaagto tusaalayaal iyo qisooyin naga caawin kara inaan koorsooyinka mustaqbalka diyaarino oo la xiriira xerta kasoo jeedda Islaamka, haddii ay yihiin kuwo ka jira meelaha Muslimku ku tirade badanyihiin iyo dalalka reer Galbeedkaba. Sidoo kale noo soo jeedi wixii kaabayaal ah sida muuqaallo iyo wixii kale ee kaabi kara buugga barashada.

Kaalay Isoo Raac waxa kel oo dheer imika agab ku diyaarsan bogga internetka oo loogu talo galay xerta asalkoodu kasoo jeedo Islaamka, waxaana ka mida kuwa laga helayo www.bmbtraining.org. Qaybta B ee hagaha lataliyaha waxa lagasoo dejisan karaa casharrada oo kala gaar gaar ah, waxaana laga helayaa come-follow-me.org.

**Mahadsanid.** **Tim Green** **comefollowmecourse@gmail.com**

Dhammaan aayadaha koorsadan dhexdeeda, haddii aan si gaara loo qeexin, waxa lagasoo qaatay Kitaabka Quduuska ah, tarjumaadda afka Soomaaliga.

Nashqadaynta Jaldigu waa David Vosburg. www.zagmediaarts.com

# Mahadnaq

Waxaan si kal iyo laaba ugu mahadinayaa dadka gacan ka geystay mashruucan, dhiirrigelintooda, naqdintooda iyo ducooyinkoodaba. Dad badan ayaa gacan ka geystay kitaabka barashada ee Kaalay Isoo Raac waxaanay mudanyihiin in la magacdhabo. Qaar ka mida dadkaasi (sida Sue iyo Rachel) waxay sidoo kale fikirro wax ku oola iga siiyeen Hagaha Lataliyaha, sida ay Scott iyo Malcolm.

Jacob waxa uu ku deeqay fikirro badan oo hal-abuurnimo leh, gaar ahaan marka la eego xagga ‘dhaqannada’ khuseeyo qaab-fikirka Muslimiinta iyo dhaqankooda iyo sidoo kale nidaaminta daabacaddii koobaad. Xagga daabacaadda labaadna, Penny waxay bilowday hannaanka dhaqangelinta hagaha casharrada, halka Jena halkaas kasii anba qaaday, iyadoo ku deeqaysa fikirro badan iyo diyaargaraynta daabacaadda.

Waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa qoyskayga gaar ahaan xaaskayga Rachel. Waxaanu si wada jira sanado badan u wadaagnay farxadda iyo niyadjabka kuwo badan oo Masiixa raacay iyagoo kasoo tegay Islaamka. In badan ayay dhabar adaygeen oo mararka qaarna jidka ku keliyaysteen. Rachel waxay si hagarla’aana isugu duba riday mashruucayga sii fidayay (oon bilaabay toban sano kahor!) iyadoo ku deeqday caawimaad aan lasoo koobi karin xagga muraajacaynta iyo saxid-akhrinta.

Dhammaantiin waad mahadsanyihiin.

# Fadlan Ugu horrayn Akhri Waxyaalahan

Koorsada Kaalay Isoo Raac waxa loogu talo galay dadka kasoo jeeda Islaamka ee raacay Ciise Masiix. Waxa ujeedadiisu tahay inay iyaga ka caawiso ku koritaanka iimaanka iyo ka mid noqoshada ummaddiisa.

Koorsada Kaalay Isoo Raac waxa ay koobsanaysaa saddex qaybood:

1. Kitaabka ardayga oo loogu talogalay in la akhristo si loogu diyaargaroobo falanqaynta;
2. Hagaha lataliyaha, si loogu hoggaamiyo falanqaynta;
3. Adiga oo ah lataliyaha! Kutubtu xer ma samayso. Xerta ayaa xer kale samaysa.

Adigoo Ilaah la kaashanaya, waxaan saamayn weyn ku leedahay nolosha rumaystaha cusub adigoo ah lataliyohooda, hagohooda, dhiirrigeliyohooda, tusaalahooda iyo saaxiibkood intaba. Kaalay Isoo Raac waa agab loogu talo galay in loo adeegsado xidhiidhka xer samaynta. Hagaha Lataliyuhu waxa uu kaa caawinayaa inaad agabkaas si wanaagsan u adeegsato, koox ahaan iyo keli ahaanba.

Hagaha Lataliyuhu waxa uu ka koobanyahay labo qaybood. ***Qaybta A, waxaad shan daqiiqo oo akhrisa ku qaadataa 'Sida loo isticmaalo koorsadan'***. Tani waa muhiim waayo waxa dhici karta in qaabka barashada iyo xaaladduba ay kugu cusubyihiin. Intaas kadib, u akhri qaybaha kale ee A kolba sida ay baahidaadu tahay. Cutbka ku saabsan '**fahanka dhaqanku**' waxa uu ka koobanyahay waxyaalo muhiim u ah dadka aan wax aqoona u lahayn dhaqanka Muslimka. Waxaan kugula talinaynaa inaad waxyaalahan akhrido usbuuc kasta sida ay casharrada ugu qaybsanyihiin.

***Qaybta B waxay tallaabo tallaabo u hagaysaa cashar kasta***. Waxa ay koobsanaysaa su'aalaha falanqaynta iyo hagitaan faahfaahsan, si ay u caawiso labo nooc oo ah ah latilayaasha Masiixiyiinta ah: kuwa aan Islaamka wax aqoona u lahayn, iyo kuwa aan khibradda u lahayn diyaarinta su'aalaha falanqaynta loogu talo galay. Haddii labadaasba aad khibrad u leedahay, waxaad ka maarmi kartaa hagitaanka faahfaahsan ee casharrada. Laakiin waxaad uga faa'idaysan kartaa horumarinta su'aalahaaga falanqayneed ee kuu gaarka ah.

Xaalad kastaba, fadlan waxaad hubisaa inaad ardayda la falanqayso su'aalaha ku sugan koorsadan ee ku suntan 'falanqayn' ama 'jawaab shaqsi ahaaneed'.

Aqoonta maskaxda lagu hayo ee keli ahi waxba ma tarto, koorsadanina waxay waxay rumaystayaasha kasoo jeeda Islaamka ka caawinaysaa isbeddel saddx heer ah:

- 'maanka', isbeddel ku salaysan Ereyga Ilaah;
- 'qalbiga', taabashada dhinacyada dareenka, yoolka iyo fikirrada;
- 'gacmaha', dhaqangelin toddobaad kasta ah si ardaydu ula yimaaddaan camalfal.

Hagaha Lataliyaha waxa lagusoo dejisan karaa lacag la'aan, waana la daabacan karaa wixii isticmaal shaqsi ahaaneed ah, iyadoo laga helayo bogga come-follow-me.org.

**Mahadsanid!** **Tim Green** **comefollowmecourse@gmail.com**

# Tusmada Kitaabka

### Qaybta A: Hagitaan Guud


| Mawduuca | Bogga |
|---|---|
| Sida loo isticmaalo Koorsadan | 2 |
| Doorka Lataliyaha | 4 |
| Sida loo hoggaamiyo cashar walba | 5 |
| Hoggaaminta Falanqaynta Kooxda | 8 |
| Xer-ka-dhigista dadka asalkoodu kasoo jeedo | 9 |
| Dhaqanka iyo Ereyo Muslimku Isticmaalaan | 11 |
| Su'aalaha Badanaa La-is-weydiiyo | 12 |
| Codsi Jawaab Celin | 13 |


### Qaybta B: Hagaha Casharrada


| Casharka | | Bogga |
|---|---|---|
| | Kulan Isbarasho | 15 |
| 1 | Ka Mid noqoshada Xerta Masiixa | 17 |
| 2 | Nolosha Cusub ee Masiixa ku Jirta | 20 |
| 3 | Ilaaha Aabbaha ah | 22 |
| 4 | Masiixa oo lagu addeeco xoogga Ruuxiisa | 25 |
| 5 | La Hadlitaanka Ilaah | 28 |
| 6 | Waxa Ereyga Ilaah inoo Yahay | 30 |
| 7 | Xubnaha Kaniisadda Masiixa | 32 |
| 8 | Xubno ka Tirsan Labo Bulsho | 35 |
| 9 | Sababaha Cadaadiska ama Silica | 38 |
| 10 | Waajihidda Cadaadiska ama Silica | 41 |
| 11 | Rag iyo Dumar Lammaane ah | 44 |
| 12 | Xallinta Khilaafaadkeenna | 47 |
| 13 | Marag Fur | 50 |
| 14 | Baabtiiska | 53 |
| 15 | Jidka Toosan | 56 |
| 16 | Qaynuunka Jacaylka | 59 |
| 17 | Soonka iyo Sakada | 62 |
| 18 | Qadarka iyo Faalka ama Sixirka | 65 |
| 19 | Isu-adeegis | 68 |
| 20 | U Xashitaankeenna Jannada | 71 |

Lifaaq: Aayadaha xafidista loogu talo galay koorsadan dhexdeeda

# Qaybta A:

# Hagitaan Guud

# Sida loo isticmaalo Koorsadan

*Fadlan akhri qaybtan. Waxay kaa caawinaysaa inaad laba jibbaarto faa'idada aad ka helayso koorsadan.*

## Yaa loogu talogalay koorsadan?

Waxa loogu talogalay xerta Masiixa raacda ee kasoo jeedda asal ahaan Islaamka, amaba kuwa ku dhow inay raacaan Masiixa. Waxay ka caawinaysaa iyaga inay qaadaan tallaabada koobaad ee xer noqoshada. Sidoo kale xerta kuwooda xagga ruuxa ka korayna faa'ido ayay ka helayaan, waayo waxa ay koorsadani ka caawinaysaa inay dul joogsadaan arrimaha la xidhiidha dhaqanka Muslimiinta iyo sidii ay iyaga ula falanqayn lahaayeen arrimahaas.

## Waa maxay qaabka barashadu?

Koorsadan laguma dhammaystiri karo barasho qofku iskii u sameeyo. Waxa loogu talo galay in lawada isticmaalo. Qaabka ay toddobaad kasta ardaydu u raacayaan koorsadani waa:

1. Ugu horrayn, iskaa wax uga baro oo akhriso buugga barashada;
2. Marka labaad, ka qayb qaado falanqaynta toddobaadkiiba hal mar;
3. Marka saddexaad, waxay barteen ardaydu waa inay noloshooda ku dabaqaan oo dhaqan geliyaan.

Faahfaahin dheeraada:

- Qaybta' barashada gurigu' waxay u baahantay firfircooni ee maaha akhris oo keliya. Waxa loga baahanyahay ardaydu inay wax sameeyaan dhammaadka qayb kasta.
  - Su'aalaha qaar waxay ardayda ka caawinayaan inay xasuustaan wixii ay barteen;
  - Su'aalaha qaarna waxay ardayda ka caawinayaan fahanka iyo dhaqangelinta wixii ay barteen;
  - Su'aalaha qaar waxay ka caawinayaan inay dareen ka bixiyaan oo arrimahaas ay Ilaah hordhigaan;
  - Su'aalaha qaar waxay ka caawinayaan inay waaya-aragnimadooda kula wadaagaan falanqaynta dhexdeeda;
  - Sidoo kale sawirada iyo tusaalayaashu waxay gacan ka geysanayaan inay Erayga Ilaah ku xidhiidhiyaan waayo-aragnimada nolosha.
- Qaybta falanqayntu waxa uu koorsadan ka dhigaya mid nool oo waxtar leh. Ardaydu waxay is weydaarsanayaan fikirrada iyo aragtiyaha. Waxa ay tanina jebinaysaa fikirradii hore waxayna keenaysaa qaab fikir cusub.
- Qaybta dhaqangelintu waxay ardayda siinaysaa wax ay qabtaan ka hor inta aan lagu kulmin kulanka xiga. Waxa ay casharka ka dhigaysaa midaan ahayn aragti oo keliya balse ah qayb ka mida noloshooda.

## Ma waxa isticmaali kara shaqsiyaad mise kooxo?

Koorsadan labada siyaaboodba waa loo adeegsan karaa, mid walibana waxa uu wataa faa'idooyinka iyo faa'ido-darradiisa u gaarka ah. Waxa ku hagi doonta kolba xaaladda jirta marka la eego cidda u diyaarka ah qaadashada koorsadan. Haddii ay suurtogal tahay isu keenista koox kasoo jeeddo Muslim, waxay xoojinaysaa xidhiidhkooda iyadoo khibradna u siinaysa hoggaaminta kulammada falanqaynta. Sidoo kalena barista kelida ahi iyana waa muhiim. Laakiin falanqaynta ah 1:1 waxa uu noqon karaa mid u janjeedha jiha keliya, oo markaad su'aalaha bixiso iyana jawaabaha ayay bixin doonaan. Waxaad markaa isku daydaa inaad ka dhigto mid wax lagu wadaagayo oo labadiina dhinacba aad si wada jira wax uga baranaysaan ereyga Ilaah.

Marka aynu haddaba joogno Hagaha Lataliyaha ee aynu ka hadlayno 'arday', waxa loogala jeedaa koox iyo keli intaba. Sidoo kale waxa la adeegsanayaa timaamaha 'iyaga' si ay u tilmaanto dheddiga iyo labkaba. Dhammaan su'aalaha falanqaynta waxa loo adeegsan karaa kooxo iyo keli ahaanba, inkasta oo meelaha qaar falanqayntu u baahantahay koox.

## Casharrada oo dhan ma hal mar ayaa lagu qaadanayaa?

Taasi maaha muhiim. Labaatan toddobaad oon nasasho u dhaxayni waa wakhti dheer! Sidaas daraaddeed, adigaa xor u ahaa inaad inta aad doonto is raacsato amaba aad doorato wixii ku khuseeya.

## Qaab noocee ah iyo wakhti intee leeg ayaa loogu talo galay falanqaynta?

Ma jiro wakhti iyo qaab mucayan ah. Waxa ay ku xidhantahay kolba sida ay tahay baahidaadu laakiin sida caadiga ah falanqayntu waxay qaadan kartaa ugu yaraan saacad iyo badh iyadoo koobsan karta:

- Nasasho iyo wada sheekaysi (bilowga ama dhammaadka)
- Salaad furitaana
- Dib-u-eegista dhaqangelintii usbuucii lasoo dhaafay
- Qiimaynta shaqada guri ee toddobaadka imanaya
- Falanqaynta su'aalaha laga doortay casharka
- Falanqaynta aayado ka mida Kitaabka Quduuska ah
- Mararka qaar, daawashada muuqaal fiidyow ah amaba wax la wada qabto
- Xafidista aayadda xafidka loogu talo galay
- Salaad xidhitaana oo ay ku jirto codsiyada gaarka ah ee cidda u baahan duco

Xilliga falanqaynta, si yar oo fudud uun ha u kor marin waxa ku qoran kitaabka barashada waayo waad ku daalaysaa. Si kastaba ha noqotee, ardaydu waa iany soo akhriyaan kahor intaan la isugu iman falanqaynta si aanad ugu baahanin in dib loo wada muraajaceeyo amaba aanad ugu darin wax dheeraada. Taas beddelkeeda culayska saar waxyaabaha loogu talo galay falanqaynta oo gacan ka geysanaya inay isbeddel ku keenaan nolosha ardayda.

## Koorsadani ma waxay ku salaysantahay Kitaabka Quduuska ah?

Haa, in badan. Waxa uu ku salaysanyahay in Kitaabka Quduuska ahi uu yahay ereyga Ilaah oo haddii aan Masiixiyiin nahayna u baahanay inaan fahano oo addeecno. Kalaay Isoo Raac waxa uu ku salaysan yahay 1 Butros, oo ahaa warqad loo qoray inay dhiirrigeliso Masiixiyiinta cusub ee cadaadisku saaranyahay.

Koorsadan waxa laf-dhabar u ah oo ay ku qotontaa barashaa 1 Butros, oo si taxane ah looga soo qaatay cutubka koobaad ilaa kan ugu danbeeya (inkasta oo aayadaha oo dhan aan lagusoo wada qaadanaynin). Waxa ay ka koobanyihiin labaatan mawduuc oo muhiim u ah kuna tacalluqa Masiixiyiinta kasoo jeedda Islaamka. Waxa ay sidoo kale salka ku hayaan waxbarista kale ee Kitaabka Quduuska ah.

Cashar kastaa waxa uu wataa aayad u baahan in la xifdiiyo. Waxa aayadahan lagasoo qaatay 1 Butros iyo kitaabbada kale, waxaana lagusoo ururiyay Lifaaqa Hagahan Lataliyaha. Si loo xifdiyo, waxa lasoo doortay aayado gaaban oo ku habboon xifdinta.

## Muxuu buugga barashadu ugu muuqdaa mid fudud?

Waxa asal ahaan loo qoray dhaqan ay dad yari jaanis u heleen tacliin ama waxbarasho heer sare ah. Sidaas aawadeed, waxa uu adeegsanayaa qoraal si sahlan loo akhrin karo oo wata tusaalayaal iyo sawiro. Laakiin tan macneheedu maaha fikirka laga hadlayaa inuu sahlan yahay. Casharradan oo si shaqsiyan ah loo bartaa waxa ay horseedayaan falanqayn qoto-dheer, aragti isbeddel ku yimaaddo iyo korniin xagga xernimada ah. Tusaalayaasha xooggani waxay falanqaynta iyo dhaqangelinta ka dhigayaan mid ka fudud baris aad u xeel-dheer. Sidoo kale qofka koorsadan xernimada ah lagu ababiyaa waxa uu jaanis u helayaa inuu helo agab uu sidoo kale u adeegsan karo xer samaynta. Waxa ay tani xernimada markaa u horseedaysaa inay yeelato wax soo saar.

## Muxuu Hagaha Lataliyahani u faahfaahsan yahay?

Waxa loo qoray inuu caawiyo lataliyayaal kala duwan. Qaarkood waxay u baahanyihiin wax dheeraada oo ka caawiya diyaarinta su'aalaha gorfeynta, qaar kalena waxay u baahanyihiin waxyaabo ka caawiya xagga dhaqanka. Sidoo kale waxaan soo jeedinay in talo laga bixiyo su'aalaha falanqaynta ama gorfeynta. Lataliyayaasha khibradda lihi uma baahanayaan waxyaalahan laakiin dhammaan waan lagusoo daray halkan si aad u doorato waxa kugu habboon.

Haddii su'aalaha loogu talogalay falanqayntu ay kugu bataan usbuucii waxaad doorataa uun kuwa kuga habboon ee ku khuseeya. Laakiin kusoo dar kuwa loogu talo galay falanqaynta ama jawaabta shaqsi ahaaneed ee ku xusan buugga barashada.

## Barte kastaa miyuu u baahanyahay inuu haysto nuqul ka mida buugga barashada?

Haa, sidoo kalena lataliyuhu isna wuu u baahanyahay. Waxa aad ka heli kartaa boggayaga internetka: come-follow-me.org

# Doorka Lataliyaha

## Buugga ayaa macallinka ah

Buugga laftiisa ayaa si fudud u bixinaya casharrada. Waxa uu weydiinayaa su'aalo fudud sidoo kalena jawaabaha waxa uu ku bixinayaa dhammaadka cashar kasta. Sawirka 'macallinku' waxa uu ardayda xasuusinayaa waxyaabaha ugu muhiimsan. Tani waxa ay fududaynaysaa markaa shaqadaada waayo uma baahnid inaad casharro qorto adigu. Xilliga falanqaynta ama gorfeyntana uma baahnid inaad wacdin soo jeediso, laakiin waxa lagaa rabaa inaad ardayda ka caawiso fahanka iyo ku dhaqanka waxa ku qoran kitaabka.



## Waxaad tahay lataliye iyo saaxiib

Ardaydu waxay kuu arkayaan hagohooda. Waxaad tahay tusaalahooda, lataliyohooda iyo saaxiibkood. Si taxaddar leh ayay kuu fiirinayaan, tusaalahaaga ayaana ka muhiimsan aqoonta. Sida uu sheegay nin ka mida xerta oo reer Afgaanistaan ah, "Marka la i weydiiyo barashada Kitaabka... waxaan anigu diraaseeyaa qofka wax i baraya".

Xasuusnow in dadka wax baranayaa ay yihiin dad waaweyn oon carruur ahayn. Waxa ay leeyihiin waayo aragnimo badan oo ay kooxda la wadaagi karaan. Sidaas aawadeed, xilliga falanqaynta, iyaga su'aalo badan weydii. Waxaad weydiisaa fikirkooda iyo waayo aragnimadooda. Ka caawi inay iskood u fikiraan. Waxaad u noqotaa tusaale wanaagsan. Waxaad hubisaa inay toddobaad walba qabtaan dhaqangelinta. Tusaale wanaagsan u ahow. Daryeel iyaga oo una ducee. La wadaag farxaddooda iyo murugadoodaba. Marka dhibaatooyinku yimaaddaan, waxaad ka caawisaa inay u waajahaa si waafaqsan jidka Ilaah.

Saaxiibka la yeelo kulamo kale oo ka baxsan maalinta loogu talo galay casharka. Cunto wadaaga amaba wax kale oo madadaalo ah wada sameeya. Waxaad la yaabi doontaa sida ay wax uga baran doonaan tusaalayaashaada iyo sida aad wax uga fal celiso, sida aad ula tacaasho dhibaatada iyo sida aad dadka kale u cafido, dhaqamadaada iyo noloshaada qoysnimo.

## Xer samaysa xer kale

Buugga ama kitaabka barashadu ma samayn karo xerow. Xerta oo keliya ayaa samaysa xer kale. Qof ayaa adiga kaa caawiyay inaad noqoto xerowga Masiixa. Imika waa markaagii inaad adna xerow kale samayso. Maalmahan si aan hore loo arag oo kale ayaa dadka Muslimka ahi ugu imanayaan oo raacayaan Masiixa. Laakiin wacdin aanay ku jirin xer ka dhigis waxa ay keenaysaa midho yar. Ilaahay ha ku adeegsado si loo arko dad badan oo xera oo bata oo ka yimaadda Islaamka isla markaana raaca Ciise Masiix.

# Sida loo hoggaamiyo cashar walba

## Intaan la kulmin horteed

1. Ugu yaraan labo cisho ka hor maalinta casharka, waxaad diyaarisaa casharka adigoo u diyaarinaya sidii aad tahay arday. Waxaad qortaa su'aalaha jawaabahaaga aad ka bixisay adigoon soo gaabsanaynin.

2. Akhri 'Ujeeddooyinka' casharka laga leeyahay. Ujeeddooyinka aan soo jeedinay tusaale ahaan waxa laga helayaa sanduuqa ugu sarreeya ee dhinaca bidix ee cashar kasta bilowgiisa. Tusaale ahaan halkan waxa ku sugan ujeeddooyinka casharka 9:

| **Casharka 9: Sababaha Silica/cadaadiska** | |
|---|---|
| **Waxa laga rabo barte kasta:**<br>a. Hubi inaanu jirin wax inaga sooci kara jacaylka Ilaah.<br>b. Fahan in silicu uu dhici doono laakiin Ilaah wanaaggeena u adeegsado.<br>c. Baro inaad xikmad yeelato si aad uga hortagto silica aan loo baahnayn.<br>d. d. Xafid 1 Butros 2:21. | **Fahanka dhaqanka:**<br>• La talinta xerta Muslimka kasoo jeeda ee silcaya<br><br>**Diyaari:** warqado ku qor aayadda Rooma 8:36 (ee su'aasha12) |

Dhammaanba ujeeddooyinkani waxa ay xubnaha u hayaan waxay qabtaan usbuucan::

- 'hubi' waa fikir.
- 'fahan' waa qayb ka mida aqoonta;
- 'baro inaad xikmad yeelato' waa xirfad lagu dhaqmo;
- 'xafid' waa si wanaagsan oo ereyga Ilaah lagu geliyo qalbiyadooda iyo noloshooda.

3. Marka xigta, akhri hagaha casharkan. Waxaan ku siinay hagitaan faahfaahsan oo tallaabo tallaabo kuu caawin kara. Dooro su'aalaha falanqaynta ee ku tacalluqa ardaydaada. Marka danbe eed waayo aragnimo dheeraada yeelatana, waxaad diyaarsataa su'aalahaaga kuu gaarka ah ee ku salaysan hadba sida ay tahay baahida kooxdaadu iyo ujeeddada aad ka damacsantihiin casharka.

4. Akhri 'Fahanka dhaqanka' ee casharka, gaar ahaan haddii aanad aqoon u lahayn dhaqanka Muslimka.

5. Diyaari waxyaalaha lagu dhex xusay sanduuqa haddii aad rabto inaad firfircooni waxbarasho oo dheeraada qorshayso.

6. ugu danbaynta, u ducee xubin walba oo ka tirsan kooxda. Ilaah weydiiso inuu kaa dhigo lataliye wanaagsan.

## Kulan kasta dhexdiisa

1. Soo dhawee dadku markay yimaaddaan. Haddaad doonto kusoo dhowee cabitaanno.

2. Raac tallaabooyinka ku hoos xusan 'furitaanka' si aad kulanka u bilowdo. Tusaale ahaan, casharka 9 waa sidan:

### Furitaan

**U ducee casharka. Dib-u-eeg dhaqangelintii toddobaadkii hore:** Maxaad qabatay si aad bulshada ugu adeegto amaba qof baahan amaba qof amar leh? Sidee qofkii kale arrintaas uga jawaab celiyay?

**Casharka 9 shaqo ama barasho guri:**

**Su'aasha 1:** oo wuxuu idinkaga tegey masaal inaad tallaabooyinkiisa raacdaan (1 Butros 2:21).

**Su'aasha 2:** 1) dunida, necebtay; 2) Ilaah, silic; 3) fal nacasnimo; 4) tallaabooyinka Masiixa

**Hordhaca casharka maanta:** Mawduucu maanta waxa uu ku saabsan yahay silica, waana mawduuc aad u adag. Waxa laga yaabaa in falanqaynteenu inaga ilmaysiiso markaynu maqalno dhaawacyo ina soo gaadhay. Laakiin Ilaah waxa uu silica u adeegsadaa xagga wanaagga, isaga ayaana bogsiin kara xanuunkeena markaan arrimahan ka hadalno.

Waxa muhiim ah inaan dib u muraajacayno dhaqangelintii usbuucii lasoo dhaafay. Tani waxay ardayda tusinaysaa in koorsadani aanay ahayn oo keliya in wax la barto balse ay tahay in la dhaqangeliyo wixii la bartay. Sidoo kale waxay ku tusinaysaa inay horumar xagga koritaanka xernimo ka samaynayaan inkasta oo weli ay hor yaallaan caqabado. Waxaad ardayda weydiisaa sida ay u dhammaystireen shaqada dhaqan gelinta laakiin weligaa dib ha u furin falanqaynta casharkii lasoo dhaafay waayo waxaad u baahantay inaad kan cusub falanqaysaan.

Ujeeddada 'muraajacada shaqada gurigu' waxa weeyi in ardaydu dhammayso isla markaasna xasuustaan qodabada ugu muhiimsan ee waxbarista. Haddii ardaydu ay koorsadan u qaadanayaan si aan habaysneyn, waxaad iyaga ka dalbataa inay buugaagta isku laabaan oo ka jawaabaan su'aalaha. Haddii koorsadan ay u qaadanayaan si nidaamsan, casharrada soo koobiyee oo diyaar imtixaan tijaabo ah oo arday waliba qaato. Imitixaanka waa la sixi karaa intaas kadib oo adiga ayaa sixi kara ama ardaydu iyaga ayaaba isu sixi kara.

3. Kadib hoggaami falanqaynta, adigoo isticmaalaya su'aalaha falanqaynta ee hore aad u dooratay. Haddii wakhti kaa yaraado, waxaad isku daydaa inaad dhammaystirto su'aalaha barashada loo doortay ama ka jawaabista shaqsi ahaaneed. Haddii aanad khibrad u lahayn nidaamyada falanqaynta kooxaha dhexdooda, waxaad akhridaa hagaha 'Hoggaaminta Falanqaynta Kooxda'. Su'aalaha koobsanaya barashada waxay wataan calaamad gaara.

**Akhri 1 Butros 1:3-7**

- Sida ku xusan aayadda 4, halkee dhaxalkeennu jiraa? *jannada*
- Weligii miyuu baaba'ayaa ama idlaanayaa? *Maya – lama mid aha dhaxalka adduunyada!*
- Sida ku xusan aayadda 5, maxaa ina ilaaliya wakhtigan? *Awoodda Ilaah*

4. Haddaad tahay lataliyaha maaha inaad wakhti badan hadalka ku qaadato. Waa in ardaydu inta badan hadasho. Waa in ardaydu inta badan hadasho. Marka la akhrinayo sadar ka mida buugga barashada ama aayado kamida kitaabka, waxa fiican in ardaydu akhrido oonad adigu akhriyin.

5. Kuwo ka mida su'aalaha falanqaynta waxa lagu qoray far jiifta si ay kuu caawiyaan, sida ka muuqata tusaalaha kor lagu xusay. Fadlan ugu horrayn isku day inaad ardayda ku dhiirri geliso inay ka jawaabaan

su’aalaha ka hor inta aanad adigu ka jawaabin su’aasha. Fartan jiifta sidoo kale waxa ay fikrad ka bixinaysaa waxyaabaha ku xidhiidha dhaqanka iyadoo kugu caawinaysa inaad xasuusnaato inta casharku socdo. Tusaale ahaan:

**Su’aasha 17:** Akhri sadarka labaad.

- Fikir noocee ah ayaad ka qabtaa su’aashan? *su’aasha ‘saxnaanta’ ama ‘qaladka’ jawaabtu waxa uu ku tiirsanyahay xaaladda la joogo. Qofka ku sugan xaalad khatar ahi waxa uu u baahanyahay inuu meel kale u guuro muddo wakhti ah. si kastaba ha noqotee, haddii aanay khatar ku sugnayn waxa habboon inay is ilaaliyaan ilaa inta xaaladdu ka hagaagayso. Waa inay isku dayaan inay u hoggaansamayaan qoyskooda inkasta oo ay raacsan yihiin Ciise Masiix.*

6. Casharrada qaarkood, waxaan kusoo darnay soojeedinno khuseeya barashada amaba muuqaalo  daawasho ah. Waxa kuwan lagu calaamadiyay calaamad kubada oo kale (bidix). Firfircoonidan meesha looga baahdo diyaargarow, waxa lagu muujinayaa qaybta ‘diyaari’ ee casharka cinwankiisu sanduuqa uu ku jiro dhexdiisa. Haddii aad hayso muuqaallo kale ama waxyaale kale oo gacan ka gaysan kara barashada fadlan nala soo socodsii.

7. Dhammaadka, waxaad raacdaa tallaabooyinka ku dhex xusan sanduuqa si aad uso xidho kulanka. Tusaale ahaan, halkan waxa ah sanduuqa gunaanadka ee casharka 9:

| ***Gunaanad*** | |
|---|---|
| **Addeecista waxbarista maanta:**<br>• Noloshaada saamayn noocee ah ayuu casharka maanta ku yeelan doonaa?<br>• **Wada akhriya dhaqangelinta casharka.** Ardaydu waxay wada isticmaali karaan qaab isku mida si ay uga baaraa degaan wixii ay barteen oo ay maalin walba hal aayad ugu cibaadaystaan. | **Wada ducaysiga:** dadka weydii inay si kooban u wada ducaystana, oo ay Ilaah uga mahadceliyaan ballanqaadyadiisa marka silica xooggani jiro. U ducee xerta kale ee silicu haysto gaar ahaan kuwa raacsan Masiixa ee kasoo jeedo Muslimka. |

## Kulanka Dabadiis

1.diiwaan geli haddii kooxdaadu ay leeyihiin natiijooyin imitixaan ama xaadirinta ardayda kulanka kasoo qayb gasha. Sidoo kale waxa wanaagsan in natiijo lagu bixiyo a) dhammaystirka shaqada guri (gaar ahaan su’aalaha loogu talogalay falanqaynta kooxeed), b) wax ku kordhinta falanqaynta iyo c) qabashada dhaqangelinta. Xaaladaha qaarkood, waxay middani ardayda ka caawinaysaa inay feejignaan gaara u yeeshaan koorsada oo si fiican wax uga faa’idaan. Marar kalena, waxaaba laga yaabaa inay wanaagsantahay inaan laga dhigin wax nidaamsan.

2. Qiimee inaad falanqaynta si fiican u hoggaamisay. Waxaad is weydiisaa afartan su’aalood:

- “Miyaan hadal badanay?”
- “Dadka oo dhammi miyay ka qayb qaataan falanqaynta xitaa dadka kuwooda xishoodka badani?”
- “Su’aalahayga miyaa si cad loo fahmayay oo ma ahaayeen kuwo falanqaynta ku wanaagsan?”
- “Casharku ujeedadii laga lahaa ma gudbiyay oo ma ahaa mid waxtar u leh nolosheenna?”

Wixii kusoo mara wax ka baro oo isku day inaad usbuuc walba horumarin ku samayso meelaha aad ka liidato.

3. Ardayda u ducee inta usbuuc kasta dhexdiisa.

# Hoggaaminta Falanqaynta Kooxda

*Halkan waxa ah tacliimaad khuseeya sida loo hoggaamiyo falanqaynta kooxda haddii aanad hore waayo aragnimo ugu lahayn arrintaas.*

- Adigu in badan ha hadlin! Waa inaad weydiiso su'aalo, oonad bixinin muxaadaro. Dadka waaweyni sidan ayay jecelyihiin oo ay wax ku bartaan. Su'aalaha wanaagsani waa:

  - inay noqdaan kuwo si fudud loo fahmo

  - inay ahaadaan kuwo la xiriira casharka

  - inay ahaato su'aal falanqayneed oo furan(maaha inay xidhnaato oo jawaabtu noqoto 'haa' ama 'maya').

- Qof walba fursad u sii inuu ka qayb qaato falanqaynta. Dadka kuwooda hadalka badan ka dalbo inaanay in badan hadlin. Kuwa xishoodka badan ku caawi inaad weydiiso su'aalo fudud (dadka kalena ha u ogolaan inay su'aalaha iyaga la weydiiyay ka jawaabaan.)

- Haddii xubnaha kooxdu aanay fahmin su'aal gaara, adigu jawaabta su'aasha ha bixinin, balse isku day inaad su'aasha si kale u tidhaahdo.

- Ka ilaali inay falanqaynu ka leexato muhiimadda ama ujeeddada casharka.

- Haddii qof uu bixiyo jawaab qaldan amaba aan muhiim u ahayn falanqaynta, qofkaas ha ku odhanin 'waad qaldantahay'. Taas beddelkeeda, weydii dadka kale iyana waxa fikirkoodu yahay. Sida caadiga ah iyaga ayaa jawaabta fiican laga heli karaa. Ama waxaad odhan kartaa, 'waad ku mahadsantahay jawaabtaada, waanan qadarinaynaa, laakiin dhinacan kalena wax ma ka eegtay?'

- Cashar walba dhinaca dhaqangelinta muhiimmadda ka raac, si qof waliba uu meesha wax uga barto ugana dabaqo noloshiisa.

- Xubnaha kooxda u ogolow inay su'aalo ku weydiiyaan. Haddii aanad jawaabta garanaynin, u sheeg inaad isku dayi doonto helista jawaabta intaan la kulmin usbuuca xiga ka hor. Sidan ayay kugu qadarinayaan oo way ka fiicantahay inaad iska dhigto mid jawaabta garanaya. Hubi inaad ballanqaadka oofiso oo aad kulanka xiga la timaaddo su'aasha lagu weydiiyay jawaabteeda.

- Marka ay noqoto in la akhriyo aayad ama qayb ka mida Kitaabka Quduuska ah amaba buugga barashada, waxaad xubin ka mida kooxda ka dalbataa inuu akhriyo. Waxa ay middani iyaga jaanis u siinaysaa inay si buuxda uga qayb qaataan casharka. Sidoo kalena waxay middani kuwa xishoodka badan ka caawinaysaa inay ka qayb qaataan falanqaynta.

Haddii aad adeegsaneysaan luqado kala duwan, waxa fiican in marwalba luqad gaara lagu akhriyo, amaba tan afka Ingiriisiga ayaa mar la wada akhriyi kadibna ardayda ayaa jaanis loo siin inay luqadohooda ama afafkooda ku akhriyaan.

# Xer-ka-dhigista dadka asalkoodu kasoo jeedo Islaamka

*Haddii aanad waayo aragnimo u lahayn xer-ka-dhigista dadka asalkoodu Islaamka kasoo jeedo, gaar ahaan haddaad waddamada Galbeedka joogto, fadlan akhri bogaggan.*

Ciise Masiix waxa uu ku baaqayaa in quruun walba iyo dhaqan walba xer laga dhigo. Si kastaba ha ahaatee, tan macneheedu maaha in dadka la baro dhaqanka Masiixiyiinta reer Galbeedka. Dhaqan waliba waxa uu leeyahay wax uu ku wanaagsan yahay iyo wax uu ku xunyahay. Dhammaanteen waa inaan ogolaano in ereyga Ilaah uu iftiimiyo meelaha uu dhaqankeennu ka indho la'yahay meelkastaba aynu kasoo jeedno ee. Tusaale ahaan, ma waxa kitaabi ah oo kitaabka waafaqsan in sida reer Galbeedka loo labisto mise sida reer Bariga? Ma waxa fiican in gacmeheenna aan wax ku cunno mise inaan isticmaallo qaaddooyin? Ma waxa fiican in gacmeheenna ana kor u fiiqno markaan ducaysanayno mise inaan sacabbada gacmaha kor u jeedinno? Ma waxa fiican inaan kelinimada ku dhaqano mise inaan wax wadaagno? Ma waxa fiican inaan daryeelno oo keliya inta aan dhalnay iyo xaaskeenna mise qaraabada oo dhan? Dhammaanba dhaqammadan markaan eegno Ilaah waxa uu soo dhoweynayaa kala duwanaanshaha dhaqammada, waxaana jira waxyaabo badan oon ka baran karno dadka asalkoodu kasoo jeedo Islaamka.

Si kastaba ha noqotee, ereyga Ilaah waxa uu dhalliilaa dhinacyo ka mida dhaqanka markasta oo denbiga aadanuhu saameyn ku yeesho dhaqanka. Xernimadu waxa ay koobsanaysaa barashada in la qiimeeyo daacadnimada oo ka horreysa karaamada iyo sharfista, in la cafiyo kuwa in dhaacaca, in fikir saxa laga haysto jinsiga kale, iyo in Ilaah marwalba muhiimadda la siiyo go'aan walba oo ku salaysan nolosheenna. Kuwan iyo waxyaalo kaleba waxa ay ka yimaaddaan isku dhexjirka shaqsiyadda qofka iyo dhaqanka. Sideed ku ogaan kartaa waxyaabaha khuseeya saaxiiibbadaa? Waxaad ku ogaan kartaa inaad waqti la qaadato iyaga ood dhegeysato isla markaana u ducayso. Waxaad wax ka weydiisaa waxyaalaha lasoo dersa noloshooda iyo kuwa qosykooda. Xasuusnow in dadku ay kala duwan yihiin, waxaanad wax ku ogaan kartaa inaad iyaga wax su'aasho.

Dhaqammo badan oo dunida Islaamka ka jiraa waxyaalo badan ayay wadaagaan. Laakiin xasuusnow in sidoo kale ay kala duwanyihiin. Baakistaanta, Carabta iyo Iiraaniyiintu isku mid maaha! Xitaa dhaqammadaas dhexdooda waxa jira kala duwanaansho u dhexeeya qabaa'ilka iyo beelaha kala duwan ee ay ka koobantahay bulshadu. Sidaas aawadeed, saaxiibkaa weydii dhaqankoodu sida uu yahay. Waxa ay dhaqankooda ku jecelyihiin iyo waxa aanay ku jeclayn. Mararka qaar marka ay aqbalaan Masiixa waxa dhacda inay diidaan oo dafiraan dhaqankoodii hore. Laakiin caafimaadkooda maskaxeed waxa uu ku jiraa inay la falgalaan qaybo ka mida dhaqankoodii hore kan cusubna ay ku dhex dhafaan, halkii ay gebi ahaanba dhaqankooda ka guuri lahaayeen.

Sidoo kale isku day inaad ogaato caqabadaha iyo dhibaatooyinka waajaha dadka xerta ah ee aslant kasoo jeeda Islaamka. Arrimaha guud ahaan lasoo dersa marka ay raacaan Masiixa waxa ka mid ah:

- Inay ka tagaan hoygoodii hore, qoyskii iyo dhaqankii. Tani waxay horseedi kartaa inuu qofku dareemo *cidlo* iyo *aqoonsigiisii* oo luma.
- Xubnaha qoyskiisa oo *cadaadis iyo silic* kula kaca. Waxa ay tani horseedi kartaa in qofka la *diido oo la dayriyo*.
- *Ceeb* iyo fadeexad bulshadiisa uu ugu dhex noolaado.
- Iimaankiisa Masiixiyadda oon yeelanin *hannaan nidaamsan* marka loo eego Islaamkii uu kasoo tegay oo lahaa dariiq cad oo la raaco.
- Masiixiyiinta oo ay ka dhex waayaan *bulsho* la mida tii ay Islaamka dhexdiisa ku haysteen.

Xerta kasoo jeedda Islaamka ee ku nool dalalka Galbeedka waxa laga yaabaa inay waajahaan dhibaatooyin ka sahlan kuwaas aan soo xusnay laakiin caqabado kale ayaa ka hor yimaadda. Tusaale ahaan, marka dadka muhaajiriinta ah ee Muslimka ahi ay noqdaan Masiixiiyiin iyagoo jooga dalalka Galbeedka, waa inay la tacaalaan ka guuritaanka labo aqoonsi oo ah kan ku yimid dhaqankan cusub ee ay soo dhex galeen iyo kan la xidhiidha Masiixiyiinta ay noqdeen.

Arrimahan daraaddood, koorsada *Kaalay Isoo Raac* waxa lagu saleeyay 1 Butros, iyadoo si gaara diiradda loo saarayo su'aalaha la xidhiidha aqoonsiga. Waxa uu barayaa inaynu nahay 'dadka Ilaah doortay', oo ah kuwa agtiisa qaali ku ah isla markaasna ah xubno ka mida Maisixa jidhkiisa.

Koorsadan guusheedu waxa ay ku xidhantahay oo fure u ah fahanka qisooyinka dadka. Haddii aad tahay Lataliyaha waxay kuu suurogelin doontaa fahanka farxadda iyo murogooyinka ay waajahaan dadka Masiixa raaca ee kasoo jeeda Islaamka. Sidoo kale waxay kuu suurtogelin doontaa inaad isku xidho agabka koorsada iyo nolosha dadka aad xerta ka dhigayso. Intaas waxa dheer, waxa uu kuu suurtogelinayaa inaad fahanto sababta ay koorsadani usoo qaadatay mawduucyada ay ka hadlayso, sida tusaale ahaan silica iyo cadaadiska oon inta badan ka muuqanin koorsooyinka kale ee xer ka dhigista loo adeegsado. Inaad cunto ama cabitaan wadaagtaan kulanka hortiis ama dabadiis iyana sidoo kale waxay kuu suurogelinaysaa inaad kalsooni iyo saaxiibtinimo ka kasbato dadka oo ay qisadooda kula wadaagaan.

Ugu danbayn, koorsadani waxa ay ku saabsantahay daryeel. Jacaylku waxa uu sameeyaa saameynta ugu weyn. Jacaylku waxa uu qariyaa qaladaad badan oo dhaqanku leeyahay! Jacaylka macnihiisu waxa weeyi inaad diyaar noqoto saaxiibkaa marka ay dawakhaan ee dhaawacu soo gaadho. Waxa uu ka dhiganyahay inaad soo dhoweyso marka ay u boholyoobaan qoysaskooda. Waxa uu ka dhiganyahay inaad ku wada xidhiidhaan tilifoonka oo farriimo is dhaafsataan oo aydaan ku koobnaanin oo keliya kulamada foolka foolka ah iyo is weydaarsiga iimaylada. Mid ka mida xerta asalkoodu kasoo jeedo Islaamka ayaa waxa uu yidhi, 'reerkayagii waxaan uga tegay inaan raaco Masiixa, oo taas beddelkeedana waxaan helay kulammo!'

Waxa la rajaynayaa in agab dheeraada oo lagu tabobaro xerta kasoo jeedda Islaamku uu soo bixi doono. Sidoo kale waxa ay noqon karaa kuwo kuwo dhinac kasta loo adeegsan karo. Fadlan wixii faahfaahina ee dheeraada nagalasoo xiriir comefollowmecourse@gmail.com.

**Koorsooyinka kale ee laga yaabo inay ku caawiyaan:**

**Ugu horrayn Saaxiibtinimo (Friendship First)** waa DVD ka kooban lix qaybood iyo koorso falanqayn ah oo Masiixiyiinta ka caawinaya inay xiriir saaxiibtinimo la sameeyaan Muslimka kadibna ay helaan kalsooni ay kula wadaagsan wax ku saabsan Masiixa. Dadka aan wax fahana ka haysanin Islaamka, koorsadani waxay siinaysaa fahan asaasi ah oo ku saabsan Islaamka iyo sida loogu jawaabo Muslimiinta, waxaanu sidoo kale caawinayaa dadka adeegsanayaa koorsada Kaalay Isoo Raac. Eeg: friendshipfirst.org

**Ku Biiridda Qoyska (Joining the Family)** isna waa DVD ka kooban lix qaybood iyo koorso falanqayn ah oo Masiixiyiinta ka caawinaya inay soo dhoweeyaan, taageeraan oo ay wax ka bartaan dadka aslan kasoo jeeda Islaamka. Waxbaristu waxay koobsanaysaa 25 waraysi oo muuqaala isla markaana laga duubay dad asal ahaan kasoo jeeda Islaamka iyo khubaro kala duwan. Koorsadu waxay raacaysaa nidaamka ah waraysiyo muuqaala oo ay la socdaan hagista falanqayn kooxo yaryar. Qayb kastaa waxay ku dhammaanaysaa waxbarasho dhaqan gelin ah oo la samaynayo intaan la kulmin usbuuc ka hor. Faahfaahin intaas dheer ka daawo joiningthefamily.org .

# Dhaqanka iyo Ereyo Muslimku Isticmaalaan

## Isticmaal kooban oo ah ereyada Muslimka

Ardaydu si ay u fahmaan fikirad cusub, waxa arrintaas gacan ka gaysan karta isticmaalka ereyo ay hore u yaqaaneen. Tani waxay ka caawinaysaa inay isbarbar dhigaan ereyadii ay hore u yaqaaneen iyo kuwan imika. Sidoo kale waxa ka caawinaysaa Masiixiyiinta inay farriinta Masiixiyadda Muslimiinta ugu sharraxaan si fudud oo ay fahmi karaan oon ku ahayn wax ku cusub.

Sidaas aawadeed, si kooban ayaa koorsadani u adeegsanaysaa ereyo Muslimiintu isticmaalaan si ay u noqoto bar-bilow ka caawisa dadku inay fahmaan waxbarista Masiixiyadda. Tusaale ahaan marka aan ka hadlayno shariicada Masiixa, waxay ardayda ka caawinaysaa inay dib u eegaan shareecadii Islaamka ee ay yaqaaneen isla markaana u garawsadaan sida ay uga duwantahay sida cusub ee ay u addeecayaan Masiixu inuu yahay Saydikooda.

## Qaamuuska ereyada

Ereyadan soo socda ee Carabida ah waxa lagu dhex xusay koorsadan. Fahan fiican oo ku saabsan Islaamka isla markaana laga qoray xagga Masiixiyadda waxa laga heli karaa buugaagta *Friendship First* oo uu qoray Steve Bell, iyo sidoo kale *Cross and Crescent* oo uu qoray Colin Chapman.

| | |
|---|---|
| *Duco* (cutubka 5) | ducada |
| *Xaj Hajj* (cutubka 20) | xashka |
| *Xalaal Halal* (cutubka 15) | xalaasha |
| *Injiil Injil* (cutubka 1) | Injiilka Ciise |
| *Jinni Jinn* (cutubka 18) | jinka |
| *Kaafir Kafir* (cutubka 2) | gaal |
| *Kalima* (cutubka 1) | kalimada |
| *Murtad* (cutubka 2) | murtad- qof diinta ka baxay |
| *Janno* (cutubka 1, 9, 20) | jannada |
| *Qibla* (cutubka 20) | qiblada ama jihada |
| *Salaad* (cutubka 5) | salaadda |
| *Sawm* (cutubka 17) | soonka |
| *Shahada* (cutubka 13, 20) | ashahaadda |
| *Shariica* (cutubka 17) | shareecada |
| *Shirki* (cutubka 3) | shirkiga |
| *Sunnah* (cutubka 17) | sunnada, gaar ahaan sunnada Muxammed |
| *Tawraat* (cutubka 4) | kitaabkii Muuse |
| *Ummah* (cutubka 7,14) | ummadda muslimka |
| *sabuur* (cutubka 6) | Sabuurrada |
| *sakat* (cutubka 17) | sakada |

Shanta 'tiir Islaam' ee lagu sheegay cutubka 20, waa shanta tiir ee Islaamku ku qotomo waana shahaadada; salaadda oo la oogo; soonka; sakada iyo xashka oo la booqdo qofkii kara hal mar nolosha.

### Arrimaha dhaqanka ee Muslimiinta

Badanaa casharrada koorsadan waxa la qoray iyadoo arrimo la xiriira dhaqanka maanka lagu hayo. Waxa arrimaha lagu sharraxay hagaha lataliyaha ee cashar kasta. Si kastaba ha noqotee, xasuusnow in dadku aanay isku wada mid ahayn, waana inaad fiiro gaara u yeelato kooxda aad tababarka siinayso.

# Su’aalaha Badanaa La-is-weydiiyo

## Luqadehee ayuu ku diyaarsanyahay buugga barashadu?

Koorsadani waxa lagu tarjumay afafka Ingiriisida, Jarmalka, Carabida, Dari, Faarisi, Bengaali, Ruushka badhtamaha Aasiya, sidoo kalena waxa tarjumaaddoodu socotaa afafka Urduuga, Amxaariga iyo Bashtuuga. Warbixinta afafka la xidhiidha ka eeg come-follow-me.org iyo sida lagu iibsan karo afafka diyaarka ah oo dhan.

## Sidee buugga barashada looga heli karaa dalalka kala gedisan?

Bogga come-follow-me.org ayaa laga dalban karaa daabacaadda buugga oo la gaadhsiin karo meelkasta adduunka. Waxa jirta meelaha qaarkood oo si maxalli ah looga daabacay, sida afafka Jermalka, Carabida iyo Dari oo diyaar ku ah lagana dalban karo Orientierung:M ee dalka Jarmalka. Macluumaadka arrintaas la xidhiidha waxa lagala socon karaa bogga internetka.

## Buugga Malaga heli karaa internetka ama ma lasoo dejisan karaa?

Buugga barashada looguma tala galin inuu noqdo wax laga akhristo oo keliya. Waxa weeyi bug loogu talo galay in lagu shaqeeyo oo ay ardaydu ku hawlgalaan falanqayntana kaga qayb qaataan jawaabohooda. Barashada sidan ah ee firfircoon ayaa ka waxtar badan akhrin oo keliya.

Sababtan awgeed, ma jiro qorshe buuggan lagu gelinayo internetka. Waxa dhici karta in laga fikiro mardanbe qaab isagoon bug ahayn wax loogu qori karo. Si kastaba ha ahaatee, Hagaha Lataliyuhu waxa uu ku diyaarsanyahay boggeenna waana lasoo dejisan karaa.

## Koorsadu ma ku habboontahay dadka aan waxba qorin waxna akhriyin?

Si marka loo eego, koorsadan qaabkeedu waa hadal waayo qaybta ugu muhiimsan waa in falanqayn lagu qaato. Sidoo kale dadka aan waxna qorin waxna akhriyin waxay xafidi karaan aayadaha loogu talo galay xifdinta, waxay daawan karaan oo falanqayn karaan sawirada, sidoo kalena waxa ay samayn karaan qaybta loogu talo galay dhaqangelinta.

Si kastaba ha ahaatee, waxbarashadu uma baahna xirfadda akhrinta iyo qoraalka. Haddii ay jiraan arday aan waxba akhriyin ama akhrisku ku adagyahay, waxaad raacdaa tallaabooyinka:

- Qofkasta oo ka mida dadkan waxaad u raadisaa qof kooxda ka tirsan oo caawiya. Waa inta aan wax la bilaabin ka hor inay casharka soo akhriyaan oo qofka aan waxba akhriyin laga caawiyo fahanka waxbarista. Marka kulanka lagu jirana ha wada fadhiistaan oo qofka caawinayaa ha ka caawiyo kan aan waxba akhriyin la socoshada casharka iyo hadba halka la marayo. Qofka caawinayaa wax uu noqon karaa qof qoys ah amaba shaqsi kaleba.
- Xasuusnow in dadka aan waxba akhriyin ee kooxda ka tirsani ay dadka kale ee wax akhriya kala mid yihiin xagga waayo-aragnimada nolosha. Fikirkooduna waa mid ku fadhiya qiime weyn. Hubi inay dhammaan dadku ka wada qayb qaataan falanqaynta si ay wax uga wada faa’idaan.

## Koorsadu ma waxay si toosa uga hadlaysaa Islaamka?

Buugga barashadu Islaamka si cad ugama hadlayo. Sababtu waxa weeyi arrimo la xiriira xagga ammaanka, maadaama oo asal ahaan loo qoray dad ku dhex nool dal Islaama oo waxkasta oo dhaleecaynaya Islaamka uu mamnuuc ka yahay naftoodana halis gelin karo. Sidoo kale ujeeddadu maaha Islaamka ee waa raacista Ciise iyo waxbaristiisa. Si kastaba ha ahaatee, koorsadu waxay ka hadlaysaa arrimo soo food saara dadka xerta ah ee asalkoodu ahaa Muslimka. Sidoo kale waxa jira ereyo kooban oo Muslimku isticmaalaan laguna dhex xusay buugga si ay u fududeeyaan fahanka, sdia lagu sharraxay qaybta’ Dhaqanka iyo Ereyo Muslimku Isticmaalaan’.

Hagahan Lataliyuhu waxa uu si toosa uga hadlayaa Islaamka si uu hago lataliyayaasha aan aqoonta badan u lahayn Islaamka maadaama oo aanay jirin halis arrintan iyaga kaga iman karta. Si kastaba ha noqotee, waxaan ka fikiri karaan soo saarista daabacaad ku habboon meelaha ay dhibaatada keeni

karto soo hadal qaadista Islaamku. Fadlan ila soo xidhiidh haddii aad u malaynayso in daabacaaddaas loo baahanyahay.

# Codsi Jawaab Celin

Waxaan aad ugu mahadcelinaynaa dadka koorsadan isticmaalay ee aragtidooda kasoo dhiibtay isla markaana wax ku kordhiyay daabacaaddan labaad Hagaha Lataliyaha. Waxaan soo dhoweynaynaa talobixinta dheeraadka ah iyo fikirrada wax ku kordhin kara daabacaadaha mustaqbalka iman doona. Fadlan isku day inaaad ka jawaabto su'aalahan loogu talo galay jawaab celinta oo noogu soo dir iimayl ahaan.

1. Su'aalaha falanqaynta kuwee u baahan wax ka bedelid, sidee se wax looga bedeli karaa?
2. 'fahanka dhaqanka' kuwee wax laga bedeli karaa ama wax lagu kordhin karaa?
3. Ma jiraan hagitaan dheeraada oo lagu kordhin karo mawduucyada koorsadan?
4. Tarjumaadda Kitaabka ee afka Ingiriisiga ma waxa u fiican tarjumaadda New International Version mise New Living Translation?
5. Muuqaalo noocee ah ayaad usoo jeedin lahayd waxbarashada casharradan?
6. Tusaalayaal noocee ah oo ka mida dhaqanka Islaamka ama daraasaynta xaalad gaara oo la xiriira xerta asalkoodu kasoo jeedo Muslimka ayaad soo jeedin lahayd inuu ku habboonyahay koorsooyinka mustaqbalka?

***Fadlan taladaada kusoo dir comefollowmecourse@gmail.com. mahadsanid!***

Tim Green

comefollowmecourse@gmail.com

come-follow-me.org

# Kaalay Isoo Raac

## Hagaha La-taliyaha

**Daabacaadda labaad, 2017**

## Qaybta B: Tilmaanta Casharka

**Tim Green**

# Kulan Isbarasho

| Waxa laga rabo barte kasta: | Diyaari: |
|---|---|
| a. Ku faraxsanow koorsada oo xil iska saar dhammaystirka barashada shaqsi ahaaneed ee usbuuc kasta.<br>b. Fahan sida looga shaqeeyo casharada guriga lagu baranayo ee dersi kasta.<br>c.bixi lacagta buugga koorsada amaba ballanqaad inaad lacagta dhiibayso usbuuca soo socda. | Soo hel Hanuuniyaa waxbarasho ee arday kasta. |

## *Furitaan*

**Tacliimaad:** haddii kooxdu cusub tahay, qof walba weydii inuu is baro dadka. Waxa ay wax ka sheegi karaan noloshooda, shaqadooda iyo tan qoyskooda haddii ay habboon tahay. Si kastaba ha noqotee, waa caadi haddii dadka qaar ay door bidaan inaanay naftooda faahfaahin ka sheegin ilaa inta ay kalsooni ka qabayaan kooxda.

**Duco furitaan ah:** Ilaah weydiiso inuu idinka caawiyo sidii aad uga wada faa'idaysan lahaydeen koorsadan.

## *Sharrixista Koorsada Kaalay Isoo Raac*

### "Maxay?" – Waxa ay koobsanayso koorsadu

**Buugga barashada:** barte kasta waxaad siisaa buugga barashada.
*Waxa habboon inay lacagta buugga badh bixiyaan si qiimo dheeriya uu ugu yeesho. Laakiin adiga ayaa ikhtiyaar u leh inaad lacag weydiiso iyo in kale. Dadka aan waxba akhriyin amaba akhriska ku liita, eeg qaybta khuseysa arrintan ee 'Su'aalaha inta badan la is weydiiyo' ee hagaha la taliyaha qaybtiisa A.*

**Fur buugga waxbarashada ilaa bogga v:** tusmada kitaabka.

- Weydii qof ka mida kooxdu inuu akhriyo liiska mawduucyada buuggu ka kooban yahay.
- Dadku labo labo ha isu weydiiyaan mawduucyada midka ay aadk u xiisaynayaan iyo sababta? Kadib waa inay arrintan la wadaagaan kooxda oo dhan.

### "Sabab?" – ujeeddada koorsada

**Ujeeddooyinka koorsada:**

- Ujeeddada laga damacsanyahay koorsadani waa inaan ku korno Masiixa.
- Dhammaanteen waxbaan wada baranaynaa. Dhammaanteen waxaan rabnaa inaan Ilaah u dhowaano oo barano, isku hallayno isla markaana addeecno kana qayb qaadano ka mid noqoshada ummadda Masiixa.
- Sharrax:: "koox ka mida Afgaanistaaniyiinta qaatay koorsadani waxay yidhaahdeen, 'kitaabkani waxa uu ku wanaagsan yahay waa iyadoo dadka walaala ah, yar iyo weynba ay jaanis u helayaan inay dadka la wadaagaan fikirradooda, su'aalohooda, dhibaatooyinkooda iyo xanuunka ay soo mareen'. Middan ayaa ardayga ka dhigaysa inuu xiise gaara u qabo koorsadan iyaga oo furfurnaan la imanaya isla markaana la ducaysan kara kooxda dadka kalena u ducayn kara".
- Weydii: "miyaad diyaar u tihiin inaad sida kooxdaas Afgaanistaaniyiinta ah oo kale wax u wada barataan?"

### "Sidee?" – Qaabka koorsada

**Fur buugga barashada ilaa bogga iv** oo wada eega jaantuska.

- Sharrax: Koorsadani waxay isticmaalaysaa saddex qaab oo isku dhex dhafan usbuuc kasta:
    1. **Barashada shaqsi ahaaneed** Waxay inaga caawinaysaa xasuusashada iyo fahanka waxbarista;
    2. **Falanqaynta** waxay inaga caawinaysaa inaan soo bandhigno fikikeena iyo aragtiyeheena oo dadka kalena aan wax ka barano;
    3. **Dhaqangelinta** waxay inaga caawinaysaa inaan waxaan baranay ku dabaqno nolosheena.
- Maxay tahay ujeeddada laga rabo qayb kasta oo ah, barashada shaqsi ahaaneed, falanqaynta iyo dhaqangelintu?
  *Su'aashani waxay ardayda ka caawinaysaa inay fahman qaabka waxbarashadu u soconayso.*

**Fur buugga barashada ilaa bogga vi:** haga-tusaalaynta ardayga.

- Arday waliba waa inuu akhriyo hal jumlad.
- Weydii haddii ay jiraan wax aan la fahmin.

## Eegista cashaka 1

**Wada fura casharka 1:** B Ka Mid noqoshada Xerta Masiixa (bogga1).

- Akhi labada sadar ee ugu horreeya ee cinwaankoodu yahay 'ujeeddada nolosheena'. Sidoo kale akhri hadalka macallinka.
- Weydii waa maxay ujeeddada noloshaadu? *Falanqee. Ardaydu waa inay aragtidooda dhiibtaan. Adiga oo ah tababaruhuna waa inaad aragtidaada la wadaagto ardayda.*
- Qof ha akhriyo su'aasha 2 iyo jawaabta. Tus dadka inay jawaabta ka raadiyaan casharwalba dhammaadkiisa.

**Hubinta jawaabahaaga:**

- Buugga ayaa ah macallinkaaga. Tanina waa sababta uu jawaabaha cashar walba dhammaadkiisa kuugu siinayo, markaa waa inaad adigu hubiso jawaabahaaga. Laakiin tan macneheedu maaha inaad jawaabaha kasoo min-guuriso kitaabka! Ugu horraynta isku day inaad iskaa uga jawaabto kadibna hubi inay jawaabtaadu sax tahay iyo in kale.
- Marka jawaabtu leedahay, 'jawaab shaqsi ahaaneed' macneheedu waxa weeyi inanaay jirin jawaab sax ah waayo qof waliba waxa uu wataa aragtidiisa iyo afkaartiisa u gaarka ah.

**Su'aalaha falanqaynta:**

- Casharka 1 jawaabihiisa, jawaabtee ayuu siinayaa su'aasha 5 ama 13?

*'jawaab shaqsi ahaaneed.*

- Tan macneheedu ma waxa weeyi inaanad su'aasha waxba kaga jawaabin oo iyadoo bannaan aad ka booddo??

*Maya sidaa maaha! Qof waliba ha kaga jawaabo oo ha qoro aragtidiisa oo diyaar ha u noqdo inuu falanqaynta dhexdeeda kusoo ban dhigo aragtidiisa. Inta badan aradaydu way ka booddaa ka jawaabista meesha looga baahan yahay jawaabista shaqsi ahaneed waana midda sababtan in dadka aad loogu adkeeyo inay ka jawaabaan.*

- Maxay muhiim u tahay inaan qorno jawaabteena shaqsi ahaaneed oo meesha aynaan ka boodin iyadoo madhan?"

*Marka aan wax qorno waxay ka dhigantahay si qoto dheer ayaan uga fikiraynaa si wanaagsana waan u xasuusanaynaa. Sidoo kale waxaa diyaar inoo noqonaya wixii aan la wadaagi lahayn dadka.*

## Barashada guriga ama shaqsi ahaaneed

**Dhammaystirka barshada casharka usbuuc  kasta:**

- Inta ka horraysa kulanka danbe, dhammaystir inaad casharka 1 guriga si shaqsi ahaana uuga soo shaqayso.
- Dhammaadka, waxaad ka shaqaysaa Muraajada Casharka. Su'aalaha ku jira Muraajacada Casharku waa soo koobitaanka su'aalihii aad hore ugaga soo jawaabtay casharka dhexdiisa. Sidaas aawadeed, anagu kumaanaan siinin wax jawaabo ah ee waa kuwii hore uun. Haddii aad garan weydo jawaabaha, casharka dib u muraajacee.

## *Gunaanad*

<table>
<tr><td>

**Dhammaystirka kulanka is-barasho:**

- Weydii haddii uu jiro qof haya su'aalo dheeraad ah.
- Sharrax wakhtiga la kulmayo iyo goobta lagu kulmayo kulanka danbe.
- Xasuusi ardaydu inay kasoo shaqeeyaan casharka 1 ee buugga barashada ka hor intaan la kulmin usbuuca danbe.

</td><td>

**Wada ducaysta:**
Ilaah weydiista inuu midkiin kasta la hadlo usbuucan dhexdiisa marka aynu bilaabayno koorsadan.

</td></tr>
</table>

# Casharka 1: Ka Mid noqoshada Xerta Masiixa

**Waxa laga rabo barte kasta:**
a. Inuu ka fikiro inuu raacsanyahay Masiixa iyo in kale.
b. Haddii aanu weli hubin inuu Masiixa xertiisa ka mid yahay, inuu ogaado sida uu uga mid noqon karo.
c. Xafid Matayos 11:28.

**Fahanka dhaqanka:**
- Halka looga bilaabo xerta asalkoodu Islaamka kaasoo jeedo
- Xerta cusub iyo qiimaha xernimada

**Diyaari:** muuqaal loogu talogalay su'aalaha15-18.

## *Furitaan*

**U ducaynta casharka maanta.**
**Casharka 1 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**

**Su'aasha 1:** ku wada celceliya aayadda xifdinta loogu talo galay (Matayos 11:28). Markaad akhrido, maxaad dareemaysaa?
**Su'aasha 2:** Weydii waxa ardaydu ku qoreen buuggooda.
*Qof waliba markiisa ayuu ka jawaabi karaa. Ama waxay isku beddelanayaan buugaagta si qof waliba u hubiyo kan kale jawaabtiisu waxay tahay.*

**Hordhac u samee deriska maanta:** Maanta waxaan baran doonnaa sidii Ciise Masiix ugu yeedhay Simon Butros inuu isaga soo raaco, iyo sida innaguna aan sidoo kale u raaci karno Masiixa.

*Dadka u sharrax inaan wakhti loo hayn in su'aal walba la falanqeeyo. Laakiin waxaad ku dhiirri gelisaa inay su'aalaan wixii mugdi ka kalo ee aanay fahmin iyo wixii kale ee iftiimin u baahan.*

## *Falanqayn*

## Hordhca (iyo su'aalaha 1-2)

**Hordhac:**
Labo qof ka dalbo inay akhriyaan labada nin aragtida ay ka qabaan ujeeddada nolosha.

- Waa maxay ujeeddada noloshaadu?
  *Ujeeddada noloshaada marka ugu danbaysa la wadaag.*



## Ka mid noqoshada xerta Masiixa (Su'aalaha 3-4)

**su'aasha 3:** wada akhriya aayadaha ku jira sanduuqa.weydii:



- Qof dhacdadan dib ha uga sheekeeyo isagoo isticmaalaya ereyadiisa..
- Kasoo qaad inaad tahay Simon. Maxaad dareemi lahayd markaad aragto Ciise oo samaynaya mucjisooyinkan?
- Afar tallaabo oo noocee ah ayuu Butros qaaday si uu uga mid noqdo xerta Ciise?

*Dadka kalena wixii laga tago ha buuxiyaan.*

*Waxaad ka yaabi lahayd awooddiisa. Inaad denbiile tahay ayaad ogaan lahayd. In laguu yeedhayna faa'ido ayay noqon lahayd.*
*1. ka toobad keenka denbiga. 2. Fahanka qiimaha. 3. Isku hallaynta Masiixa.*
*4. Ku biirista ummadda Masiixa.*

## Tallaabada koobaad: Ka soo noqoshada denbiga (Su'aalaha 5-11)

**Su'aalaha 8-10:** akhri sadarka ugu horreeya ee su'aasha 8 kadibna eeg kaabaha 2.

- Laba qof ka dalbo inay akhriyaan hadallada Imraan iyo Shafiq. Labadooda midkee ayuu Ciise nadiifin doonaa? Waa maxay sababtu?

*Haddii wakhti jiro, ardayda u sheeg inay isu sharraxaan kaabaha 2.*

*Shafiq, waayo wuxuu ogyahay inuu Ciise u baahan yahay.*

- Aynu ka fikirno nafeheenna. Ma waxaynu la mid nahay Imraan mise Shafiq?
- Waa maxay farqiga u dhexeeya is-ciil-kaanbiga iyo toobad keenka dhabta ah?
- Sideen ku ogaanaynaa in Shafiq uu si dhaba u towbad keenay?

*Jawaab shaqsi ahaaneed.*

*Eeg su'aasha 9. Toobad keenku waa aadista jiho cusub iyo isbeddelka qaab nololeedka ku yimaadda..*

*Qaab nololeedkiisa ayaa is beddeli doona..*

## Tallaabada labaad: Fahan qiimaha (su'aalaha 12-14)

**Su'aasha 12:**

- Maxaad u malaynaysaa in Simon dareemay markuu ka fikiray qiimaha raacista Masiixa?
- Miyaad weligaa noloshaada ay ku soo martay doorasho noocan oo kale ah? miyaad weli go'aan qaadatay?

*Haddii ardaydu isku kalsoontahay, waxa ay sheegi karaan inay horeba u raaceen Masiixa iyo in kale.*

**Su'aasha 13-14:** Akhri ereyada Ciise Masiix ee sanduuqa ku dhex jira.

- Aragtidaada, maxay tahay macnaha qisadani xanbaarsantahay?
- Jawaabo noocee ah ayaad ka bixin lahayd su'aasha 13?
- Qiimahani miyuu u qalmaa in lagu raaco Ciise?
- Jawaab noocee ah ayaad u qortay su'aasha 14?

*,raacista Ciise waxay ku kici kartaa qiime weyn laakiin way u qalantaa. Waxay ka qaalisantahay luulka kiisa ugu qiimaha badan!*

*Waxa uu bixiyay qiime kasiii weyn.*

## Tallaabada saddexaad: Masiixa ku kalsoonow (Su'aalaha 15-18)

**Ciyaar ciyaarta kalsoonida:** *waxa ay tani ku habboonaan kartaa dadka qaarkood iyo da'doodu kolba sida ay tahay, laakiin dadka oo dhan kuma wada habboona. Hubi inay middaasi ardaydaada ku habboontahay iyo in kale. Ama youtube ka daawo muuqaal ku saabsan Charles Blondin,.oo su'aalana iska weydii.*

- xubnaha kooxda isu raaci labo labo isku miisaan iyo isku dherer ah, sidoo kalena u kala saar lab iyo dheddig. Qof waa uu dhacayaa qofka kalena wuu qabanayaa. Qofka dhacayaa waa inuu kasii jeesto kan qabanaya isagoo isa sii daynaya iskuna hallaynaya kan qabanaya ee ka ilaalinaya inuu dhulka ku dhaco.
- Qofka dhacayaa waa inuu kan qabanayaa weydiiyo inuu diyaar yahay kadibna dib isu rido isagoo jidhkiisu qumman yahay. Marka uu isa sii daayo kan qabtaha ahi waa inuu qabto inta aanu dhici ka hor.
- Haddana ha is beddelaan.

**Isku hallaynta qabtaha:**

- Maxaad dareemaysaa markaad si buuxda isugu hallayso qabtaha?
- Ciise oon isku hallaynaa waxay la mid tahay isku hallaynta qofkaas ina qabanaya een isku hallaynayno. Waxa laga yaabaa in ugu horraynta ay cabsiyi jirto laakiin markaan aragno inuu ina qabanayo waxa dhacaysa inaan isku hallayno.

**Su'aasha 16:** Akhri saddexda tusaale ee la bixiyay. *Ilme daalay, qof bukaana iyo rakaab.*

- Maxay saddexdan qof kale isugu halleeyaan? *Waayo waxay u malaynayaan in qofka kale uu yahay mid la isku hallayn karo.*
- Ciise sidoo kale ma isugu hallayn karnaa? *Haa, isaga ayaa cid walba ka aaminsan.*
- Maxaynu isugu hallaynaynaa inuu inoo qabto? *Tusaale ahaan. Inuu denbiyadeenna inaga cafiyo, inuu nolosheena soo booqdo, inuu ina siiyo awood aan wanaag ku samayno, inuu ina dhawro oo ina hanuuniyo, si bad qabtana inagu geeyo jannada.*
- Xasuuso wixii aad dareentay markii aad samaynaysay ciyaarta dhicitaanka. Sidaas oo kale noloshaada oo dhan ma ugu aamini kartaa Ciise? *Jawaabo shaqsi ahaaneed.*

## Tallaabada afraad: Ku biir Masiixa ummaddiisa/bulshadiisa (Su'aalaha 19-20)

**Suaa'sha 20:** Akhri ereyada macallinka.

- Saddex kooxood oo noocee ah ayuu macallinku sheegay?
- Dadkan midkee ayaad adigu ka tirsantahay?



*Kuwo hore u raacay Masiixa,kuwo u diyaara inay raacaan Masiixa, iyo kuwo ka fikiraya inay wakhti dheeraada qaataan.*

*Adiga ayaa go'aanka haddii aad dadka hortooda ku sheegayso iyo haddii aad ka aamusayso.*

| Gunaanad | |
|---|---|
| **Addeecista waxbarista maanta:** Farqi noocee ay ayuu casharka maanta kuu samaynayaa? **Wada akhriya dhaqangelinta casharka.**<br>• Miyaad leedahay saaxiib aad hawshan wada wadaagtaanDo?<br>• Dhammaystir casharka 2 ka hor usbuuca soo socda. | **Wada ducaysta:**<br>Ilaah ugu mahadnaqa inaan isaga si shaqsi ahaana ugu garan karno Masiixa. |

# Casharka 2: Nolosha Cusub ee Masiixa ku Jirta

**Waxa laga rabo barte kasta:**
a. Ku farax nolosha cusub ee Masiixa ay ku heleen.
b. xafid 2 Korintos 5:17.
c. Fahan inaan helayno aqoonsi cusub, dhalasho cusub iyo dabeecad cusub.
d. ku dadaal inaad dagaal ruuxi ah la gasho dabeecadihii hore.

**Fahanka dhaqanka:**
- Jihaadka
- Rakcadaha salaadda

**diyaari:**
muuqaal haddii la heli karo loogu talo galaysu'aasha19.

## *Furitaan*

**U ducee casharka maanta. Muraajacee dhaqangelintii usbuucii hore:**
- Qof ha akhriyo dhaqangelinta casharka 1.
- Si taxader leh middan ma uga fikirtay? Goor dhow ayaan falanqaynta kaga wada hadli doonnaa arrimahan.

**Casharka 2 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**

**Su'aasha 1:** a) cusub; b) dad la doortay
**Su'aasha 2:** hore, cusub
**Su'aasha 3:** jawaab shaqsi ahaaned *hubi in ardaydu buuggooda kaga wada jawaabeen*
**Su'aasha 4:** Masiix, cusub, hore, cusub

**Hordhac u samee mawduuca maanta:** Maanta waxaan wada baran doonnaa nolosha cusub ee Sayid Ciise Masiix ina siiyo. Tani waxay koobsanaysaa aqoonsi cusub, nolol cusub iyo dabeecad cusub. Taasi waa arrin farxad leh!

## *Falanqayn*

### Hordhac iyo su'aalaha 1-4

**Su'aalaha 1-4:** Wada akhriya 1 Butros 1:1-2. *Haddii ardaydu aanay haysanin Kitaabka Quduuska ah waxaad usoo daabacdaa aayadaha la akhrinayo.*

- Yaa warqaddan qoray iyadoo Ilaah hagayo? *Rasuul Butros. Waa isla Butroskii aan kusoo baranay casharka 1.*
- Ereyo noocee ah ayuu Butros ku tilmaamay dadka warqaddan loo qoray? *'dadka Ilaah doortay' (kuwo la doortay) laakiin 'kala firidhsan',oo ah 'qariib', kuwaas oon weli hoygoodii joogin.*
- Inaad qariib noqoto ood dhulkaagii hooyo ka fogaato waa dareen sidee ah? *jawaabo shaqsi ahaaneed. Eeg su'aasha 3.*

### Aqoonsigeenna cusub (Su'aalaha 5-7)


**Su'aasha 5:** akhri su'aasha oo dhan.
- Weligaa miyaa laguugu yeedhay gaal (*kaafir*) ama murtad? Maxaad dareentaa marka sidaa lagu yidhaa?
- Laakiin waa maxay aqoonsigeenna cusub een Ilaah ka haysano?
- Waa dareen noocee ah in la noqdo "dadka Ilaah doortay"?

*Waa weerar guud ahaan lagu qaado dadka asalkoodu kasoo jeedo Islaamka.*

*Waa cajiib, gaar ahaan haddii bulshadeennu ina diiddantahay.*

### Dhalashadeenna cusub (Su'aalaha 8-13)

**Su'aasha 8:** Eeg sawirka diirta iyo balanbaalista
- Marka diirtu balanbaallis noqoto, ma waxay sii ahaataa sideedii mise way is beddeshaa?
- Sidee middani ula mid tahay nolosha cusub een Masiixa ku haysano?



*si marka loo eego waa isla xayawaankii, laakiin waxa ku timid wax u eeg dhalasho cusub waxaana ku yimid is beddel iyadoo imika xitaa duuli karta.*
*Si marka loo eego waxaan nahay dadkii hore, laakiin is beddel ruuxi ahaaneed oo weyn ayaa inagu yimid. Isbeddel waxa uu ka muuqanayaa nolosheenna waxaynuna galaynaa nolol cusub oo uu hoggaanka u hayo Ruuxa Ilaah.*

**Su'aasha 11:** Akhri aayadda sanduuqa ku dhex qoran (1 Butros1:3)

- Kuwa Masiixa raaca yaa siiya nolol cusub?
- Muxuu sidan u sameeyaa?
- Maxay noloshan cusubi ina siisaa?

*Ilaaha ah Aabbaha Sayidkeenna Ciise Masiix. Nimcadiisa iyo naxariistiisa awgeed. Rajo nool. Waxaan ku kalsoonaan karnaa nolosha cusub een Masiixa ku haysano. Waxay sii soconaysaa xitaa markaa dhimano.*

**Su'aasha 12:** akhri waxa dhaqtarku u sheegayo oo saddex qof ka dalbo inay akhriyaan jawaabaha.

- Ka fikir inuu dhakhtarku yahay sida Ciise, oo uu dhalasho cusub siinayo kuwa xagga ruuxda ka buka.
- Bukaanka A waa qof noocee ah?
- Bukaanka B waa qof noocee ah?
- Bukaanka C waa qof noocee ah?
- Sideen u helnaa dhalashada ruuxiga ah ee cusub?



*A: Waa qof rumaysan Masiixa balse ka baqaya inuu raaco.*
*B: Waa qof aan gebi ahaanba rumaysnayn Masiixa.*
*C: Waa qof rumaysan waxa Masiixu bixiyo oo isku halleeyo noloshiisana u dhiiba Ciise.*
*Sida bukaanka C, inagoo isku hallaynayna waxaynu ku odhanaynaa 'fadlan kusoo dhowow noloshayda'. Eeg su'aasha13*

**Su'aasha 13:** Akhri sadarka. *Dadka intii aan tallaabadan qaadan ku casuun inay si gaara kuula sheekaystaan.*

## Dabiicaddeena cusub (Su'aalaha 14-16)

**Su'aalaha 14-15:** Arday kala duwani ha akhriyaan faallooyinka kala duwan ee sanduuqa ku jira.

- Inagu sidaynu nahay, sidee dareenkeenna iyo dabeecaddeenu isu bedeshay intaan raacnay Masiixa? Maxaad ku qori lahayd su'aasha 15? *Ardayda xasuusi inay qoraan jawaabohooda shaqsi ahaaneed si ay dadka kale ula wadaagaan. Ardayda aan weli Masiixa raacini su'aashan kama jawaabi karaan laakiin waxay aragti ka dhiiban karaan isbeddelka ay ka dareemeen qof raacay Masiixa.*
- Kulanka dhamaadkiisa, Ilaah ugu mahadnaqa isbeddeladan uu nolosheena ku keenay.

## Dagaalkeenna ruuxiga ah (Su'aalaha 17-20)

**Su'aalaha 17-18:** Eeg sawirada ka muuqda su'aasha 18.

- Dadka keebaa muujinaya dabeecaddoodii hore? Kuwee muujinaya dabeecaddooda cusub?
- Dabiicadihii hore kuwoodee ayaad loollan kula jirtaa weli?
- Akhri aayadda ku dhex jirta sanduuqa ee su'aasha 17. Maxaynu samaynaa si aan uga adkaano dabeecaddiinii hore?



*Hugii hore iska dhig, oo kan cusub qaado– sida dharka loo beddelo oo kale.*

**Su'aasha 19**: akhri masaalka beeralayda.

- Maxay riyuhu metelaan?
- Sideed u quudisaa rida madow?
- Maxaad samayn lahayd si aad rida cad uga dhigto mid xoog badan?

*ikhtiyaar: Waxaad daawadsiisaa muuqaalka ri madow iyo mid cad oo dagaallamaya haddii la helayo. Ka raadi Youtube ama booqo* *http://www.youtube.com/watch?v=HG24G-dGzrQ* *Lataliyuhu, isna waa inuu dadka la wadaago waxyaabaha uu loollanka kula jiro. Sharrax in middani ay tahay dagaal joogto ah.Ilaah Ruuxiisa ayaa inagu dhex jira oo ina siiya awood aan ku guulaysano. Filiboy 4:13.*

**Wada xafida oo ku celceliya aayadda xafidista:** *Su'aasha 20 waxay leedahay aayaddu*
Haddii qof Masiix ku jiro waa abuur cusub, oo waxyaalihii hore way idlaadeen bal eega, wax waliba way cusboonaadeen e! (2 Korintos 5:17)

## *Gunaanad*

| **Addeecista waxbarista maanta:** Wada akhriya dhaqangelinta casharka. | **Wada ducaysta:** |
|---|---|
| • Muxuu dersiga maanta noloshaada kusoo kordhinayaa?<br>• Wada barashada shaqsi ahaaneed. Waxa fiican usbuuc walba inaad timaaddo adoo casharka hore usoo akhristay. | Ilaah ugu mahadnaqa isbeddelka uu inagu keenay, oo weydiiso inuu inaga caawiyo sidii aan maalin walba u dagaallami lahayn dagaalka ruuxiga ah. |

# Casharka 3: Ilaaha Aabbaha ah

| Waxa laga rabo barte kasta: | Fahanka dhaqanka: |
| --- | --- |
| a. Ku farxista Ilaah oo Aabbe loogu yeedho.<br>b. Sharraxista fudud ee sababta Masiixiyiintu Ciise ugu yeedhaan Wiilka Ilaah.<br>c. Xafidista 1 Yooxanaa 3:1.<br>d. Fahanka Ilaaha Aabbaha ah jacaylkiisa iyo ku dayashada jacaylkaas. | • Ilaah oo loogu yeedho 'Aabbe<br>• Dhowaanshaha Ilaah<br><br>**Diyaarin:**<br>Qasiido dhegeysi oo ku saabsan jacaylka Aabbaha ama muuqaalka 'warqadda jacaylka Aabbaha' gunaanadka barnaamijka. |

## *Furitaan*

**U ducee casharka maanta. Muraajecee dhaqangelintii toddobaadkii hore:** Miyaad la dagaallantaa saddexdii dabeecadood ee xumaa eed hore u dhaxashay? Sidee arrintani kula tahay? Maxaa caqabad kugu ah? Wax horumara ma samaysay?

**Casharka 3 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**

**Su'aasha 1:** a) Aabbe; b) Aabbe **Su'aasha 2:** a) Run; b) Run; c) Run
**Su'aasha 3:** Jacayl weyn, oo Ilaah inagu mannaystay, carruurta Ilaah, ayaynu nahay.

**Hordhac u same mawduuca maanta:** Muslimku waxay u malaynayaan in Ilaah oo lagu baro looguna yeedho Aabbe inuu yahay ay tahay shirki! Laakiin xagga ruuxiga marka la eego arrintani waa suurogal. Faa'ido weyn ayaanay inoo tahay haddii aynu nahay Masiixiyiin.

## *Falanqayn*

## Ciise waxa uu Ilaah ugu yeedhay 'Aabbe' (Su'aalaha 3-9)

**Su'aasha 4:** Akhri aayadaha ku dhex qoran sanduuqa.

- Imisa jeer ayaad goobaabtay ereyada 'Wiil' iyo 'Aabbe'?
- Muslimku maxay u diidaan magacyada Aabbe iyo Wiil?

- *Waa in Wiil uu noqdo 4 jeer, Aabbena 4 jeer.*
- *Waxay u malaynayaan in Masiixiyiintu ay baraan in Ilaah xidhiidh galmo sameeyay si uu wiil u dhalo. Laakiin tan xitaa Masiixiyiintu way kasoo horjeedaan oo waa gaf.*

**Su'aasha 6:** Waxaan aragnay sida Axdiga Hore ugu adeegsaday ereyga 'wiil' dad gaara oo xidhiidh dhow Ilaah la lahaa, iyagoo dabeecadihiisa muujiyay ama amarkiisana wax ku amray.

- Aayadahan dhexdooda ereyadii tilmaamay in Ciise xidhiidh dhow Ilaah la leeyahay?
- Kuwee tilmaamay in Ciise Masiix uu Ilaah la wadaago sifooyinkiisa?
- Kuwee tilmaamaya in Ciise Masiix uu wato amar la mid kan Ilaaha Aabbaha ah?

- *'Aabbuhu wuxuu jecelyahay Wiilka waxaanu tusaa waxkasta oo uu sameeyo'.*
- *'Waxkastoo Aabbuhu sameeyo Wiilkuna wuu sameeyaa'.Sida Ilaah nolosha u bixiyo ayaa wiilkuna u bixiyaa'.*
- *'Ku kastoo aan murweynin Wiilku aabbaha soo dirayna ma murweeyo.' 'oo isaga waxa uu siiyay amar uu wax ku xukumo'.'*

**Su'aasha 7:** Akhri sadarka koobaad.

- Ma xasuusan kartaa tusaale dhaqankaaga ku salaysan oo qofku 'wiilkayga' ugu yeedho qofkale iyadoo aanay taasi tusinaynin dhalmo jidh ahaaneed?

**Su'aasha 8:** Akhri sadarka koobaad.

- Muxuu Ciise sheegtay ee tusinaya inuu dabeecadda Ilaah oo kale leeyahay?

*'Ku kastoo aniga I arkay Aabbahana wuu arkay'.*

Akhri inta ka hadhsan su'aasha 8. *Labo labo u qaybi dadka. Qof ha iska dhigo Masiixi, oo kan kalena ha metelo qofaan Masiixi ahayn, kadibna kan Masiixiga ahi qofka kale saddex daqiiqo ha u sharraxo sababta Ciise loogu yeedho 'Wiilka Ilaah'. Haddana labada qof ha is bedelaan oo hadana kan kale ha sharraxo isna markiisa.*

## Inaguna Ilaah waxaan ugu yeedhi karnaa Aabbe (Su'aalaha 10-18)

**Su'aasha 11:** Akhri 1 Yooxanaa 3:1 iyo sadarka ugu horreeya su'aasha 11.

- Ciise waxaan ugu yeedhi karnaa Wiilka Ilaah. Falanqeeya tallaabada weyn een qaadayno markaan Ilaah ugu yeedhno Aabbe, innagoo Masiixa u marayna.
- Maxay tahay sababta aan Ilaah ruuxi ahaan ugu yeedhi karno Aabbe?

*Waayo Ilaah Ciise awgiis oo ah 'walaalkeena weyn' ayuu ruuxi ahaan inooga dhigtay carruur.*

### Dhaqangeli aayadda xafidaadda ee 1 Yooxanaa 3:1.

- Erey walba ku war warqad gaara oo isku dhex filiq ama is dhex geli.
- Ardayda weydii inay sida saxda ah isugu habeeyaan iyagoo dusha xafidaya aayadda.
- Kadib ka saar 2 ama 3 warqadood oo aayadda akhri markale.
- Ku celceli ilaa ardaydu aayadda oo dhan dusha ka akhriyaan iyagoon warqad ka eegaynin.

**Su'aasha 12:** Akhri su'aasha oo dhan.

- Muxuu yahay farqiga u dhexeeya jacaylka aabbeheena aadanaha ah iyo jacaylka Ilaaha Aabbaha ah?
- Ilaah marwalba miyuu ina jecelyahay, mise wuxuu ina jecelyahay marka aan wanaagsanahay oo keliya?
- Carruurteena miyaynu hadiyo jeer jeclaanaa mise waxaan jeclaanaa markay wanaagsan yihiin oo keliya?

*Aabbayaasheena dunidu waxa laga yaabaa inay inagu jeclaadaan horumarka aan samayno laakiin Ilaah marwalba wuxuu inagu jecelyahay waxaan nahay.*
*Hadiyo jeer.*
*Hadiyo jeer.*

**Su'aasha 13a:** Cidina xidhiidh wanaagsan oo buuxa lama laha aabbohooda dunida.

- Ma ka hadli kartaa sida uu aabbahaa ahaa markii aad yarayd eed koraysay?

*Dadka ku dhiirrigeli inay la wadaagis sameeyaan, laakiin dhug u yeelo in dadka qaar ay leeyihiin xasuuso hore oon wanaagsnayn isla markaana aanay doonayn inay ka hadlaan amaba ay sharfi waayaan aabbayaashood.*

**Su'aasha 13b:** Akhri sadarka labaad iyo sadarka saddexaad ee su'aasha 13.

- Miyaan ka cabsoonaa in Ilaah uu noqon doono sida aabbaha aadanaha ah ee wiilkiisa dhulka jiida?

*Ka caawi ardaydu inay si daacadnimo leh uga hadlaan cabsiyaha ay qabaan. Kadibna ku dhiirrigeli in Ilaah aanu weligeen hoos inoo dhigi doonin! Waxa uu ballanqaaday, 'weligiin idinka tegi maayo oo weligiin idin dayrin maayo' (Cibraaniyada 13:5).*

**Su'aalaha 14-15**: Akhri sanduuqa su'aasha 15 (Luukos 15:20-24)

- Waa maxay waxa la yaabka leh ee ku jira qisada aabbaha ee Ciise tilmaamay?
- Qisadan dhexdeeda maxaad u malaynaysaa in Ciise inagu barayo?

*Waxa uu soo dhoweeyay wiilkiisii ku keenay sharaf dhaca weyn.*

*Ilaah waa sida aabbahaas deeqsiga ah. wuu ina soo dhoweeyaa oo ina cafiyaa xitaa marka aan isaga magaciisa meel uga dhacno!*

**Su'aasha 16:** Akhri qisada Nazir ee sanduuqa dhexdiisa.

- Ma jiraa midkeen ay la kulmay waxa Nazir la kulmay oo kale?
- Muxuu yahay farqiga u dhexeeya Nazir aabbihii iyo aabbeheenna samada ku jira?

*Waxa laga yaabaa inana hadda la diidin balse la diidi doono marka hadhow qoysku ogaado rumaysadkooda ku saabsan Masiixa.*

*Aabbeheena samada ku jiraa weligii inama diidi doono!*

**Su'aasha 18:** Akhri su'aasha oo dhan. Si wada jira ugu celceliya aayaddan Sabuurka ka midka ah. **'Inkastoo aabbahay iyo hooyaday I dayriyaan, Rabbigu wuu I aqbali doonaa.'**

| ***Gunaanad*** | |
|---|---|
| **Addeecista waxbarista maanta:** Farqi noocee ah ayaa casharka maanta uu noloshaada ku samayn doonaa?<br>**wada akhriya dhaqangelinta casharka.**<br>• Ma leedahay saaxiib aad shaqadan si wada jira u wada qaban kartaan?<br>• Halkaa kasii wad barashada aad guriga ku samaynayso! | **Daawo:** 'Warqadda jacaylka aabbaha' oo afaf kala duwan looga heli karo youtube.<br>**Ama Heesa:** qasiido ku saabsan jacaylka aabbaha.<br>**Wada ducaysta:** Ilaah uga mahadnaqa inaan isaga si ka badan sida aadana isugu hallayn karno iyo in isagu markasta inagu soo dhoweynayo gacmo furan xitaa haddii waalidkeennu ina diidaan. |

# Casharka 4: Masiixa oo lagu addeeco xoogga Ruuxiisa

| Waxa laga rabo barte kasta : | Fahanka dhaqanka: |
|---|---|
| a. si buuxda ugu addeec Rabbiga camal iyo hadalba.<br>b. xafid 1 Butros 1:15.<br>c. Tusaale ka bixi Saddexmidnimada.<br>d. Ku ducayso inuu Ruuxa Quduuska ahi kaa buuxsamo. | • Fahanka Saddexmidnimada<br>• Waaqdhaca iyo axdiga<br>• Xernimada iyo fikirka suufiyada<br>• Muslimiinta, Ruuxa Quduuska ah iyo malak Jibriil<br><br>**Diyaarin:** si aad tusaale u bixisio. Bekeeriyo, dhagaxaan yaryar oo wasakhaysan, joog biyo ku jiraan. |

## *Furitaan*

**tusaalaha ku bilow:** *biyaha ku shub koob ay ku jiraan dhagxaan wasakhaysan.*

- *Yaa raba biyahan? Waayo? Dib ayaynu arrintan ka falanqayn doonnaa.*

*Koobka biyaha wasakhaysani ku jiran dhinac iska dhig. Imikan diyaar oo biyo ku shub koob nadiif ah.*

**U ducee casharka usbuucan. Muraajacee dhaqangelintii toddobaadkii hore:** sideed ciyaalka ugu muujisaa jacayl shuruud la'aan ah? Sideed jacaylkaa u dhaqangeliisaa?

**Casharka 4 muraajacada shaqada guriga:**
**Su'aasha 1:** a), b), c) iyo d) waa wada sax **Su'aasha 2:** b)
**Su'aasha 3:** kan kuu yeedhay waa quduus, ee quduus ahow. (1 Butros 1:15) **Su'aasha 4:** b)

**Hordhac ka bixi mawduuca maanta:**
Waxaan baran doonnaa sida Sayid Ciise iyo Ruuxiisu nolosheenna uga shaqeeyaan. Sidoo kale waxaan baran doonnaa sida Wiilka, Aabbaha iyo Ruuxa Quduuska ahi ay isugu yihiin hal Ilaah oo run ah.

## *Falanqayn*

### Sida Masiixu uga shaqeeyo nolosheenna (Su'aalaha 2-6)

**Su'aasha 4:** akhri sadarka ugu horreeya.

- Ereyga 'axdi' muxuu la macno yahay?
- Sidee Ilaah axdi inoola dhigtaa?
- Haddii Ilaah inaga dhigtay dadkiisa tani maxay inooga dhigan tahay?

Akhri sadarka labaad

- Maxay jumladdani inooga dhigantahay?

*Axdigu waa wacad la galo oo jebintu ka mamnuuc tahay. (eeg su'aasha. 3)*
*Dhiigga Masiixa ee daraaddeen loo daadiyay. Ilaah axdiga dhiniciisa kama jebinayo, inaguna waa inaynaan jebinin. Waxaynu nahay dadkiisa uu doortay.*
*U hoggaansanaateena Masiixu waa inay weli kasta sida loogu hoggaansamo ka xoog badato, waayo Masiixu waxa uu inoo qabtay ayaa ka weyn cid walba!*

**Su'aasha 5:** Eeg saddexda sawir.

- Keebaa muhiimsan: in Sayid Ciise lagu addeeco ficilkeena, mise ereyadeenna, mise fikirradeenna? *Saddexduba waa muhiim oo waa inaan midna laga tegin!*
- Masiixu ma waxa uu kugu caawiyay inaad isaga ku addeecdo fikirrada, mise ereyada, mise camalka?

### Sida Ruuxa Quduuska ahi uga dhex shaqeeyo nolosheenna (Su'aalaha 7-12)

**Su'aasha 8:** Akhri sadarka labaad.

- Sida Kitaabka Quduuska ahi barayo, waa ayo Ruux a Quduuska ahi?
- Intii aad raacday Masiixa, Ilaah joogitaankiisu ma ka duwanyahay sidii uu hore ku ahaa noloshaada dhexdeeda? Fadlan waaya aragnimadaada la wadaag.

*Waa joogitaanka shaqsi ahaaneed ee Ilaah uu dunida ku dhex joogo isagoo si gaara uga dhex shaqeeya kuwa raacay Masiixa.*

**Su'aasha 11:** Akhri sadarka koobaad.

- Jawaab noocee ah ayaad siisay qaybta a) waa maxay sababtu?
- Jawaab noocee ah ayaad siisay qaybta b) waa maxay sababtu?



*a) Sida saynisku dhigayo, cadceedda ma dareemi karno haddii aanu jirin shucaac ama kulayl.*
*b) Haddii Ilaah aanu soo diri lahayn Wiilkiisa, maynaan ogaaneen waxa uu yahay. Haddii aanu soo diri lahayn*

- Sidee tusaalayaasha deriskani kuu caawinayaan?

*Ruuxiisa, nolosheenna kamaynu dareenneen joogitaankiisa.*

**Fahanka Saddexmidnimada:** Akhri 1 Butros 1:2-9.
*Aayadahani waxay ina tusinayaan sidaan u dareemi karno Saddexmidnimada Ilaah inkasta oo aynaan si buuxda u wada fahmi karin.*

- aayadaha 2 & 3, muxuu Ilaaha Aabbaha ah, Ilaaha Ruuxa ah iyo Ilaaha Wiilka ahi inoo qabteen?

*Aabbuhu: wuu ina yaqaanay, wuu ina doortay, wuxuu ina siiyay dhalasho cusub Ciise dhiiggiisaa ina rusheeyay. Ruuxiisu quduus buu inaga dhigaa, markaan addeecno Wiilka.*

- Aayadda 5, maxaa inta aynu noolnahay dhulka guudkiisa inagu dhawra?

*Xoogga Ilaah.*

- Aayadda 6, sidee ayaynu imtixaanka iyo dhibaatooyinka uga fal-celin karnaa?

*Waa inaan faraxno.*

- Inkastoo Ilaah aynaan si buuxda ugu fahmi karin Saddexmidnimada, sidee ayaynu isaga u dareennaa? (v.8-9)

*Waan jecelnahay, waan rumaysanahay, waxa inaga buuxda farxad aan la carrabaabi karin, waxaan helaynaa badbaadada nafteenna..*

**Su'aasha 12:** Akhri sadarka hore oo koobsanaya qodobaynta.

- Ilaa imika, waxyaalahan liiska ku jira muxuu Ruuxa Quduuska ahi kaaga suurogeliyay inaad qabato?
- Ruuxa Ilaah inuu nolosheena ka dhex shaqeeyaa ma lagama-maarmaanbaa mise waa wax la dooran karo?

## Ruuxa Quduuska ahi wuxuu inaga dhiga quduus (Su'aalaha 13-16)

**Tusaalihii sii wad:** *koobka dhagxaantu ku jirto qaad oo dheh:*

- Qofna ma rabo inuu cabbo biyahan wasakhaysan! Sida koobkan oo kale, haddii nolosheenna uu denbi ka buuxo sida dhagxaantan wasakhaysan oo kale, waxaan u baahanay in la ina nadiifiyo.
- Maxaynu samayn karnaa si aan koobkan u nadiifino? *Dhagxaanta oo laga saaro, koobka oo lagu dhaqo biyo nadiif ah isla markaana lagu shubo biyo nadiifa.*

**Su'aasha 14:** Akhri su'aasha oo dhan.

- Maxaad u malaynaysaa inay ka dhigantahay quduusnaantu? Tusaale ka bixi.

*Si buuxda quduus in loo noqdo waxay ka dhigantahay in Ilaah oo kale la noqdo! Tusaale ahaan, Fikirradeenu waa nadiif, dadka kale waan dhisnaa, khalad ma samayno iwm.*

**Su'aasha 15:**

- Heer intee leeg ayaan hiigsanaa?

*Heerka Ilaah rabo- waa inaan quduus ahaano maadaama isba uu quduus yahay.*


- Dadku sida Ilaah oo kale quduus ma u noqon karaan?

*Maya, kartideena middaasi inooguma suurtowdo. Diimo badan, dadka kuwooda ugu dadaalka badan ayaa ugu niyad jab badan marka ay denbiga ku dhacaan.*

- Markaan eegno waxaan hore usoo akhrinay, yaa quduus inaga dhiga?

*Ruuxa Ilaah ayaa quduus inaga dhiga, (aayadda. 2). Sida biyaha nadiifta ah u nadiifiyaan koobka wasakhda ah oo kale ayaa inagana Ruuxu inoo nadiifiyaa.*

**Su'aasha 16:** xafid aayadda ku jirta sanduuqa (1 Butros 1:15) oo ku ducaysta in Ilaah Ruuxiisa Quduuska ah idinka buuxiyo.



## Ruuxa Quduuska ahi nolosheennuu buuxiyaa (Su'aalaha 17-20)

**Su'aasha 20:** akhri su'aasha 20 oo dhan. *Tusaale ku bixi sadarkan adigoo isticmaalaya koobabkii iyo biyihii. Isticmaal joog biyo ah iyo koobab oo u hoos dhig taray si biyaha burqanayaa ugu dul daataan.*

Ilaah Ruuxiisa ayuu inaga buuxiyaa marka aan ducaysano een isaga u dhowaanno maalin walba. Mararka qaar buuxsanaantu si kedis ah ayay ku timaaddaa marmarna qunyar bay u timaaddaa. Waxa uu inagu amrayaa inaan maalin walba raadinno ka buuxsanaanto Ruuxa!

# Gunaanad

| **Addeecista waxbarista maanta:** | **Wada ducaysta:** Imika waa xilligii ay ku habboonayd in Ilaah u qirano uu nolosheena ka nadiifiyo denbiga ina nijaasaysanaya. *Dadka sii jaanis ay sidan ugu sameeyaan aamusnaan. Waxaad middan tusaale ugu bixin kartaa dhagxaantii wasakhaysnaa.* Ilaah weydiiso inuu Ruuxa Quduuska ahi ina nadiifiyo, inaga dhigo quduus oo maalin walba ina buuxiyo. |
|---|---|
| • Muxuu casharka maanta noloshaada kusoo kordhin doonaa?<br>• **Wada akhriya dhaqangelinta casharka.**<br>• Haddaad haysato Kitaabka Quduuska ah, soo qaado usbuuca soo socda.<br>*Hadday suurtogal tahay, ardayda aan Kitaab haysanin ku caawi inay helaan nuqul ka mida Kitaabka Quduuska ah oo afkooda ku qoran.* | |

# Casharka 5: La hadlitaanka Ilaah

| **Waxa laga rabo barte kasta:** | **Fahanka Dhaqanka:** |
|---|---|
| a. Karti u yeelo inaad maalin walba Ilaah la hadasho.<br>b. fahan in salaaddu ay tahay sida Ilaah loola hadlo.<br>c.baro in ducada ama salaaddu koobsanayso qirashada denbiga, Ilaah oo loo mahad naqo iyo weydiisasho.<br>d. Xafid baryada Rabbiga. | • Waxbarista ku aaddan baryada<br>• Baryada Suufiyada<br>• Muslimiinta, salaadda iyo weysaysiga<br>• Samaynta liis duco<br><br>**Diyaari:**firfirconida (suaa'sha.14), warqad ama kaadhadh, qalimo, maqas, musbaar xabag leh. |

## *Furitaan*

**Wada ducaysta. Muraajeceeya dhaqangelintii usbuucii hore:** Miyaad isugu ducayseen in Ilaah uu kaa buuxiyo Ruuxiisa Quduuska ah? Sideed u aragtaa in maalin walba Ruuxa Quduuska ahi noloshaada uga dhex shaqaynayo?

**Dib u eeg aayaddii xifdinta ee usbuucii hore (1 Butros 1:15):** Qof waliba dib dusha ha uga akhriyo.

**Casharka 5 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**
**Su'aasha 1**: a) **Su'aasha 2:** raalligelin, mahadin, codsasho.
**Su'aasha 3:** si joogto ah u ducayso **su'aasha 4:** Baryada Rabbiga sida su'aasha 14.

**Hordhac u same mawduuca maanta:** eeg sawirka ka muuqda su'aasha 1. Ilaah waxa uu la mid yahay sida boqor weyn. Muxuu inaga inoo dhegeystaa? *Waayo isagu waa Aabbeheenna ku jira samada ee jecel inuu dhegeysto carruurtiisa!*

## *Falanqayn*

## Ilaah oo Loola Hadlo sidii Aabbe oo kale (Su'aalaha 2-5)

**Su'aasha 3:** Akhri sadarka koobaad.

- Maxaynu ugu baahanay dhexdhexaadinta awliyada iyo inay Ilaah inoo soo dhoweeyaan? *Waxaynu nahay carruurta Ilaah ee ruuxiga ah, waxaynuna xaq u leenahay inaan inagu isaga shaqsi ahaan ugu dhowaanno iyadoon cid kale loo baahanin!*

**Su'aasha 4:** Akhri sadarka koobaad.

- Su'aalahan kuweebaa sax ah eed ka dooran lahayd? *Ilaah waxkasta waan kala hadli karnaa!*
- Maxaa kugu adag inaad Ilaah kala hadasho? Waa maxay sababtu?

## Tukasho ama baryada shaqsi ahaaneed (Su'aalaha 6-10)

**Su'aasha 9:**

- Maxay dadku u tukadaan? Maxay dadku Ilaah u baryaan? *Tusaale ahaan, dadku waxay u tukudaan salaadda inay ajir helaan, waxayna u ducaystaan baahi gaara.*
- Waa maxay hadafkeenna ugu weyn ee ducadu? *Inaan Ilaah xidhiidh dhow ana la yeelano.*

**Su'aasha 10:** Akhri sadarka ugu horreeya iyo sanduuqa qoraalka ku dhex jira (1 Butros 1:8).

- Miyaad weligaa dareentay farxaddan aan la qiyaasi Karin? Sided u dareentay?
- Dadka qaar waxay isku dayaan inay Ilaah dhowaanshihiisa ku helaan dikriga, laakiin inagu sideen Ilaah ugu dhowaan karnaa? *Ciise Masiix laftiisa ayaan ugu dhowaan karnaa. Isagu waxa weeyi jidka loo mari karo Ilaaha Aabbaha ah!*

## Si joogto ah u ducayso (su'aalaha 11-13)

**Su'aalaha 12-13:**

- Maxay 1 Tesaloniika 5:17 inagu amraysaa? *Inaan si joogto ah u barino Ilaah.*
- Sidee middan loo dhaqan gelin karaa? *Ilaah Ruuxiisa awgiis ayaan maalin oo dhan kula joogi karnaa, eeg xigashada su'aasha 13. Ama tusaale kasoo qaado ahaaday nolosha ardayda.*
- Liiska ku qoran su'aasha 13, keebaad ka dooratay?
- Waxa ka mida liiska 'ka hor cunto kasta'. Miyaad middan dooratay haddii xaaladdu kuu saamaxayso? *Waa dhaqan wanaagsan oo la samayn karo. Laakiin dadka ku dhex nool*
- Akhri hadalka dhammaadka su'aasha 13.

*Muslimku waxa laga yaabaa inaanay jaanis u helin.*

## Baryada Rabbiga (Su'aalaha 14-15)

**Barashada Baryada Rabbiga:** Ciise xertiisu waxay weydiiyeen: "Na bar sidii aan u ducaysan lahayn". Waxa uu iyaga markaas baray baryada Rabbiga. *Qof ka dalbo inuu akhriyo Matayos 6:9-13 qofkastana afkiisa ha lagu akhriyo. Kadib ardaydu warqad gaara ha ku qoraan jumlad kasta oo ka mida Baryada Rabbiga. Warqadaha isku dhex dhaf oo kadibna ardayda su'aal inay u habeeyaan sida ay jumladuhu u kala horreeyaan.*

Haddii dadka kooxdaada ka tirsani ay yihiin dad magangelyo doon ah, waxa laga yaabaa in la weydiiyo baryada Rabbiga inay akhriyaan markaa waxa u fiican inay dusha ka xafidaan.

- Baryada Rabbiga haddaan akhrino marar badan ma waxay ina siinaysaa faa'ido gaara?
- Luqadee ku fiican in lagu in Ilaah lagu baryo, Carabi, Ingiriisi mise afkaaga hoooyo?

*Maya! Sayid Ciise wuxuu yidhi, 'Goortaad tukanaysaan hadalka ha ku celcelinina sida dadka aan Ilaah aaminin yeelaan, waayo, waxay u malaynayaan in loo maqlayo hadalkooda badan aawadiis' (Matayos 6:7).*

*Dadka qaar baa yidhaa Carabidaa wanaagsan, laakiin afka hooyo inaan Ilaha ku barino ayaa fiican.*

## Cafis oo la weydiisto, mahadin iyo codsi (Su'aalaha 16-22)

**Su'aasha 15:** Baryada Rabbigu waxay koobsanaysaa saddex nooc oo baryada ah: cafis oo la weydiisto, mahadin iyo codsi. *Ardayda weydii inay Baryada Rabbiga kusoo koobaan saddex jumladood oo ka kooban saddexdan baryo. Waxaad ku dhejin kartaa saddexdan jumladood gidaarka amaba miiska dushiisa saar.*

**Su'aasha 17:** Akhri su'asha oo dhan.

- Sideen ku hubin karnaa in Ilaah denbigeena inaga dhaafayo markaan cafis weydiisano isaga?

*Waayo isagaa sidan ballanqaaday. 1 Yooxanaa 1:9 waxa uu leeyahay 'Haddaynu dembiyadeenna qiranno, isagu waa aamin iyo caadil inuu dembiyadeenna inaga cafiyo, oo uu inaga nadiifiyo xaqdarrada oo dhan.'*

**Su'aasha 20:** Wada akhriya Matayos 7:7-11.

*Ardaydu waxa laga yaabaa inay u baahdaan sidii aayadaha looga soo dhex heli lahaa Kitaabka. Casharka 6 waxa uu sharraxayaa sida loo raadiyo aayadaha Kitaabka Quduuska ah.*

- Aayadda 7, amar noocee ah ayuu Ciise ku bixiyay?
- Aayadda 7, ballanqaadyo noocee ah ayuu Ciise bixinayaa?
- Maxay tahay muhiimadda uu Ciise kaga hadlayo aayadaha 9-11?
- Tusaale ka bixi sida Ilaah u aqbalay salaaddiina.
- Maxaynu hadiyo jeer u heli weynaa waxa aynu rabno marka aynu ku ducaysano?

*Weydii, raadi, oo garaac.*

*Waa la idin siin, waad heli doontana, albaabka waa la idinka furi. Ballanqaadyadan aayadda 8 ayay ka dhex muuqanayaan.*

*Ilaaha Aabbaha ahi wuu wanaagsan yahay, oo waxa uu rabaa inuu wax wanaagsan siiyo carruurtiisa.*

*Mararka qaar waxaynu weydiisanaa inooma wanaagsana. Haddii wiilku uu weydiisto mas ama abeeso miyuu aabbahiisa jeceli siinayaa? Maya, taasi dhici mayso. Marka aynaan helin waxa aynu rabno, waa inaan Ilaah ku kalsoonaano. Isagu inama ciqaabayo. Waxa uu ogsoonyahay baahiyeheenna.*

**Su'aasha 22:** baahiyehee laga ducaysan karaa? Su'aasha 22 maxaad ka dhex dooratay?

## *Gunaanad*

| | |
|---|---|
| **Dhaqan-geli**: isbeddel noocee ah ayuu dersiga maanta noloshaada ku keenayaa? Sideed u beddeli doontaa qaabka aad u ducaysato?<br>**Muraajaco**: **Guudmar ku same dhaqangelinta casharka.** Ka wada hadla sidii lagu samayn lahaa liis duco. Ku dhiiri geli inay sanduuqa magacyo ku dhex qoraan, haddii ay suurtogal tahay. Waxaad u soo jeedisaa barnaamij duco inay isticmaalaan sida 'prayer mate'. | **Ku Dhiirrigeli**: Barashada shaqsi ahaaned sii wadisteeda iyo inay Kitaabka Quduuska ah soo qaataan usbuuca soo socda.<br>**Ducee**: Adeegso Baryada Rabbigu inay ducadaada hoggaamiso. Ilaah weydiiso inuu inaga caawiyo inaan isaga u dhowaanno oo aan ducadana joogtayno. |

# Casharka 6: Waxa Ereyga Ilaah inoo Yahay

**Waxa laga rabo barte kasta:**
a. Joogtee waqti aad Ilaah maalin walba la qaadato.
b. Baro saddex tallaabo ood ku hirgeliso wakhtiga aad Ilaah la qaadanayso.
c. Waxa uu arrintaas Kitaabku ka leeyahay isku day inaad ogaato.
d. Kitaabka Quduuska ah akhrintiisa ku dadaal.

**Fahanka Dhaqanka:**
- Muslimiinta iyo waxyiga Qorniinka
- Qisooyin
- Is-muujinta Ilaah

**Diyaari:** buugaag wax lagu qorto oo xasuus qor ah(sidoo kale haddii ay suuro gal tahya, tusaale ahaan u keen buug xasuus qor ah). Haddii ardaydu aanay haysanin Kitaabka Quduuska ah, isku day inaad u hesho Kitaab amaba ha laga akhriyo qalabka elektrooniga ah.

## *Furitaan*

**Muraajacada dhaqangelintii usbuucii hore:** Toddbaadkii hore miyaad ku ducaysatay Baryada Rabbiga? *Imika ku wada ducaysta. Waxaad isticmaali kartaa warqadihii toddobaadkii hore lagu qoray Baryada Rabbiga oo dib la isugu habayn karo.*

**Casharka 6 Muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**
**Su'aasha 1:** a) Adnan; b) daciif bay noqdaan wayna dhintaan.
**Su'aasha 2:** 'b' waa jawaabta keliya ee saxda ah. Jumaladda 'a' maaha sax waayo waxay leedahay 'keliya'
**Su'aasha 3:** Hore, Cusub **Su'aasha 4:** Diyaari; Akhri; Ducayso

**Hordhac u samee casharka maanta:** Markaad qof jeceshay, sideed u muujisaa jacaylkaas? *Tusaale ahaan, waqti baad la qaadataa, waad la hadashaa, waad dhegaysataa.* Usbuucii hore waxaan baranay sida aan Ilaah ula hadalno, maantana waxaan baran doonaa sida Ilaah ereygiisa oo ah Kitaabka Quduuska ah uu inagula hadlo. *Qof weydii inuu akhriyo Sabuurka 19:9-10.*

## *Falanqayn*

### U oomman Ereyga Ilaah (Su'aalaha 1-5)

**Su'aalaha 1 & 2:** Eeg sawirrada su'aasha 1. Kadibna akhri aayadda sanduuqa ku jirta.
- Miyaynu sida ilmaha yari ugu oommanyahay caanaha oo kale ugu oommanahay ereyga Ilaah?

### Kitaabka Quduuska ahi waa ereyga Eebbe (Su'aalaha 6-10)

**Su'aasha 8:** Akhri su'aasha dhan. Dadka qaar aan Masiixiyiin ahayni waxay u maleeyaan Kitaabku inuu yahay wax bani aadam qoray.
- Sideed u sharrixi karnaa inuu weli yahay ereyga Ilaah? *qorayaashu "waxay ereyadan ku qoreen hagitaanka Ruuxiisa"*
- Sideen ku ogaan karnaa inaan la beddelin? *Kumaan kun sanadood qoraal gacmeedyadii la sameeyay ayaa laga helayaa matxafyada maanta, taasina waxay inagu dhiirrigelinaysaa inaan haysano qoraalkii asalka ahaa.*

**Su'aasha 10:** Akhri sadarka koobaad.
- Luqadehee asal ahaan lagu qoray Kitaabka Quduuska ah?
- Miyaad garanaysaa Kitaabka Quduuska ah cidda afkaaga hooyo ku tarjuntay? Miyaad haysataa nuqul ah Kitaabka Quduuska ah?

Tarjumaadda Kitaabka Quduuska ah macneheedu maaha inaan bedelayno qoraalkii asalka ahaa. Waxa uu inoo ogolaanayaa inaan hadalka Ilaah ku dhegeysano afkeenna hooyo!

*Afafka kala duwan cidda Kitaabka ku tarjuntay waxaad ka heli kartaa mawsuucada 'bible translations by language'. Kitaabka oo afaf kala duwan ah waxa laga heli karaa Bible Society. Sidoo kalena nuqulka elektarooniga ah isagoo afaf badan ah ayaa laga heli karaa internetka. Tusaale ahaan www.biblegateway.com. Sidoo kale waxa jirta in Kitaabku isagoo ablikayshano ah uu ku diyaarsan yahay tilifoonada casriga ah.*

### Qaybaha kala duwan ee Kitaabka Quduuska ah (Su'aalaha 11-15)

**Su'aalaha 12-14:** *Ardayda tus qaybaha kala duwan ee Kitaabka Quduuska ah.*
- Kitaabka qaybtee koobsanaysa Tawraat iyo Sabuurrada?
- Qaybtee lagu magacaabaa *Injiil*?
- Axdiga Cusub miyuu burinayaa Axdigii Hore? Sababtu

*Tawraat & Sabuurrada = Axdiga Hore Injiil=Axdiga Cusub. Badanaa Axdiga Cusub oo dhan waxa lagu magacaabaa Injiil. Sidoo kalena gaargaar waxa uu u yahay injiil. Maya, labadaba waan u baahanahay. Labaduba waxa weeyi ereyga Ilaah- waa*

waa maxay?

**Su'aasha 15:** Kitaabka Quduuska ah fura. Ardayda ka caawi inay lasoo baxaan 1 Butros 1:3 oo qof ha akhriyo aayadaha.

- Haddii aan maalin walba Ilaah wakhti mucayan ah u gaar yeelno, waxa ay taasi ina siinaysaa koritaan caafimaad qaba oo xagga iimaanka ah, sida ilmaha yare e B ee aynu kusoo aragnaay bilowga deriskan.
- Sideen middan u dhaqan gelin karnaa?

*qisada Ilaah iyo sida uu xidhiidhka ula sameeyay aadanaha.*

*Qof waliba Kitaabkiisa ha kala soo baxo meesha la akhrinayo oo ah Axdiga Cusub. Haddii ardaydu ay haystaan tarjumaado kala duwan, u sharrax kala duwanaanshaha ereyada iyadoo tani inaga caawinaysa dhinacyo kala duwan oo khuseeya macanaha ereyada Giriigga ah.*

## Waqti Gaara oo Ilaah lala yeesho (Su'aalaha 16-22)

**Su'aasha 18:** Akhri su'aasha oo dhan.

- Maxaad kaga jawaabtay qaybaha a) iyo b)?
- Wakhtigeena aan Ilaah la qaadanayno, waa inuu qof waliba doorto wakhtiga iyo goobta ugu habboon. Maxaa kaa caawin kara inaad arrintan joogtayso?

*Arday kasta weydii inuu ka jawaabo. Haddii dadka qaar aanay ka jawaabin su'aalahan, xasuusi inay ka jawaabaan.*
*Marka aan middan samayno, waa inaan ka fikirno oon is weydaarsano aragtiyeenna si aan wax dheeriya u barano.*

**Su'aasha 22:** Akhri sadarka labaad. *Arday kasta weydii inuu aragtidiisa dhiibto.*

## Kaabaha 1: Waqtiga gaarka ah een Ilaah la yeelanayo

**Tallaabada 1: Diyaargarow:** Haddaad la kulmayso boqorka, sideed isu diyaarinaysaa? *Maydhasho, si fiican oo loo labisto.*

- Sideen isugu diyaarin karnaa u imaanshaha Ilaah? *ardayda weydii inay sharraxaan tallaabada koobaad.*

**Si wada jira isu diyaariya**: tusaale ahan, Wada ducaysta oo qof waliba si gaara Ilaah denbiyadiisa ha ugu qirto.

**Tallaabada 2: Akhri:** Waa maxay tallaabada 2 marka aynu Ilaah wakhti gaara la yeelanayno?

- Tallaabadan maxaynu samaynaynaa?

**Ku dhaqan tallaabada 2 idinkoo si wada jira u baranaya 1 Butros 1:13-15.**

- Kor u Akhri 1 Butros 1:13-15, *kadibna ardayda weydii inay iyagu akhristaan. Haddii afaf kala duwan aad ku shaqaynaysaan, waxaad weydiin kartaa in luqadaha kala duwan lagu akhriyo.*

- Weedhaha kuwee kugu abuuray dareen gaara?
- Maxaad samayn doontaa si aad u xasuusato arrintan muhiimka ah? *tusaale ahaan, ku qor buug oo xafid.*

***Tusaale ku bixi sida joornaalka ama xasuus qorka loo samaysto***

- Maxaad samayn doontaa si aad u addeecdo waxan Ilaah kugula hadlay?
- Qofna inta uu caano kabado dib usoo tufi maayo! Haddii laakiin aan ereyga Ilaah akhrino oon ku camal-fali weyno waxaan noqonaynaa sida qof caanaha kabaday oo soo tufay!

*Ardayda ku dhiirri geli inay qoraan aayadaha, ducada iyo sida ay rabaan inay Ilaah u addeecaan. Waxaad siin kartaa buug ay waxyaalahan ku qortaan. Haddii ay suurto gal tahayna adigu tus sida aad u qorato.*

**Tallaabada 3: Ducayso** Waa maxay tallaabada 3 marka aan Ilaah waqti la qaadanayno?

- Salaaddu waa Ilaaha Aabbaha ah oon la sheekaysano. Maxay yihiin waxyaalaha kala duwan een Ilaah kala hadli karno? *Eeg weedhaha kala duwan ee tallaabada 3 ee ku qoran farta madawga ah.* ***Imika tuko adigoo adeegsanaya tallaabooyin kan***.
- Usbuucii hore waxaan ka hadalnay inaan samayno liis duco oo aan ugu ducayno dadka kale. Qofna middaas ma sameeyay? sidee bay ahayd? *Ku dhiirrigeli qof walba inuu sameeyo liis ducooyin.*

Miyaad haysaa fikrado kale ama su'aalo ku saabsan sida Ilaah wakhti gaara loola qaato?

## Gunaanad

| | |
|---|---|
| **Addeecista waxbarista maanta:** Isbeddel noocee ah ayuu dersiga maanta ku samaynayaa noloshaada? *Qof waliba ha ka qayb qaato oo ha la wadaago kooxda(xitaa adiga).*<br>• **Wada akhriyada dhaqangelinta.** Usbuucani waxa uu leeyahay dhaqangelin muhiim ah. usbuuca danbe ayaan is weydiin doonnaa waxa aad baratay.<br>• Ma jiraa qof aad la kulmi karto ood arrinta si joogto ah u wada samaysaan (tusaale ahaa, usbuuciiba mar)? | **Wada ducaysta:**<br>Weydii haddii uu jiro qof u baahan in looga duceeyo baahiyo gaara usbuucan oo ka duceeyo baahiyahaas.<br>Ilaah ku mahadiya inuu ina jecelyahay oo uu rabo inaan isaga waqti gaara la qaadano.<br>Ku ducaysta inuu idinka caawiyo inuu ina siiyo karti aan ku yeelano inaan isaga wakhti gaara la qaadano. |

# Casharka 7: Xubnaha Kaniisadda Masiixa

| Waxa laga rabo barte kasta: | Fahanka dhaqankk: |
|---|---|
| a. Diyaar u noqo inaad ku biirto xerta maxalliga ah.<br>b. 1 Butros 2: ka baro saddex astaamood kaniisadda Masiixu leedahay.<br>c. Xafid 1 Butros 2:9.<br>d. Isku day inaad aayado kala duwan ka hesho 1 Butros. | • Labo dhagax oo khaas ah<br>• Bogsiinta aqoonsi qaybsan<br>• Ummad<br>• Ka fikirista khatarta |

**Diyaari:** dhagxaan ama jaajuurka dhismaha lagu tusiyo 'dhagax-geesaadka'. Eeg hordhaca.

## *Furitaan*

**U ducee kulanka. Dib u eeg dhaqangelintii usbuucii hore:** Miyaad jaanis u heshay inaad waqti gaara la yeelato Ilaah maalin walba? Miyay kaa caawisay arrintaas inaad Ilaaha Aabbaha u dhowaato? Kuwa aan weli jaanis u helin, maxaa ka hortaagan arrintaas? Sideed arrimahaas kugu hor gudban uga tallaabsan kartaa usbuucan?

**Casharka 7 Muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**

**Su'aasha 1:** a) guri; b) la doortay; c) qoys **Su'aasha 2:** Ciise Masiix
**Su'aasha 3:** dad la doortay, wadaaddada boqorka, quruun quduus ah, dad Ilaah iska leeyahay,inaad ogaysiisaan wanaagga, kan gudcurka idiinka yeedhay oo idiinku yeedhay xagga nuurkiisa yaabka leh (1 Butros 2:9).

**Hordhac u samee mawduuca maanta:** *isu soo ururi oo tuul leego ama dhagxaan dhisme oo isugu jira midabyo iyo cabir kala gedisan.*

- Ma jirtaa cid ku dhex noolaan karta dhagxaantaas tuulka ah? Maya- jaajuurka ama dhagxaantu waxay u baahanyihiin in la isku xidho oo guri laga dhigo!

*Dhig jaajuur ama dhagax weyn oo asaas ah oo bilow dhismaha guri ka kooban jaajuur ama dhagxaan kala duwan.*

Maanta waxaan wax ka baran doonnaa umadda Masiixa oo ah kaniisadda amaba bulshada Masiixiyiinta ah.

## *Falanqayn*

### Hordhac (Su'aalaha 1-2)

**Su'aasha 1:** Akhri qisada Majid, hadalka jaantuska iyo su'aasha 1.

- Maxaad ka malaysatay Majid? Maxaad kaga jawaabtay su'aasha 1? *Dalalka qaarkood, Masiixiyiinta asal ahaan kasoo jeeda Islaamku si xorriyad leh ayay u kulmi karaan, halka meelaha kalana ay arrintaasi khatar tahay.*
- Akhri hadalka macallinka ee ka danbeeya su'aasha 2.

### Guri Ruuxi ah (Su'aalaha 3-10)

**Su'aasha 3:** Ku noqo 1 Butros 2:4-8 *weydii inuu qof akhriyo.*

- Aayadda 5 waxaynu nahay, dhagxaan nool, oo maxay lagu dhisay?
- Aayadaha 6 iyo 7 waxay ka hadlayaan 'dhagax-geeseed'. Dhagax-geeseedku kaalin noocee ah ayuu dhismaha kaga jiraa?
- Maxaad u malaynaysaa inuu yahay dhagax-geeseedka qaaliga ah ee halkan lagu xusay? *Ciise Masiix oo Ilaah doortay (aayadda 6) oo qaali u ah xertiisa isaga raacday (aayadda 7) laakiin kuwo kalena way diideen (aayadda 7) isaga ayaana xukumi doona (aayadda 8).*

Hubi in ardaydu aayadaha lasoo bixi karaan.
*'guri ruuxi ah.*

*Waxa uu ku fadhiyaa asaaska koonaha isagoo jiheeya gidaarka. Dhismaha leegada ah ama jaajuurka ah eed samaysay tilmaanta ku bixi.*

*Haddii ay habboontahay, u kala iftiimi kooxdaada farqiga u dhxeeya Dhagax-geeseedka iyo dhagaxa madaw ee Islaamku xaggiisa u tukadaan.*

**Su'aasha 6:** Akhri sadarka ugu danbeeya.

- Waa maxay jawaabta saxsani? *b)*
- Magaaladeena, meelaha ugu wanaagsan ee xertu ku kulmi kartaa waa halkee? *Falanqeeya arrintan.*

*Dalalka qaarkood waxa ka jira kaniisado sharciyeysan, kuwa kalena kama jiraan. Sidaas oo ay tahay, Masiixiyiinta kasoo jeeda Islaamka waxa u habboon inay ku kulmaan guryaha.*

**Su'aasha 7:** Akhri sadarka labaad, adigoo ka bilaabaya 'Sayid Ciise waxa uu xertiisa u sheegay' …'

- Halkan maanta, ma waxaynu nahay ugu yaraan labo ama saddex ku kulmay magaca Ciise aawadiis?
- Haddii sidaas ay tahay, Ciise miyuu si khaas ah inoo dhex joogaa? *Ma arki karno isaga laakiin waxa uu inagula joogaa Ruuxiisa.*
- Miyaad dareentaa joogitaankiisa markaad xerta kale kulan caabudaada isugu timaaddaan? (eeg su'aasha 9)

## Dad ama jinsi la doortay (Su'aalaha 11-18)

**Akhri 1 Butros 2:9-10:** aayadda 9 weedhee ayaa ugu jeceshahay, waa maxay sababtu?

- Aayadda 10 maxay ku dareensiinaysaa? *Masiixiyiinta kasoo jeeda Islaamka macno weyn ayay ugu fadhidaa waayo waxay damaanad qaadaysaa aqoonsigooda cusub ee ay ku haystaan Masiixa iyo ummaddiisa.*

**Yaynu nahay?** Xafidista aayadda, **1 Butros 2:9.** Ha la is weydiiyo 'yaynu nahay?' jawaabtuna waa 'dad ama jinsi la doortay'. Qof kalena ha weydiiyo kan xiga 'yaynu nahay?' jawaabtuna ha noqoto 'wadaaddado boqor'. Ha lagu soo celceliyo inta qof waliba ka xafidayo weedhahan.

**Su'aasha 14:** Akhri su'aasha oo dhan.

- Qawmiyado kala duwan oo noocee ah ayaad kala kulantay Masiixiyiinta?
- Maxaad aragtay inay ka siman yihiin?
- Xaaladdiina, ma waxa fiican in dad isku qawmiyad iyo qabiil ahi kulmaan mise kooxo kala duwani inay kulmaan?

*Sida dhagaxaanta ama jaajuurka kala gedisan ee gurigu ka dhisanyahay, dhammaanteen waan kala duwanahay, laakiin dhammaanteen waxaan isku nahay umad keliya oo Masiixiyiin ah.*

*Waxa jira labo faa'ido oo labada arrimoodba leeyihii, iyo siyaabo la isu waafajin karo. Falanqeeya arrintan..*

**Su'aasha 15:** Akhri qaybta koobaad ee su'aasha.

- Aayaddani siday ina barayso, Ilaah muxuu inoogu yeedhay?
- Ujeeddo noocee ah ayuu Ilaah inoo doortay?
- Sidaas aawadeed, maxaynu samaynaa ee inala gudboon?

*Mugdiga ayuu inooga yeedhay, iftiina wuu inoogu yeedhay.*

*Inaan ogaysiino wanaagga iyo ammaantiisa, eeg aayadda 9.*

*Inaan dadka kale u sheegno wax ku saabsan shuqullada Ilaah ee waaweyn iyo wanaaggiisa.*

**Su'aasha 16:** Eeg sawirkan. Labadan marwo ee geesiyada ahi waxay ogsoonyihiin in Masiixu uu iyaga u yeedhay si ay ugu adeegaan isaga. Muxuu yahay jaaniska aad u haysato inaad dadka u sheegto wax ku saabsan shuqullada Ilaah ee yaabka badan?

## Qoys (su'aalaha 19-22)

**Su'aasha 22:** Akhri su'aasha. Falanqeeya su'aalaha farta madow ku qoran.

- **Akhri hadalka qoraalka ah ee macallinka.** Sideed qoyskaaga Muslimka ah ula wadaagi kartaa wax ku saabsan iimaankaaga?
- Ma waxaad iyaga ku odhanaysaa 'waxaan noqday Kiristan' mise waxaad odhanaysaa 'waxaan raacsanahay Ciise Masiix' mise

*Haddaynu adddeecno ereyga Ilaah waxaynu walaalo ku noqonaynaa Masiixa. Ma luminayno haybteena iyo aqoonsigeenna asalka ah laakiin aqoonsiga aan ku leenahay Masiixa ayaa wax walba ka xoog badan.*

*Meelaha qaarkood, ereyga 'Kiristan' waxa lala xidhiidhiyaa khamriga, hilibka doofaarka, dhillaysiga iyo Islaam nacaybka. Halka meelo kalena ereyga*

wax kale?
- Maxay ereyadan kala duwani iyaga iyo Muslimka kaleba uga dhiganyihiin?

*'Kiristan' macnihiisa sida saxda ah loo fahmi karo. Kitaabku ereyo kala duwan ayuu ugu yeedhaa Masiixiyiinta. Kolba magaca la adeegsanayaana waxa uu ku xidhanyahay doorashada shaqsi ahaaneed iyo kolba xaaladda jirta.*

## Miyaad u Baahantahay Kaniisadda Masiixa? (Su'aalaha 23-25)

**Su'aasha 24:** Akhri su'aasha oo dhan. Maxaad halkan ku qortay?

- Ka waran Majiid, miyaad u malalynaysaa inuu dugsi helayo la'aanta Masiixiyiinta kale?
- Markale eeg waxaad ku qortay su'aasha 1. Maanta laga bilaabo, talo noocee ah ayaad siinaysaa Majiid?

**Su'aasha 25:** Sida gurigii aan dhisnay oo kale, waxaan u baahanay inaan isku tiirsanaano haddii aan nahay ummadda Masiixa.

- Sideen u wadi karnaa dhisidda ummadan?
- Jaanis intee leeg ayaad u heli kartaa amaba ma awooddaa inaad la kulanto Masiixiyiinta kale?

| ***Gunaanad*** | |
|---|---|
| **Addeecista waxbarista maanta:** Isbeddel noocee ah ayuu dersiga maanta ku keenayaa noloshaada?<br>• **Wada akhriya dhaqangelinta casharka.**<br>• Miyaad haysataa ugu yaraa qof kale oo Masiixi ah ood usbuucan la kulanto? *Haddii uu jiro qof aan haysanin inuu la kulmo qof kale waxa uu la kulmi karaa adiga ama xubin ka tirsan kooxda.* | **Wada ducaysta:**<br>Ilaah ugu mahadnaqa walaalaha Masiixiyiinta ah oo weydiista inuu idin siiyo kalsooni aad isku qabtaan. Ilaah weydiista inuu inaga dhigo ummad ruuxi ah oo xooggan. |

# Casharka 8: Xubno ka Tirsan Labo Bulsho

| | |
|---|---|
| **Waxa laga rabo barte kasta:**<br>a. U adeegista dadka ay kasoo jeedaan iyo Masiixiyiintaba.<br>b. Inay doonayaan Rabbiga aawadiis in loogu hoggaansamo kuwa amarka leh.<br>c. Xafid 1 Butros 2:17. | **Fahanka Dhaqanka:**<br>• Xerta asal ahana kasoo jeedda Muslimka iyo bulshada Muslimiinta<br><br>**Diyaari:** Warqad, qalinka wax lagu calaamadiyo. |

## *Furitaan*

**Wada ducaysta. Muraajaceeya dhaqangelintii usbuucii hore:** Miyaad la kuran ugu yaraan qof xerta ka mid ah? Sidee middani kuu caawisay? Miyay ku siisay xoogganaan ruuxi ah?

**Casharka 8 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**

**Su'aasha 1:** a) ruuxi; b) adduun  **Su'aasha 2:** addeecis

**Su'aasha 3:** dadka oo dhan maamuus oo walaalahana jeclaada (1 Butros 2:17)

**Hordhac u same mawduuca maanta:** Bulshooyin kala duwan oo noocee ah ayaan ka tirsanahay? *Tusaale ahaan. qoykas, goobta shaqada, dariiqyada, kaniisadda). Qof walba su'aal inay wax ka sheegaan bulshadooda oo qor si aad hadhow u adeegsato.*

Maanta aynu ka hadalno sida aan labo bulsho uga wada tirsanaan karno iyo sida aan isugu dayi karno inaan labada bulshaba ugu adeegno.

## *Falanqayn*

### Xubno ka tirsan labo bulsho

**Akhri 1 Butros 2: 11-12:** *qof waliba ha lasoo baxo aayadaha.*

- Maxay aayadda 11 inoogu sheegaysaa inaan nahay 'qariib iyo socdaal'?
- Dadka aan Masiixiyiinta ahayni qaab-dhaqankeena si dhow ayay ula socdaan. Sidee ayaan ugu dhex noolaan karnaa iyaga sida ay inoo sheegayso aayadda 12?

*Waayo hoygeena dhabta ahi waa la jiritaanka Masiixa ee daa'imka ah, eeg Su'aasha 1.*

*Inkastoo ay inoo arkaan kuwo qalad samaynaya waa inaan dabiicad wanaagsan ku dhaqanno.*

**Su'aasha 2:** Akhri sadarka ugu horreeya.

- Waa ayo labada bulsho ee Ilaah inoogu yeedhay inaan u adeegno?
- Haddii qof yidhaahdo inaga waxa waajib inaga saaranyahay u adeegista Masiixiyiinta oo keliya, jawaab noocee ah ayaan siinaa qofkaas?

*Bulshada ruuxiga ah ee kaniisadda Masiixa iyo bulshada dunida ama kuwa aan ku dhex dhaqanahay.*

*Falanqee. Sida ku xusan 1 Butros 1 iyo 2, Ilaah wuxuu inoogu yeedhay inaan u adeegno labada bulshoba.*

**Su'aalaha 4-5:** Akhri su'aasha 4 b).

- Halkan maxaad ku qoraysaa? Fadlan la wadaag khibraddaada.
- Marka la eego jawaabta aad ka bixisay su'aasha 5, waa maxay sida ugu wanaagsan ee 'hadalka nacasnimada lagu aamusiin karo'?

*Si jaanis qof waliba uu ku hadlo haddii uu rabo.*

*Wanaag oo la falo.*

### Samo fal (Su'aalaha 5-9)

**Su'aasha 7:** Akhri sadarka ugu horreeya.

- Jawaabehee ayaad halkan saxday ama dooratay?
- Ma u malaynaysaa inay jiraan siyaabo kale oon wanaagu ugu sayn karno bulshadeenna?

**Su'aasha 8:** Akhri sadarka labaad.

- Fikrado noocee ah ayaad halkan ku qortay?
- Dhammaan fikirada ku xusan su'aalaha 7 iyo 8, kuwee ayaad ka dhaqangelisaa?

*Arday waliba waa inuu ugu yaraan doorto hal wax oo khuseeya xaaladdooda.*

## U hoggaansanaanta xukuumadda inoo talisa (Su'aalaha 10-13)

**Akhri 1 Butros 2:13-17:** *Weydii in aayadahan dad kala duwani ku akhriyaan afaf kala duwan haddii ay jiraaan*



- Sida ku xusan aayadda 13, Muxuu Ilaah inagu amray inaan samayno? *'addeeca amar dad oo kasta.*
- Ayo daraaddiis ayaan u addeecnaa? *'Rabbiga daraaddiis'.*
- Sida ku xusan aayadda 16, xorriyadda Masiixa aan ku haysano macneheedu ma inaan waxkasta oon rabno samayno baa?*Maya,xor uma nihin inaan shar samayno. Waxaynu nahay 'addoomada Ilaah'. Wax dheeraada oo arrintan ku saabsan waxaan ku baranaynaa Casharka 15.*

**Su'aasha 13:**Akhri su'aasha oo dhan.

- Maxaad su'aashan kaga jawaabtay?

  *Falanqee. Xaaladaha noocaas ah Masiixiyiintu waa inay ogaadaan xilliga loo dulqaadan karo waxyaabaha yaryar iyo marka ay tahay muhiin 'in Ilaah la addeeco halkii dadka laga addeeci lahaa' (Falimaha Rasuullada 5:29).*

- Haddii aad ka shaqayso dukaan oo maamulahaagu kugu amro inaad dadka khiyaanto, maxaad samayn doontaa? Jawaabtu ha ku salaysnaato waxaynu hadda ka baranay tusaalaha rasuul Butros.

  *Falanqee. Way adagtahay tani! Ma rabno inaan caasino Ilaah sidoo kalena ma rabno inaan shaqadeenna wayno.*

## Addeecista kuwa inaga sarreeya (Su'aalaha 14-20)

**Akhri 1 Butros 2:18**

- Yaa loo qoray aayaddan?
- Fikirkaaga, maxaa ugu adag marka addoon ahaan loo shaqaynayo?
- Addoomada ku sugan aayadda 18, ma waxa waajiba inay addeecaan sayaddooda wanaagsan mise xitaa ku qallafsanina way ku jiraan?
- Haddii maamuleheena ama dadku aanay qadarinin waxaan qabanayno, xoogganaan ama qalbiqaboojin noocee ah ayaan ka helaynaa 1 Butros 2?
- Ma jiraa qof inaga mida oo ay ku adagtahay inuu addeeco qof ka amar sarreeya? Fadlan la wadaag.

*Addoomo.*

*Tusaale ahaan, shaqo badan ayaad qabataa mushahar la'aan iyo weliba xorriyad la'aan.*

*labadaba.*

*Rabbiga aawadiis ayaan u addeecaynaa, (aayadaha.13 & 18), aayadda.20: haddii wanaag falista aan u silicon taasi waa mid Ilaah u bogo.*
*Ugu danbaynta xaaladahan ayaan ka ducaynaynaa.*

**Su'aasha 19:** Eeg labada nin.



- Keebaad jeceshay in wiilkaagu uu noqdo xashiish qaade daacad ah iyo mise borofisoor khaa'in ah?
- Maxaad u malaynaysaa in Rabbigu uu dooranayo?

**Xafid aayadda xafidaadda, 1 Butros 2:17a:** *dadka oo dhan maamuusa, walaalahana jeclaada.*

- Yaa dusha akhriyi kara 1 Butros 2:17a? *Dadka oodhan ku dhiirri geli inay dusha ka akhriyaan.*
- Ereyadee inoo sheegaya inaan ka qayb qaadano waxtarka bulshadeenna dunida?
- Ereyadee inoo sheegaya inaan ka qayb qaadano bulshadeenna Masiixiyiinta ah?

## *Gunaanad*

| **Addeecista Waxbarista maanta:** isbeddel noocee ah ayaa dersiga maantu uu ku keenayaa noloshaada? Ma jiraa qof casharkani wuxuu ka hadlayo hore ugu dhaqmay?<br>**Akhri dhaqangelinta casharka.**<br>**Dhiirrigeli**: Eeg labada bulsho eed bilowgii qortay. Sided ugu wada adeegi kartaa labadaba? Dib u jalleec su'aalaha 7 iyo 8 oo go'aami hal wax ood u qabato labada bulsho midkood usbuuca soo socda ama qabo waxyaalaha ku sugan buugga barashada.<br>Sidoo kalena sii wad barashada shaqsi ahaaneed! | **Wada ducaysta:** *koox koox ama labo labo u wada ducaysta haddii ay suurto gal tahay.*<br>U duceeya xubnaha ku sugan xaalad ay adagtahay in la addeeco dawlad ama maamule qallafsan.<br>Weydiiso in Ilaah inaga caawiyo helitaanka sidaan ugu adeegi lahayn bulshada ruuxiga ah iyo tan adduunyada usbuucan soo socda, iyo sidaan Rabbiga darraaddiis ugu addeeci lahayn kuwa amarka inoo haya. |
|---|---|

# Casharka 9: Sababaha Cadaadiska ama Silica

| **Waxa laga rabo barte kasta:** | **Fahanka Dhaqanka:** |
|---|---|
| a. Ogsoonow inaanu jirin wax inaga sooci kara jacaylka Ilaah.<br>b. Ogsoonow in silica iyo cadaadisku dhici doono laakiin Ilaah wanaageenna u adeegsado.<br>c. Xikmad yeelo si aad uga fogaato cadaadiska iyo silica aan loo baahnayn.<br>d. Xafid 1 Butros 2:21. | • La talinta rumaystayaasha kasoo jeeda Muslimka ee cadaadisku ku socdo<br><br>**Diyaari:** Warqado ay ku qoranyihiin ereyo ka ahaaday Rooma 8:35( loogu talo galay su'aasha 12) |

## *Furitaan*

**U ducaynta casharka. Muraajacee dhaqanglintii deriskii usbuucii hore:** Maxaad samaysay si aad ugu adeegto qof baahan ama mid amar leh oo bulshadeenna ka mida? Sidee qofkaas uga fal-celiyay arrintaas?

**Casharka 9 Muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**

**Su'aasha 1:** wuxuu idiinka tegay masaal inaad tallaabooyinkiisa raacdaan (1 Butros 2:21).
**Su'aasha 2:** 1) dunidu, nacaysaa; 2) Ilaah, silic; 3) si nacsnimo ah oo loo socdo; 4) tallaabooyinka Masiixa

**Hordhac u samee casharka maanta:** Casharka maantu waxa uu ku saabsanyahay silica, waana mawduuc aad u adag. Waxa laga yaabaa in ka hadalka arrintani ay inaga ilmaysiiso marka aan xasuusano waxyaalihii aan soo marnay ee silic ahaa. Laakiin Ilaah xagga wanaagsan ayuu u adeegsadaa silica isaga ayaana bogsiin kara dhaawacyadeena iyo xanuunkeena markaan arrimahan ka hadalno.

## *Falanqayn*

### Sababta koobaad – Adduunku wuu ina neceb yahay (Su'aalaha 1-6)

*Qof waliba ha ka hadlo waayo aragnimadiisa iyo waxa uu soo maray. Waa muhiim middani ee dadka ku dhiirrigeli.*

**Su'aalaha 1-2:** Akhri dhammaan su'aasha 1 iyo qaybta koobaad ee su'aasha 2.

- Maxaad kaga jawaabtay su'aasha 2? Ama siyaabo kale miyuu silic kuula soo dersay? Miyaad weli waajahdaa cadaadis ama silic?
  *Halkan ku hakada oo u wada duceeya cidda kooxda ka mida ee cadaadisku haysto imika amaba kuwa ka damqanaya wixii ay hore usoo mareen.*

**Su'aassha 5:** Saduuqa dhexdiisa ka akhri qisada dhabta ah ee ku saabsan Haim. Maxay tani ku dareensiinaysaa?

### Sababta labaad – Ilaahay baa ogolaada cadaadiska ama silica (Su'aalaha 7-13)

**Akhri 1 Butros 1:3-7**

- Sida ay ina barayso aayadda 4, halkee dhaxalkeennu yahay? *Waa jannada*
- Miyay weligeed 'baaba'aysaa, dhammaanaysaa ama nijaasoobaysaa? *Maya – lama mid aha dhaxalkeenna adduunyada!*
- Sida ku sugan aayadda 5, waqti xaadirka la joogo maxaa ina dhawraya? *Xoogga Ilaah*
- Markaynu waajahno jarribaadaha kala duwan, sideen uga fal-celinaa sida aan ka baran karno aayadda 6? *Si weyn baan ugu faraxnaa*.
- Rumaysadkeennu muxuu la mid yahay sida ku sugan aayadda 7? *'Waa sida dahabka, dabcana wuu kasii qiimo badanyahay dahabka'.*
- Muxuu dahabluhu dahabka ugu tijaabiyaa dabka? *Inuu wanaajiyo oo dib u habeeyo.*
- Haddaba, muxuu Ilaah inoogu ogolaadaa inaan silicno ? *Si loo hubiyo iimaankeena oo uu inooga*

*dhigo kuwo qalbigoodu nadiif yahay oo samir iyo xooggaanaan leh. Dabkiisa wax wanaajinayaa waxa uu iimaankeena taagta daran ka dhigayaa mid xooggan oo qaali ah!*

**Su'aasha 10:** Akhri su'aasha oo dhan. Jawaabahee ayaad saxday oo dooratay? Maxaad middan ka dareemaysaa?

*Waxa sax ah oo keliya jawaabta a). Si kastaba ha ahaatee, ujeeddada laga leeyahay falanqayntani waxa weeyi in dadka wax baranayaa ay noqdaan kuwo ka run sheega shakiga iyo dhibaatooyinka ay shaqsi ahaan ula tacaalayaan. Waxa markaa dhacaysa inay si daacadnimo leh ereyga Ilaah ugu furaan qalbiyadooda, si Ilaah u bedelo fikirradooda oo uu u siiyo xoogganaan u suurto gelisa inay ku kalsoonaadaan isaga xitaa waqtiga lagu jiro dhibaatada iyo silica..*

**Su'aasha 11:** Akhri su'aasha oo dhan. Maxaad kaga jawaabtay qaybta b)? *Waayo aragnimo waxaad u leedahay ee noloshaada ku saabsana dadka la wadaag!*

**Su'aasha 12:**

*Marka waqtiyada adag lagu jiro, rumaystayaashu waxay mararka qaar u maleeyaan in Ilaah uu ka tegay amaba uu ciqaabayo iyaga. Layligan soo socdaa waxa uu iyaga ka caawinayaa inay isaga si qoto dheer isugu halleeyaan in Ilaah iyaga weli jecelyahay oo aanu dayrin doonin. Waxaad marka hore warqado kala duwan kusii qorataa ereyada,'dhibaato', 'cidhiidhi', 'silic', 'baahi', 'silic', 'arrad', 'khatar', 'seef'. Sidoo kale labo warqadood oo kale ku qor 'sooci karaan' iyo 'nagama sooci karaan' oo saar miis ama dhulkaba dhig. Ugu danbaynta, waxaad warqad ku qortaa ereyga 'dhimasho'.*

- Akhri **Rooma 8:35**.Waxyaabahan kuweebaa inaga sooci kara jacaylka Masiixa? Qof waliba ha qaado warqad oo ha hoos dhigo labada warqadood ee ay ku kala qoran yihiin 'sooci karaan' iyo 'nagama sooci karaan'.
- Akhri **Rooma 8:36**. Aayaddani miyay ka hadlaysaa Haim qoyskiisa markii ay dhimashada waajahayeen?
- Dhammaantiin isku hal cod ku akhriiya **Rooma 8:37-39**.miyay xitaa dhimashadu Haim qoyskiisa ka sooci kartay jacaylka Masiixa? *Maya! Waxay isla markiiba u tageen Ilaah.*

Warqadda ay ku qorantahay 'dhimasho' waxaad ku dartaa kuwa la hoos dhigayo 'inagama sooci karaan'.

- Miyuu jiraa wax inaga sooci kara jacaylka Masiixu? *Maya, xitaa dhimashadu inagama sooci karto!*

## Sababta saddexaad – Mararka qaar si doqonimo ah ayaan u dhaqannaa(Su'aalaha 14-17)

**Su'aasha 14:**akhri su'aasha ka danbaysa qisada Shakeel

:

- Aragti noocee ah ayaad ka qabtaa middan?
- Shakeel ma waxa ku dhacay silic lagama maarmaan ah mise midaan loo baahnayn?
- Sideen uga hortegi karnaa silica aan loo baahnayn?
- Miyaynu ka hortagnaa cadaadiska lagama maarmaanka ah?

***Xasuusi ardayda in guriga oo wax lagusoo akhristaa ay si wanaagsan uga caawinayso ka qayb qaadashada falanqaynta.***

*Tusaale ahaan, si nacasnimo ah ayuu u dhaqmay ceebeeyay dadkiisa oo guriga ka baxsaday, aabbihiina caayay.*

*Silic aan loo baahnayn.*

*Tixgelinta odayaasha, inaan caawino ehelkeenna, iyo inaynaan ceebaynin.*

*Waa inaynaan diidin magaca Masiixa. Laakiin waxaan dooran karnaa inaan goobta aan ku noolnahay bedelno, eeg su'aasha 17.*

**Su'aasha 17:** Akhri sadarka labaad.

- Su'aashan aragti noocee ah ayaad ka qabtaa? *Su'aasha 'saxsanaanteeda' iyo 'qaladkeedu' waxa ay ku tiirsantahay hadba xaaladda jirta. Qofka naftiisu halista ku jirtaa waxa uu u baahanyahay inuu ka fikiro sidii uu meel kale ugu guuri lahaa. Si kastaba ha noqotee, haddii aanay naftoodu halis ku jirin waxa u wanaagsan inay gaabsadaan inta xaalladdu ka hagaagayso. Waa inay isku dayaan addeecista ehelkooda inkasta oo ay Masiixa raacsanyihiin.*

## Sababta Afraad – Waxaan ku soconaa jidkii Masiixa (Su'aalaha 19-22)

**Akhri 1 Butros 2:19-21:**

- Sidee aayadda 20 uga hadlaysaa silica aan loo baahnayn?

*'Markii aad dembaabtaan, oo laydin garaaco, haddii aad u dulqaadataan, maxay ammaan leedahay?'*

- Sidee aayaddani uga hadlaysaa silica kiisa lagama maarmaanka ah?

*'Laakiinse markaad wanaag fashaan oo aad xanuunsataan, haddii aad u dulqaadataan. taasu waa wax Ilaah u bogo.'*

- Haddii ay tahay inaan silicno, yaa tusaale inoo ah oon ku dayanaynaa sida ku xusan aayadda 21?

  *Sayidkeenna Ciise waxa uu qaaday jidka qodxaanta oo inagana waa inoo sharaf inaan tusaalihiisa raacno!*

**Muraajacee oo ka fikir aayadda xafidaadda 1 Butros 2:21:** *aayadaha aan ka baranayno Kitaabka, waxa weeyi inaan ka fikirno oon ku cibaadaysano. Middani waay inaga caawinaysaa maqalka waxa Ilaah inoo sheegayo iyo sida uu inaga rabo inaan uga jawaab celino. Waxa middan ku tusaalayn kartaa inta deriska lagu guda jiro adigoo adeegsanaya tallaabooyinka soo socda:*

1) Qof walba ka dalbo inay Ilaah hortiisa qalbiyadooda ku aamusiiyaan. Ilaah weydiista inuu ereygiisa inagula dhex hadlo.
2) Qof walba ka dalbo inuu aayadda xifdinta si qunyar ah kor ugu akhriyo.
3) Qof waliba aayadda si hoos ahaana dhawr jeer ha ugu celceliyo. Dhegayso waxa Ilaah kuugu sheegayo qayb kasta oo ka mida aayadda. *Ugu yaraan shan 5 daqiiqo ha lagu sameeyo middan.*
4) Qof waliba Ilaah ha weydiisto inuu tusiyo sida uu rabo inuu uga jawaab celiyo waxa uu maqlay. *Dhawr daqiiqo sii middan.*
5) Koox koox ama labo labo isula wadaaga waxa Ilaah idinkula hadlay iyo sida aad rabtaan inaad uga jawaab celisaan.

# *Gunaanad*

**Addeecista waxbarista maanta:**

- Dersiga manta isbeddel noocee ah ayuu noloshaada ku keenayaa?
- **Wada akhriya dhaqangelinta.** Ardaydu waxay maalinwalba isticmaali karaan sida loogu ducaysto aayadaha ee la sameeyay maanta..

**Wada ducaysta:** Weydii dadku inay ducooyin gaaban ku ducaystaan iyagoo Ilaah uga mahadcelinaya ballanqaadka xooggan ee uu bixiyay xilliga silicu jiro. U duceeya xerta kuwooda ku silcaya dalalka kala duwan gaar ahaan kuwa asal ahaan kasoo jeeda Muslimka.

# Casharka 10: Waajihidda Cadaadiska ama Silica

**Waxa laga rabo barte kasta:**
a. Aaminista in cafisku uu ka wanaagsan yahay aargoosiga.
b. inuu qaado tallaabo uu ku cafinayo qofka dhibka u gaystay.
c. Xafid Matayos 5:44.

**Fahanka Dhaqanka:**
- Cafiska iyo aargoosiga

**Diyaari:** Su'aasha. 4, qor oo nuqullo ka samee Matayos 5:44.

## *Furitaan*

**Dhaqangelinta usbuucii hore:** Miyaad ka fikirtay aayadihii maalin walba aad akhrninaysay usbuucii lasoo dhaafay? Maxaad dareentay? Aayaddee aad kuu soo jiidatay?

**Casharka 10 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**

**Su'aasha 1:** cafis
**Su'aasha 2:** jeclaada cadawgiina oo u duceeya kuwa idin silciya.

**hordhac ka bixi mawduuca maanta:** eeg hordhaca, labo qof ha akhriyaan labada nin ereyadooda: Weligaa ma dareentay xaaladda labadan nin midkood?*u ogolow ardaydu inay fikirkooda ka dhiibtaan wixii ay dareemeen adigoon aragtidooda dhaleecaynin.*



Maanta waxaan baran doonnaa sida Ilaah rabo inaan uga fal-celino ama uga jawaabno silica, iyo gaar ahaan sida aan u cafin karno cadawgeenna.

## *Falanqayn*

### Wareegtada aargoosiga (Su'aalaha 1-3)

**Su'aasha 2:** Sawirka wada eega.

- Tusaale noocee ah ayaad ka qaadanaysaa meesha aad ku aragtay wareegto aargoosi oo ka dhacaysa?
- Cafisku wuu adagyahay halka aargoosiguna ka fudud yahay. Laakiin labadooda midkee dhaawaca sii xumaynaya?

### Aargoosiga waxa bedelaya Cafis (Su'aalaha 4-16)

**Su'aasha 4:**

- Sidee Ciise inoo barayaa inaan uga xorowno wareegtada aargoosiga? *Waxa uu ina baray inaan jeclaano oo cafino cadawgeenna.*

*Warqado ku qor ereyada aayadda xifdinta ee Matayos 5:44. Ardayda ka dalab inay isku habeeyaan oo sida saxda ah isugu hagaajiyaan.*

**Su'aasha 5:** Akhri su'aasha oo dhan.
Ciise muxuu ku ducaystay markii kuwii dilayay ay gacmihiisa masaabiirta ku qodbeen? *'Aabbow iyaga cafi'.*

- Ciise ma waxa uu ahaa hoggaamiye xooggan mise mid taag daran? Xoogganaantiisu maxay u suurtogelisay inuu sameeyo? *Inuu cafiyo*
- Sideen isaga wax uga baran karnaa? *In wax la cafiyaa maaca calaamad daciifnimo ah, laakiin waxay calaamad u tahay xoogganaanta iyo dhiirranaanta.*
- Yaa ina siinaya xoogganaanta inaan cafino cadaawayaasheenna? *Ciise ayaa inagu siinaya awoodda Ruuxiisa inagu dhex nool.*

**Akhri 1 Butros 2:21-25:**

- Sida ku xusan aayadda 22, Ciise miyuu u qalmay inuu silco? *Maya, 'isagu wax denbi ah muu galin'.*
- Eeg aayadda 23. Ciise halkii uu ka aargoosan lahaa ama uu habaari lahaa kuwii isaga silcinayay beddelkeeda muxuu sameeyay?

*Ismuu difaacin wax hanjabaadana muu samaynin. Taas beddelkeedana, 'waxa uu nafsaddiisa ku halleeyay kan sida caddaalada ah wax u xukuma'.*

- Eeg aayadaha 24-25. Muxuu Ciise inaga inoo sameeyay? *Denbiyadeena ayuu iskutallaabta ku dul xanbaaray, oo waxa uu inagu bogsiiyay nabarradiisa, waxaanu idihii kala lumay dib ugusoo celiyay Adhijiraha.*

- Maxaad dareemaysaa marka aad xasuusato in Ciise waxyaalahan oo dhan daraaddaa u sameeyay?
- Way adagtahay inaan jeclaanno cadaawayaasheenna oon u ducayno kuwa ina silciya. Hadaba maxaan isugu dayaynaa inaan middan sameyno? *Masiixa ayaa ugu horreyn inaga ina cafiyay oo ina xoreeyay. Isaga laftiisa ayaa tusaale inagu siinaya inaan cafino cadaawayaasheenna. Inagana waxa uu inagu amrayaa inaan sidaas oo kale yeelno. Cafisku waxa uu jebiyaa wareegtada aargoosiga, waxaanu inaga saaraa ciilka iyo cuqdadda.*

**Maxaan u cafinaa?***haddii waqtigu saamaxayo mawduucani wakhti si qoto dheer looga hadlo ayuu u baahanyahay.*
Iabo Iabo ardaydu ha u akhriyaan **Matayos 18:21-35**. Dhawr daqiiqo falanqeeya ka dibna kooxda ha la wadaagaan wixii ay ka barteen. Haddii ay habboontahayna, qisada dib ha u tebiyaan ama ha u jilaan.

**Su'aasha 9:**Akhri qaybta koobaad ee qisada Farid.

- Haddii Farid uu fuliyo qorshihiisa aargoosiga ah, maxay natiijadu noqon lahayd? *Waxa uu jaanis siin lahaa Shaydaanka. Kuwa la shaqeeyaana way ka aargoosan lahaayeen, waxaana sii socon lahayd wareegtada aargoosiga.*

**Su'aasha 10:** Akhri qaybta labaad ee qisada Farid.

- Maxay tahay natiijada wanaagsan ee ka dhalatay inuu Farid cafis la yimaaddo oonu aarsanin? *Kii ay wada shaqaynayeen qalbigiisa ayaa is bedelay, waxaanu mar danbe raacay Masiixa.*

**Akhri sidoo kale waxa dhacay:** Markii uu qoray warqadda cafiska. Farid waxa uu tegay guriga. Laakiin waxa uu ka walaacsanaa waayintaanka bil dhan mushahakeed. Waxa uu yidhi, "habeenkaa waan seexan kari waayay, jiifkana waan xamili waayay oo kolba dhinac baan isu rogayay ilaa markii danbe aan kacay oon ku ducaystay bannaanka. Markii aan rabay inaan guriga gudihiisa ku noqdo, qof baa kusoo tuuray dhagax guriga daaraddiisa. Waxa dhagaxa la socday warqad ka timid qof Masiixi ah oo muddo bilo ah aannaan is arkin sababo xagga amniga ah awgood. Warqadda waxa ku jirtay lacag la mid ah intii mushaharkaygu ahaa. Waan yaabay: Rabbigu si dhaba ayuu ii daryeelaa!" (www.pneumafoundation.org/pi_7_2003.jsp)

- Haddaad ahaan lahayd Farid ood warqaddan hesho, maxaad samayn lahayd? *Falanqeeya dareenka iyo caadifadda arrintaas ka dhalan lahayd.*

**Su'aasha 12:** Akhri qisada Maryan iyo su'aasha.

- Maxaad u malaynaysaa in Ilaah si la yaableh wax uga qabtay khasaarihii dhaqaale ee soo gaadhay Farid oo aanu Maryan waxba uga qabanin? *Ma garanayno middaas. Ilaah baa og waxa inoo wanaagsan nolosheena. Mararka qaar wuxuu ina tusiyaa mucjiso iimaankeennu ku xoogaysto, sida Farid oo kale. Marar kalena wuu ina itixaamaa si uu u xoogeeyo adkaysigeenna iyo samirkeenna, sida Maryan oo kale.*
- Maxaa Maryan ka xoreeya nacaybka ay u qabtay qofkaa ay qaraabada yihiin?. *waxay dooratay inay cafiso. Kadib waxa qalbigeeda buuxiyay farxad*

**Su'aasha 13:** Akhri su'aasha. Halkan maxaad ku qortay?
*Mararka qaar waxa sax in wax lagasoo horjeesto, gaar ahaan marka loo hadlayo Masiixiyiinta kale. Mararka qaar waxa dhacday in Rasuul Bawlos uu kasoo horjeestay in si xaqdarro ah loola macaamilay (tusaale ahaan. Falimaha Rasuullada 16:35-37). Laakiin hadiyo jeer waa in middaasi waafaqsanaato sharciga oo aanay noqonin aargoosi.*

**Su'aalaha 15:** Akhri su'aasha. Miyuu rumaystahay u fududaatay inuu cafiyo kuwa isaga garaacay?*maya.*

- Waxa uu sheegay inuu dhibaato kala kulmay cafis la'aanta kuwii isaga silciyay. Maxaad u malaynaysaa inuu middan uugala jeedo? *Waxa hubaala inuu ku dhibaatooday ciilka nafsaddiisa buuxiyay.*
- Ma jiraa mar uu ciil ku qabtay ood diidday inaad cafis la timaaddo? Natiijo noocee ah ayaad middaas ka heshay?
- Haddii qofkaas aad cafiday oo ciilka iska saartay, isbeddel noocee ah ayay middaasi kugu keentay?

**Imikana akhri jumladda ka danbaysa saduuqa iyo hadalka macallinka.**

- Ma ka fikiri kartaa qof dhibaato kuu gaystay? Qofkaas magaciisa ka fikir oo ku qor meesha bannaan. *Dadka sii wakhti ay arrintan ku sameeyaan. Si kalsoonida iyo siraha loo dhawro, ardayda lama*

*weydiinayo inay qofkaas magaciisa ku dhawaaqaan amaba ay qoraan.*

- Miyay kuu suurto gashay inaad sidaas samayso? Dareen noocee ah ayaad ka heshay dhahitaanka ereyadan?

## Ku farxidda siliceenna (Su'aalaha 17-19)

**Akhri 1 Butros 4:12-16.** *Qof waliba aayadahan ha kasoo saarto Kitaabkiisa.*

- Aayadahan waa tee aayadda kusoo jiidatay, sababtu waa maxay?
- Sheeg xilli uu Ilaah ku siiyay farxad adigoo ku dhex jiray silic.

## *Gunaanad*

**Addeecista waxbarista maanta:**

Waqti ku qaado usbuucan inaad Ilaah weydiisato haddii ay jiraan dad aad cafin karto. Way adagtahay oo kartidaadana kuma samayn kartid. Cidina kugu qasbi mayso inaad wax cafido, laakiin haddaad doorato inaad cafido, Ilaahbaa ku siin doona awoodda aadda aad ku fulin lahayd. Waxayna middaasi noloshaada u keeni doontaa farxad weyn!

**Mawduuca maanta yaad wax kala wadaagi kartaa?**

Qofkaas waxaad la wadaagi kartaa qisada addoonkii aan cafiska lahayn (Matayos 18:23-35).

**U wada ducaystan sidan:**

Ardayda ku hoggaami ducada idinkoo tallaabooyinkan qaadaya: **ugu horrayn,** Ilaah weydiista inuu inoo muujiyo qof aan u baahanahay inaan cafino.

**Intaas dabadeed,** si aayara u akhri tallaabooyinka 1 & 2.

**Ku ducaysta** ducada tallaabada 3, iyadoo qof waliba uu si aamusan u odhanayo magaca qofka ay rabaan inay cafiyaan.

**Akhri** tallaabada ugu danbaysa. Qof walba ha loogu duceeyo inay helaan awoodda ay sidan wax ugu cafin karaan marwalba.

# Casharka 11: Rag iyo Dumar Lammaane ah

**Waxa laga rabo barte kasta:**
a. Fahan qorshaha Ilaah ee ku aaddan guurka: nin keliya oo nolosha kula midoobaya naag keliya.
b. Mid waliba uu rabo raalli gelinta lammaanihiisa oo naftiisa uu ka horraysiinayo.
c. Raggu waa inay xaasaskooda siiyaan muhiimadda oo ka horreysiiyaan hooyooyinkood.
d. Xafid Bilowgii 2:24.

**Fahanka dhaqanka:**
- Guurka Islaamka dhexdiisa
- Hooyanimada Islaamka dhexdiisa

**Diyaari:** Warqad iyo qalimaan, si loo falanqeeyo su'aasha 3.

## *Furitaan*

**Dhaqangelintii usbuucii hore:** Miyaad awoodday inaad cafido qof dhibaato kuu geystay? Farqi noocee ah ayay middaasi noloshaada ku keenaysaa?*si gaara ula hadal dadka aan hadlin amaba uu ku adkaaday cafis inay sameeyaan.*

**Casharka 11 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**

**Su'aasha 1:** Waxa uu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadis waxaanu la midoobayaa xaaskiisa oo ay noqonayaan isku jidh. eaves (Bilowgii 2:24). **Su'aasha 2:** keliya, keliya, dhammaan **Su'aasha 3:**a) addeec; b) tixgelin leh **Question 4:**l

**U ducee dersiga maanta, Hordhac ka bixi mawduuca maanta:** Xidhiidhka aan la leenahay lammaanuhu waa ka ugu muhiimsan xidhiidhka aadanaha, waxa uu xitaa ka muhiimsan yahay kan waalidka. Mawduuca maanta waxa uu ku saabsan yahay qorshahaha Ilaah ka leeyahay guurka. ***Waxa muhiim ah in laga faa'idaysto deriska maanta haddii ardaydaadu anaay guursanin.*** *Waxa habboon in kooxaha falanqaynayaa isku jinsi noqdaan. Diiradda saar su'aalaha idinku tacaluqa. Mawduucani waa muhiim ee waqti siiya.*

## *Falanqayn*

### Ku talogalka Ilaah ee Guurka (Su'aalaha 1-11)

**Su'aasha 2:**Akhri odhaan kasta oo weydii:
- Miyaad shaqsi ahaan odhaahdan waafaqsan tahay?
- Maxaanad u waafaqsanayn?

*Jawaabahani waxay ku salaysan yihiin aragtida Kitaabka Quduuska ah, oo ku salaysan waxbarista rag iyo dumar laga abuuray ekaanshaha Ilaah, laakiin Masiixiyiintu way ku kala aragti duwanaan karaan dhinacyo ka mida jinsiyada kala duwan.*

**Su'aasha 3:** Muraajacee aayadda xifdinta, Bilowgii 2:24.
- Waa maxay ku talogalka Ilaah ee guurku? *Eeg su'aasha.*
- Maxaa iyaga dhexdooda ay tahay inuu dhaco marka la eego xagga jidhka, maanka iyo ruuxda? *Waa inay midoobaan –hal jidh.*
- Dhaqankeena marka la eego, goorma ayuu guurku bilaabmaa sidee se uu ku bilaabmaa?
- Sidee Masiixiyiintu ay middaas uga duwanaan karaan?*waqti ku qaata falanqaynta arrimaha ka jira deegaankiinna. Tusaale ahaan, xagga dalalka reer galbeedka waxa la falanqayn karaa sida lagu helo lammaane, wada noolaanshaha, galmada guurka hortiis, aroosyada iwm. Waxaad markaa ka wada hadashaan sida guurka Masiixiyadda uga duwanyahay arrimahaas oo dhan.*

**Su'aasha 5:**
Eeg sawirka.

- Maxaad kaga jawaabteen su'aasha 5 a) iyo b)?

*Waa arrin marar badan dhacda oo cid waliba ogtahay. Kitaabka Quduuska ahina waxa uu ina barayaa in hadiyo jeer muhiimadda koobaad la siiyo naagtaada balse iyana waxa muhiim ah in ninku uu daryeelo waalidkiis, xagga galbeedkana muhiimad lama siiyo waalidka.* ***wada akhriya su'aasha 4.***



*Mawduuca xigana ka wada hadla, furitaanka oo bar nimcada Ilaah iyo cafiska kuwa uu dhexdooda yimid furitaanku.*

**Su'aasha 7:** Akhri Matayos 19:3-6.

- Maalmahaas waxa fududayd in ninku uu naagtiiisa si sahlan ku furo. Muxuu Ciise Masiix kusoo xigtay aayadda5?
- Sidee ninka iyo naagtu u xoojin karaan guurkooda, jidh ahaan oo keliya maaha ee sidoo kale xagga qalbiyada iyo maankaba?
- Sida ku xusan aayadda 6, Masiixu ma waxa uu sheegay inuu yahay heshiis bani aadam mise waxa uu sheegay inuu intaas ka weyn yahay?
- Sida Masiixu uu ku sheegay aayadda 6, waa maxay sababta uu furniinku u qaldanyahay?

*Farrisiiyiintu waxay bari jireen in ninku naagtiisa uu furi karo haddii ay cuntada gubto!*

*Bilowgii 2:24.*

*Waqti inay wada qaqtaan, wada sheekaystaan, hawlaha wada qabtaan iyagoo u dhaqmaya sidii saaxiibbo dhab ah.*

*Islaamku waxa uu guurka uga hadlayaa inuu yahay heshiis laakiin Kitaabka Quduuska ahi waxa uu barayaa inuu intaas ka weynyahay oon la jebin karin.*

*Ilaah baa isku xidhay dadkuna waa inaanay kala jebinin (sidoo kale eeg aayadda.9). Si kastaba ha noqotee, mararka qaar guurku xitaa Masiixiyiinta dhexdooda wuu burburaa.*

**Su'aasha 9**: Akhri su'aasha. Jawaabehee ayaad dooratay? Maxaad u malaynaysaa inay sidani u dhacdo?
*a), b) iyo d) waxay aad uga dhex muuqdaan bulshada Islaamka. Waxa dhif ah xaaladda c).*

**Su'aasha 10:** Akhri hadalka macallinka iyo sadarka ugu danbeeya. Maxaad halkan ku qortay?
*Ninkani wuxuu u malaynayaa in naagtiisu ay tahay hanta uu leeyahay laakiin Kitaabka Quduuska ahi waxa uu barayaa in ninka iyo naagtu ay siman yihiin.*

**Su'aasha 11:** Akhri su'aasha oo dhan. Sidee ayay inoo caawinaysaa in Ilaah uu dareemayo xanuunkeenna?
*Waxa laga yaabaa in ardaydaadu ay ku jiraan mid ka mida xaaladahan aan farxadda lahayn. Waxay iyaga ka caawinaysaa inay ogaadaan in Ciise Masiix uu u naxariistay dad silcaya oo dunida jooga sidoo kalena uu dareemyo xanuunkeenna ina haysta marka aynaan ku faraxsanayn guurkeenna.*

## Ragga iyo Dumarka ku sugan 1 Butros (Su'aalaha 12-22)

**Su'aasha 13:** akhri su'aasha oo dhan.

- Maxay mararka qaar u adagtahay in naagtu addeecdo ninkeeda?
- Maxay mararka qaar u adagtahay in ninku tixgeliyo naagtiisa?

*Tusaale ahaan, waxa laga yaabaa in ninku uu noqdo danayste aan xikmad lahayn amaba gabadha ayaa rabta inay danteeda fushato.*

*Tusaale ahana, rag badani waxay dumarkooda ka fishaan inay iyaga u adeegaan.*

**Su'aasha 15 & 20:** Qof weydii inuu akhriyo waxa naagta (su'aasha15) iyo  Tariq (su'aasha 20) ay leeyihiin.

- Yay isku dayayaan inay raalligeliyaan-naftooda mise tan lammaanahooda?
- Muxuu Ilaah inaga rabaa inaan danayno: sideen u raalligelin karnaa lammaaneheena ama iyaguba inoo raalligelin karaan? Tusaale ka bixi sidaad isugu daydo raalligelinta lammaanahaaga, amaba dhibaatooyinka aad arrintaas kala kulanto.



**Su'aasha 21& 22:** Akhri sadarka koobaad.

- Ninku awood ma ku dhexyeelan karaa gurigiisa isaga oon garaacin naagtiisa iyo carruurtiisa?

*Mararka qaar, in naagta la garaacaa waa wax dadka qaar ku dhaqmaan, laakiin Kitabaka Quduuska ahi waxa uu leeyahay 'afooyinkiina u jeclaada sida jidhkiina oo kale. Efesos.5:28.*

- Muxuu  1 Butros 3:7 ka leeyahay sida loola dhaqmayo afooyinka ama naagtaada? *'maamuusa' oo ixtiraam iyo tixgelin kula dhaqma.*
- Tusaale ka bixi sida middan dhaqangelinteedu noqonayso.
- **Akhri su'aasha 22**: Maxaad kaga jawaabtay? *Jawaabuhu way kala duwanaan karaan, laakiin su'aashu waxa weeyi in ragga laga caawiyo sidii ay u maamuusi lahaayeen afooyinkooda.*

## Masiixa iyo lammaanaha (Su'aalaha 23-26)

**Su'aasha 24:** Akhri qisada dhabta ah ee ku dhex qoran sanduuqa, iyo su'aasha ka hoosaysa. Fikir noocee ah ayaad ka qabtaa?

*Lammaanuhu waxa laga yaabaa inuu Masiixi noqdo. Laakiin haddii taasi aanay dhicin, marka qofka Masiixiga ahi uu leeyahy samir iyo jacayl, waxa ay taasi suurta gelinaysaa in guriga xasilooni dhex timaaddo.*

**Su'aasha 26a:** Akhri sadarka koobaad.

- Jawaabehee ayaad dooratay, maxaad se u dooratay?
- Sideed si wada jira carruurtiina ugu tabobari kartaan raacitaanka Masiixa?

*Tusaale ahaan, Masiixi wanaagsan oo tusaale noqda inaad ahaaato. Carruurta in wakhti la siiyo, la daneeyo, la jeclaado, si xikmadaysan loo edbiyo, loo cudur daarto marka qalad laga galo, loo duceeyo oo Kitaabkana loo akhriyo, oo sidoo kalena laga qayb geliyo kulamada Masiixiyiinta kale.*

**Su'aasha 26b:** Akhri hadalka macallinka. **Hadba sida kooxdaadu tahay layligan u dhaqan gleiya.**
Ardayda sii warqado iyo qalimaan. Shan daqiiqo gudohood kaga fikir oo qor:

- 5 fikradood oo xoojin kara xidhiidhka aad la leedahay lammaanahaaga.
- **Ama**, haddii aanad xaas lahayn, 5 dhinac oo aad ka korto si aad mustaqbalka u noqoto nin/naag wanaagsan.

## *Gunaanad*

**Addeecista waxbarista maanta:** waa maxay waxa ugu muhiimsan eed ka baratay guurka? Sideed middan u dhaqangelin kartaa?

- Fikradaha aad qortay usbuucan kuwee ayaad fulin doontaa?

**Dhiirrigeli**: soo jeedi qaadashada koorso ku saabsan guurka Masiixiyadda haddii loo baahdo. Si gaara jaanis u sii cidda u baahan helista jawaabo shaqsi ahaaneed oo khuseeya deriska maanta.

**Wada ducaysta:**
U qaybi labo labo qof oo isku jinsi ah amaba lammaanayaal is qaba si dadku uga ducaystaa addeecitaanka iyo fulinta wixii ay ka barteen mawduuca guurka.

# Casharka 12: Xallinta Khilaafaadkeenna

| Waxa laga rabo barte kasta: | Fahanka Dhaqanka: |
| --- | --- |
| a. Dooro siyaabo wanaagsan ood u xallin karto khilaafaadka iyo murannada.<br>b. Fahan oo ku dhaqan saddex tallaabo oo muranka si suubban loogu xalliyo.<br>c. xafid 1 Butros 3:11. | • Khilaafaadka iyo sida loo xalliyo<br>• Ilaah miyuu dareen leeyahay?<br><br>**Diyaari:** ka fikir in kooxdaada uu ay ku habboontahay door qaadashadu. Diyaari qasiido iyo iskutallaab xilliga ducada. |

## *Furitaan*

**Dhaqangelintii usbuucii hore:** Maxaad sameysay toddobaadkii lasoo dhaafay si aad u xoojiso guurkaaga amaba lammaanahaaga aad u farxad geliso? Sidee arrintaasi u shaqaysay? Haddii aanad xaas lahayn, maxay yihiin tallaabooyinka ku camal-falka ah eed samaysay?

**Casharka11 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**

**Su'aasha 1:** Saddexda siyaaboodba waa qaab xun oo loo xalliyo murannada.
**Su'aasha 2:** dareennada, hadal, bixi, cafiska aqbal.
**Question 3:** Nabad ha doondoono oo ha raacdaystot (1 Butros 3:11)

**Hordhac ka bixi dersiga maanta:** haddaan nahay Masiixiyiin miyay suurtogal tahay inaan helno nabad taam ah oon wax khilaaf ahi dhexdeenna imanin? *Fikir ahaan waa suurtogal, laakiin marka laga hadlayo ficil ahaan waxa hubaala in Masiixiyiinta aan dhexdooda khilaafa laga waayaynin. Si kastaba ha ahaatee, haddaan nahay rumaystayaal waa inaan lahaano siyaabo wanaagsan oo loo xalliyo khilaafaadka.*

## *Falanqayn*

### Khilaafaadka dhex yimaadda Masiixiyiinta (Su'aalaha 1-5)

**Su'aasha 5:**

- Hadallada  ka bilaabma a) ilaa e), kuwee ayaad ka dooratay?
- odhaahda f), tusaale noocee ah ayaad ka bixisay waayo-aragtinimadaada?

### Ilaah waxa uu jecelyahay inaan xallino khilaafaadkeena (Su'aasha 6)

**Su'aasha 6:**

- Miyaad u malaynaysaa in ficilladeenu ay Ilaah ka muragaysiin karaan? *Islaamku waxa uu barayaa inaan ficilladeenu saamaynin Ilaahay, laakiin Kitaabka Quduuska ahi waxa uu barayaa inay ficilladeenu saameeyaan Ilaahay. Tusaale ahaan, sida ku xusan Bilowgii 6:5-6, Ilaah waxa uu ka murugooday denbiyadii dadka, qalbigiisiina waxa ka buuxsantay murugo.*
- Maxaad ugu malaynaysaa in murannadeenu ay Ilaah murugo geliyaan? *Tusaale ahaan, Masiixu waxa uu qiimo weyn u bixiyay inuu ina siiyo nabad, waxaanu inaga rabaa inaan ku noolaano nabad. Sidoo kale, khilaafka inaga dhexeeya waxa uu tusaale xun u yahay dadka aan rumaysadka lahayn.*

**Akhri 1 Butros 3:8-12:**

- Maxay yihiin ficillada iyo fikirrada wanaagsan ee inaga caawin kara inaan nabad ku wada noolaano? (aayadda 8)
- Maxay yihiin ficillada xunxun ee la inaga rabo inaan iska ilaalino? (aayadda9)
- Taas beddelkeeda maxaan samaynaa?
- Maxaan samaynaa sida ku xusan aayadda 10? Sababutna waa maxay?

*aayadda 8, Kulligiin isku maan ahaada, oo isu jixinjixa, oo sida walaalo isu jeclaada, oo isu naxariista, oo is-hoosaysiiya.*
*aayadda 9, Shar shar ha ka celinina, cayna cay ha ka celinina, laakiinse duco ka celiya.*
*aayadda 10, Carrabkiisa shar ha ka joojiyo, Bushimihiisana yaanay khiyaano ku hadlin.*
*Waayo carrabka sharka lihi khiyaaano ayuu sameeyaa murankuna khilaafkuu*

- Isbeddel noocee ah ayay aayadahani ku keenayaan dabeecaddaada marka xigta eed qof is khilaaftaan? Aayadahan qaybtee xifdin loogu talo galay? Dhammaan wada xafid oo korka ka qabo.

*sii xoogeeyaa*

## Siyaababaha xun ee loo xalliyo Khilaafaadka (Su'aalaha 7-10)

**Su'aalaha 7-10:** Falanqeeya saddexda siyaabood ee xunxun loona xalliyo khilaafaadka.

- Saamayn xun oo noocee ah ayay ku yeeshaan dadka iyo xidhiidhada?
- Ma jiraa qof arkay mid ka mida siyaababahan xunxun ee loo xalliyo khilaafaadka? Maxay ahaayeen natiijooyinka xuxun ee arrintaas ka dhashay?

## Siyaababaha wanaagsan ee lagu xalliyo khilaafaadka (Su'aalaha 11-23)

**Maxay yihiin saddexda siyaabood ee loo adeegsan karo xallinta khilaafka? Mid walba si gaara ayaan uga hadli doonnaa.**

**Tallaabada 1: dareernkaaga Ilaah u muuji.**

**Su'aalaha 11-13:**Maxay muhiim u tahay inaan dareenkeenna Ilaha u muujino ka hor inta aynaan qofka kale la hadlin?

*Iyadoo Ilaah inaga caawinayo waxaan xakamayn karnaa cadhadeena. Qofka kalena si degan ayaan ula hadli karnaa. Haddii cadhada aan kusii soconana xaaladdu way sii xumaanaysaa uun.*

**Tallaabada 2: Qofka kale la hadal.**

**Su'aasha 14:** Akhri hadalka macallinka.

- Maxaa wanaaga ee ku jira falanqayntooda?
- Maxay waxyaalahani uga caawinayaan inay khilaafkooda xalliyaan?

*Way degganyihiin, way is dhegaysanayaan, hadalka iskama dhexgalayaan, waxay muujinayaan dareenka iyagoo daacad ah oo jacaylna muujinaya.*

**Su'aasha 17:**

- Halkan maxaad kaga jawaabtay eed ku qortay? Sababtu waa maxay? *Marka aan dhibaatada kala hadalno dad badan ay sii fogaataa sida dabayshuba iniinyaha meel fog u gaadhsiiso, waxaanay geysataa dhaawac oo waxaa adkaata dib-u-heshiisiinta.*
- Miyay fiicantahay in qof saddexaad oo dhexdhexaadiyaha meesha la keeno? *Falanqeeya. Waxa fiican hadiyo jeer in si toosa labada qof u xalliyaan khilaafka iyaga ka dhexeeya. Laakiin haddii ay xallin kari waayaan, waxa fiican in qof saddexaad oo labada dhinacba qadarinayaan uu dhexdhexaadiyo (eeg su'aasha 9).*

**Tallaabada 3: Bixi oo aqbal cafiska.**

**Su'aasha 20:** Akhri hadalka macallliimiinta.

- Wada sheekaysigan, yaa cudurdaar bixinaya: Cali mise Karim?

*Labadaba! Labaduba waxay sheegayaan qaladkooda, waanay ka cudur daaranayaan.*

**Kulan dhaqangelin – Xallinta khilaafka door qaadashada (5 daqiiqo iyo falanqayn)**

Kooxda u qaybo labo laba qof oo ha kala ah **1** iyo **2**. Qof waa inuu noqdo A, kan kalena, B, oo ha metelaan sidii ay ku xallin lahaayeen muran ama khilaaf dhexdooda yimid. Intaas dabadeed, qaar ka mida dadku hasoo bandhigaan siday khilaafkan u xalliyaan.

1. Qofka A ayaa marhore saaxiibkiisa B amaahiyay lacag balse amaahda xilligii la celin lahaa muu celinin.
2. Nin iyo naagtiisa ayaa cunto ku casuumay dad ninka qaraabadiisa ah. Naagta oo ah B ayaa cuntadii xilli danbe soo dhigaysa. Ninkeeda oo ah A ayaa ku xanaaqaya oo dadka martida ah hortooda ayuu ku canaananayaa. Iyadu waxay u malaynaysaa inuu ceebeeyay isna wuxuu u malaynayaa inay ceebaysay.

**Marka bandhiga la eego: miyay isticmaaleen saddexda tallaabo? Sidee bay u ekayd? Maxaad baratay?**

**Su'aalaha 22-23:**

- Maxaan cafiska u samaynaa? *Ilaah baa ina cafiyay.*
- Qofka imisa jeer ayay tahay inaan cafino? Wada akhriya oo falanqeeya Matayos18:21-22.
- Eeg sawirka ku jira su'aasha 23. Dareenkaagu waa sidee marka aad la heshiiso qof uu khilaaf idinka dhexeeyay.
- Maxaynu samayn karnaa haddii qof uu diido dib-u-heshiisiinta? *Akhri hadalka macallina.*

**Waqti aamusnaana qaata si qof waliba Ilaah usoo hordhigo cid ay is khilaafsan yihiin.**

<table>
<tr><th colspan="2">Gunaanad</th></tr>
<tr>
<td>Addeecista Waxbarista maanta:<br>• Maxaad baratay maanta oo isbeddel ku keeni kara sida aad khilaafka u xalliso?<br>• Wada akhriya dhaqangelinta deriska.<br>• Dhaqangelintu waxay diyaarinaysaa sida qofkaas loola hadlo, laakiin waxaad u baahantahay inaad ficil ahaan u fuliso. Marka Ilaah yidhaadho la hadal qofkaas, ku dhaqaaq arrintaas oo fuli.</td>
<td>Wada ducaysta: Xasuusta in la ina cafiyay!<br>1. Wada dhegeysta qasiido ku saabsan cafiska. Waxaad dadka dhexdooda dhigi kartaa iskutallaab la eego ooo laga fikiro. Wakhti aamusnaana ku qaata ka fikirista Masiixa iyo cafiska uu inoo fidiyay.<br>2. Dadku Ilaah si aamusnaana ha u weydiistaan inuu ka caawiyo inay la heshiiyaan qof kasta oo ay is khilaafsan yihiin.<br>3. Ugu duceeya barako iyo dhawritaan inta uu socdo cafiska iyo dib-u-heshiisiintu usbuucan.</td>
</tr>
</table>

# Casharka 13: Marag Fur

| **Waxa laga rabo barte kasta:** | **Fahanka Dhaqanka:** |
| --- | --- |
| a. Faafi warka ku saabsan Masiixa.<br>b. Xikmad oo la yeesho iyo in la garto wakhtiga ku habboon in dadka warka lala wadaago.<br>c. Awood u yeelo inaad sharraxdo waxyaalaha Masiixu ino qabtay inaga.<br>d. Xafid 1 Butros 3:18. | • Muslimiinta iyo maragfurka<br>• Taxadir mise dhiirranaan?<br>• tusaalaha biriishka ama buundada<br><br>**Diyaari:** haddii la heli karo muuqaal u diyaari su'aasha13 |

## *Furitaan*

**Muraajecee dhaqangelintii deriskii usbuucii hore:** Miyaad awoodday inaad xalliso khilaaf qof idinka dhexeeyay mise weli waxaad ka ducaysanaysaa helitaanka jaaniska ku habboon arrintaas? Sidee wax u dhaceen?

**Ilaah ku ammaan wixii uu inoo qabtay, kadibna u ducee deriskan.**

**Casharka 13 muraajacaynta barashada shaqsi ahaaneed:**

**Su'aasha 1:** a) cabsanaya; b) diyaarsan; c) degenaan, ixtiraam
**Question 2:** a) diyaarsan, jawaab; b) qaboobaan, ixtiraam **Su'aasha 3:** eeg su'aasha 10 (1 Butros 3:18)

**Hordhac ka bixi dersiga maanta:** Yaa kuu sheegay nolosha cusub ee ku jirta Masiixa? *Qof walba weydii inuu ka qayb qaato*.
Waxaan nolosha cusub u haysanaa waa iyadoo qof uu inoo sheegay oo inoo marag furay. Sidoo kale inagana waxa la inaga rabaa nolosha cusub een haysano inaan inana dadka kale la wadaagno si ay iyaguna u helaan. Marag furku waxa weeyi waajib dul saaran dhammaanba xerta Masiixa.

## *Falanqayn*

### Masiixa oo loo marag furo (Su'aasha 1)

**Akhri 1 Butros 3:14-18**



- Maxay yihiin saddexda waxyaalood een ka b aran karno 1 Butros 3:14-15 ee muhiimka u ah maragfurka?

*'ha ka cabsanina', 'mar kasta diyaar u ahaada inaad u jawaabtaan nin alla ninkii wax idinka weydiiya sabab ku saabsan rajada aad leedihiin, laakiinse qabow iyo cabsi ugu jawaaba'.*

### Ha Cabsanina (Su'aalaha 2-7)

**Su'aasha 5:** Akhri su'aasha.



- Xubnaha qoyskaaga ee Muslimka ah ma jirtaa cid weli ogsoon inaad tahay Masiixi?
- Miyaad aad u ducaysataa sida ninkan ama gabadhan sawirka ka muuqata oo kale?

**Su'aasha 6:** Akhri su'aasha. Jawaab noocee ah ayaad halkan ku qortay?

- Miyay weli kusoo martay jarribaad ah inay dadka Muslimka ah ee qaraabadadaada ahi ogaadeen inaad tahay Masiixi? haddii ay jirto, natiijo noocee ah ayaa ka dhalatay? *Arrintani waa muhiim ee wakhti ku qaata falanqaynteeda.*
- Haddii weli aanay arrintani kusoo marin, miyaad dooran kartaa marka aad dadka kale la wadaagayso? *Waa inaan u diyaar garawno marka ay arrintaasi dhici doonto iyadoo lama filaan ah.*

## Diyaar u ahaada inaad u jawaabtaan (Su'aalaha 8-13)

**Su'aasha 8:** ardayda weydii waxa ay ka yidhaahdaan A, B iyo C. *jawaabo suurtogal ah:*
***A**. Wiilku waxa uu muujinayaa awoodda iyo dabeecadda aabbaha. Ereyga wiil uma isticmaalno ee keliya macnihiisa dhabta ah. Tusaale ahaan afka Carabiga, waxa la isticmaalaa 'ibnu sabiil' oo macneheedu yahay 'inankii ama wiilkii wadada' oo loogala jeedo qofka socdaalka ku jira ama musaafirka.*
***B**. Waan jecelnahay awowyaasheen iyo qabiilka iyo reerka aan ka dhalanay. Waxaan raacaa Ciise oon ahayn reer galbeed balse kasoo jeeda Bariga Dhexe. Kunkii sanadood ee u horreeyay Masiixiyiinta ugu badani may ahayn reer galbeed maanta waa sidaas oo kale!*
***C**. Run maaha in Masiixiyiintu ay beddeleen Kitaabka Quduuska ah. Matxafyada dunida maanta waxa laga helayaa kumaanaan qoraal gacmeed ah oo ah Kitaabka Quduuska ah. Marka la is barbardhigo waxaas oo qoraal ahna waxa kalsooni lagu qabayaa in Kitaabka Quduuska ahi uu sax yahay oo wax is beddel ah aan lagu samaynin.*

**Su'aasha 9:** akhri hadalka macallinka. Jawaab noocee ah ayaad siin lahayd haweenaydan?
**Su'aasha 10:**Akhri su'aasha oo xafid aayadda xifdinta loogu talogalay.

## Dhaqangeli: Dadka in loo sheego warka wanaagsan

**Su'aasha 13:** dadka u qaybi labo labo.

- Qofka hore waa inuu saddex daqiiqo ku qaato inuu dadka u sharraxo waxyaalaha Ciise u sameeyay aadanaha. Waa inuu qofkaasi isticmaalo jawaabta ku qoran su'aasha 13. Sidoo kale hadday u baahdaan waxay isticmaali karaan Kaabaha 2.
- Kadibna qof kale hadana ha qaato jaaniska oo isna saddex daqiiqo sharraxista arrintaas.
- Mar kale isu yimaadda. Miyuu layligani kaa caawinayaa inaad diyaar u noqoto jawaab bixin?
- 1 Butros 3:18 ma kaa caawinaysaa inaad sharraxda waxa Ciise Masiix u qabtay aadanaha?

**Qisada nebiyada oo la sheego:**

- Waxaan u baahanay inaan ku bilowno Ciise iyo Axdiga Cusub. Sideed nebiyada Axdiga Hore ugu adeegsan kartaa inay ahaayeen kuwo kasii hadlaya oo sii tilmaamaya Ciise Masiix?

*Muslimiintu waxay yaqaanaan nebiyada sida Aadam, Nuux, Ibraahim, Yuusuf, Muuse iyo Daa'uud. Laakiinse Qur'aanku si faahfaahsan iyaga ugama aanu hadlin. Waxaan asxaabteenna u sheegi karnaa inay jiraan warbixino xiiso badan oo ku saabsan nebiyadan isla markaana laga helayo Tawraat. Kadibna inaga oo qisooyinka adeegsanayna waxaan muujin karnaa inay sii tilmaamayeen Masiixa oo xal u keeni doonay habaarkii iyo denbigii laga dhaxlay Aadan.*

***Haddii wakhtigu saamaxayo, daawada bilowga filinka Ciise, ama 'qisada nebiyada oo laga heli karo youtube. Labaduba waxay soconayaan 8 daqiiqo waxaana la heli karaa iyagoo afaf kala duwan ku baxaya.***

## Qabow iyo cabsi ugu jawaaba (Su'aalaha 14-18)

**Su'aalaha 16-17:** Akhri su'aalaha.

- Sida ku xusan su'aasha 17, maxaad samayn doontaa xaalad ahan adagi haddii ay kulasoo dersaan? *Labada xaaladood ee hore waxa laga yaabaa inay isbeddelaan maruun, laakiin tan saddexaad waa halis siday isku bedeshaana way adagtahay.*
- Marka aad Masiixa aawadii qaraabadaada u diiddo, miyaad si qabow iyo tixgelin leh ugu sheegi kartaa iyaga arrintaas? *Si ixtiraam leh oon cadho ku jirin ula hadal. Ehelkaaga si muuqata u taageer oo u muuji inaad iyaga jeceshahay. Ha u samayn middan adigoo isku dayaya inaad ceebayso balse raadi wakhtiga ku habboon kaalmada iyo taageerada aad siinayso.*

## Kibista nolosha (su'aalaha 19-20)

**Su'aasha 19:**

- Maxay shaqadeenu ula mid tahay tuugsade qof kale oo tuugsada ah u sheegaya sida lagu helo kibis?

*Mehdi Dibaj ayaa markii la maxkamadaynayay middan ugusoo hal qabsaday maahmaah. Waxa uu yidhi, "haddaad aragto qof indho la' oo ku dhacaya god ood ka aamusto waxaad tahay denbiile". Lix bilood kadib waa la dilay isaga oo waxa uu noqday shahiid. Dhiirrigelintiisii geesinimadu ku jirtay waxay galaafatay naftiisii. Maragfurkiisii waxa uu dhalay shahiidnimo.*

- Middaas miyuu u qalmayay? Maxaad u malaynaysaa?

**Su'aasha 20:** akhri qisada iyo jawaabta.

- Sideen u miisaami kartaan dedejinta u maragfurista ehelkeenna iyo sugitaanka waqtiga ku habboon?

***Rumaystayaasha waayo aragga ah taladooda waxa ka mid ah waxyaalahan:***
► Noloshaadu tusaale wanaagsan ha u ahaato qoyskaaga;► Ha ku degdegin inaad dhaleecayso diinta dadkaagu haystaan; ►Markaba ha sheegin inaad Masiixi noqotay; ►Si xikmad leh u tilmaan inaad Kitaabka Quduuska ah wax fiican ka baratay; ►Haddii qoyskaagu ku weydiiyaan inaad Masiixi tahay, ha dafirin arrintaas; ►Ka ducee in Ilaah iyaga qalbiyadooda diyaariyo; ►xubnaha qoyskaaga kuwa ugu naxariista badan eed is fahmi kartaan ugu horreynta ku horree inaad u sheegto;►Waxa laga yaabaa in qoyskaagu ay maqlaan wax ku saabsan iimaankaaga intaanad uba sheegin ka hor, laakiin Ilaah baa xaalad kasta maamula wax waliban sida ugu habboon ayay u shaqayn;

| Gunaanad | |
|---|---|
| **Addeecista waxbarista maanta:**<br>• Isbeddel noocee ah ayuu deriskan maanta ku keenayaa noloshaada?<br>• **Wada akhriya dhaqangelinta casharka.** Maxaad la wadaagaysaa qofka aad u sheegayso wax ku saabsan Masiixa? | **Wada ducaysta:** Ardayda labo labo isula wadaagaan cidda iimaankooda wax ka og, kadibna ha isugu duceeyaan xikmad iyo xoogganaan iyo inay maragfur wanaagsan siiyaan dadka, gaar ahaan qoysaskooda. |

# Casharka 14: Baabtiiska

| Waxa laga rabo barte kasta: | Fahanka Dhaqanka: |
|---|---|
| a. Fahan saddexda xaqiiqo ee baabtiisku muujinayo.<br>b. Dib u eeg baabtiiskoodii ama hore u eeg baabtiiskooda mustaqbalka.<br>c. Xafid Matayos 28:19. | • Masiixiyiinta kasoo jeeda Muslimka iyo Baabtiiska<br>• Islaamka iyo weysaysiga ama is nadiifinta |

## *Furitaan*

**Dhaqangelintii usbuucii hore:** Jaanis noocee ah ayaad u heshay usbuucan inaad cid u markhaati furto? *Dadka aan jaanis u helin weydii inay arrintaas ka ducaysanayaan.*

### Casharka 14 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:

**Su'aasha 1:** quruumaha oo dhan, idinkoo ku baabtiisaya magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuska ah (Matayos 28:19).
**Su'aasha 2:** a) qof; b) denbiyo, maydhis; c) bulsho **Su'aasha 3:** aad bay muhiim u tahay

### Hordhac ka bixi dersiga maanta:



Ma waxaad la mid tahay sida Xamid oo ah ninka sawirka ka muuqda? Su'aalo noocee ah ayaad ka qabtaa baabtiiska?

Su'aalaha waxaan isku dayi doonaan inaan maanta ka jawaabno.

**U ducee deriska maanta** *ama mid ka mida ardayda weydii inuu duceeyo.*

## *Falanqayn*

### Maxaala ii baabtiisayaa? (Su'aalaha 2-3)

**Su'aasha 2:** Akhri su'aasha.

- Maxay tahay sababta ugu muhiimsan ee la isu baabtiisaa? *Waayo waxa inagu amray Sayidkeenna Ciise Masiix.*
- Miyaad ogtahay sida ay ahayd xaaladdu markii Masiixu amray baabtiiska? *Markii la sarakiciyay kadib intii aanu samada aadin, waxa uu xertiisa ku amray inay sii wadaan shaqadii uu bilaabay. Lagasoo bilaabo wakhtigaas ilaa maanta, Masiixiyiintu waxay samaynayeen xer waanay baabtiisayeen.*
- Yaa dusha ka akhrin kara aayaddii xifdinta ee Matayos 28:19?*qof waliba dusha ha ka xifdiyo aayaddan.*

### Baabtiisku muxuu tusinayaa?*Waxaan Masiixa ku ahay qof cusub* (Su'aalaha 4-8)

**Su'aasha 4:** Akhri sadarka koobaad.

- Adigoo isticmaalaya ereyadaada, sharraxaad ka bixi waxa uu baabtiisku ka tusinayo dabeecaddeenii hore iyo tan cusub.

*Dabeecaddeenii hore way dhimatay waxaana la inagu sara kiciyay dabiicad cusub imika.*

**Su'aasha 7:** Akhri qisada Firaz.

- Kuwiina la baabtiisay, miyaad dareenteen waxa uu Firaz dareemay markaad biyaha kasoo sarakacdeen?
- Maxaad dareentay?

## Baabtiisku muxuu tusinayaa? *Denbiyadeydii waa la maydhay* (Su'aalaha 9-11)

**Su'aasha 10:** Akhri sadarka koobaad.

- Biyaha baabtiisku ma waxay leeyihiin awood denbigeenna maydha?*Maya*
- Maxaa denbiyadeenna maydhaya?*1 Yooxanaa 1:7- Dhiigga Ciise ayaa ina nadiifiya. Biyuhu jidhkeena ayuun bay ka maydhaan wasakhda, laakiin baabtiisku waxa uu calaamad xooggan u yahay Masiixa oo qalbiyadeenna ka maydhaya denbiga.*

## Baabtiisku muxuu tusinayaa? *Waxaan ku biiray ummaada Masiixa* (Su'aalaha 12-14)

**Su'aalaha 12-13:** Akhri su'aasha ku saabsan ku biirista ummadda Masiixa

- Maxaad ku odhanaysaa qof yidhaahda, 'baabtiisku anuu gacantayda ku jiraa, waana wax noo dhexeeya aniga iyo Ilaah, umana baahni inaan ku biiro kaniisad'?

*Sida ku xusan 1 Korintos 12:13, baabtiisku waxa uu la macno yahay ka mid noqoshada jidhka Masiixa – ummaddiisa. Waxa markaa ay tahay inaan ku biirno kaniisad. Waxaynuna markaas wada noqonaynaa dad is leh oo wada ah dadka Ilaah doortay.*

**Su'aasha 14:** idinkoon buugaagta ka eegin, dib u muraajaceeya saddexda xaqiiqo ee ah: baabtisku muxuu tusinayaa?

- Kuwan midkoodee kuugu muhiimsan?

## Baabtiisku ma aad buu muhiim u yahay? (Su'aalaha 15-17)

**Su'aalaha 15-16:**

- Qof waloo Masiixi ah ma aad bay muhiim ugu tahay in la baabtiiso? Waa maxay sababtu?*falanqeeya.*

**Bixinta Maragfurkaaga:**

Kasoo qaad inay tahay munaasabaddii baabtiiskaaga iyo inaad maragfur bixinayso. Shan daqiiqo maxaad ku odhan lahayd? Waxaad isticmaashaa waxyaalaha aad u diyaarsatay su'aasha 16.

*Dadka waxaad ka dalbataa inay markhaatifurkooda kooxda la wadaagaan amaba labo labo isula wadaagaan.adna sidoo kale waa inaad diyaar u ahaato inaad maragfurkaaga la wadaagto. Ogow in hadiyo jeer dadka kasoo jeeda asal ahaan Islaamka in badan la weydiioy maragfurkooda. Markaa waxaad qofka waydiin karaa haddii uu jecelyahay cidda uu doorbidayo inuu la wadaago maragfurkiisa.*

## Goormaa la I baabtiisayaa?

**Su'aasha 21:** Maxaad su'aashan kaga jawaabtay? *Soo jeedinta kolba xaaladdu sida ay tahay.*

- Cid walba ha ogaysiin balse casuun dadka kuwooda la isku hallayn karo;
- Baabtiiska ku samee meel qarsoon oon cid waliba arki karin;
- Hal kamarad oo keliya goobta keen oo qofkana weydii cidda uu u ogolyahay sawirkiisa inay qaadato;
- Kamarada yaan sawirka lagaga qaadin qofku isaga oo biyaha ku jira (sawirada koox ahaan ayaa loo wada geli karaa marka hawshu dhammaato kadib)
- Haddii ay jirto shahaado baabtiis, waxaad ku xafidaa meel ammaan ah.

**Su'aasha 22:** Akhri sadarka koobaad.

- Maxaad halkan ku qortay?

*Wada falanqeeya. Ma jirto jawaab saxsani waayo waxa ay ku koobantahay kolba xaaladdu sida ay tahay. Kuwa baabtiiskooda la sugay inay mar la qaataan lammaanohooda ee fursad u helay way ku farxayaan. Kuwa kale een jaanis u helin amaba sugayay wakhti badan oonu lammaanihiisu Masiixa raacin, waxa u wanaagsan inay guda galaan hawsha baabtiiska marka ay u arkaan inay ku haboontahay.*

**Fiirogaara**: hubi in ardaydu ay buugaagtooda kaga jawaabeen su'aalaha 21 iyo 22. Qoraalku waxa uu iyaga ka caawinayaa inay si fiican uga fikiraan oo hadhowna si fiican uga qayb qaataan kulanka falanqaynta.

- **Akhri hadalka macallinka.**
- Inkasta oo baabtiisku uu khatar noqon karo, hadana maaha inaan cabsano. Waxa weeyi xilli la dabbaal-dego!

<table>
<tr><th colspan="2">Gunaanad</th></tr>
<tr>
<td>Addeecista waxbarista maanta:<ul><li>Dersiga maantu muxuu kusoo kordhinayaa noloshaada?</li><li>Wada akhriya dhaqangelinta casharka. Haddii uu jiro qofaan garanayn cid uu la hadlo, u tilmaan iyaga qof ku habboon.</li><li>Usbuucan waa inaad qabato shaqadan haddii aan hore laguu baabtiisin. Haddii la gu baabtiisay, waxaad la kulmi kartaa qof ka mida kooxda oon la baabtiisin oo weli ka fikiraya qaaditaanka tallaabadan. Qofkaas taladaada sii oo la ducayso.</li></ul></td>
<td>Wada ducaysta:<br>Dhawr daqiiqo oo aamusnaana sii ardaydu inay ducaystaan oo ka fikiraan sidii loo baabtiisi lahaa iyo goortii la baabtiisi lahaa. Intaas dabadeed, weydii dadku inay kooxda la wadaagaan wax ay Ilaah ugu mahadnaqayaan iyo haddii ay jirto meel ay baahi ka qabaan. Ilaah ammaana oo kana duceeya baahiyaas jira.</td>
</tr>
</table>

# Casharka 15: Jidka Toosan

| **Waxa laga rabo barte kasta:** | **Fahanka Dhaqanka:** |
|---|---|
| a. U noolow Ilaahay dartiis.<br>b. Ogsoonow inaynaan jidka toosan ugu socon karin kartideena inoo gaarka ah.<br>c. Fahan in Ciise uu yahay kan inoo keenaya xornimada dhabta ah.<br>d. Xafid 1 Korintos 6:19-20. | • Dhawrista iyo ku dhaqanka shareecada Islaamka<br>• Muslimiinta iyo jidka toosan<br>• Denbiyada waaweyn iyo kuwa yaryar |

## *Furitaan*

**Dhaqangelintii usbuucii hore:** Miyaad talo ka hesho baabtiiska amaba aad talo ka bixisay? Maxaad go'aansatay? *Haddii uu jiro qof raba in si dhaqso ah loo baabtiiso, kulanka dabadii ka wada hadla sidii loo falanqayn lahaa arrintaas.*

**Casharka 15 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**
**Su'aasha 1:** a) sharciga Muuse; b) Qaynuunka ama sharciga Masiixa **Su'aasha 2:** Quduus

**Su'aasha 3:** a), b) iyo c) dhammaantood waa mamnuuc sharciga Masiixa marka la eego; d) iyo e), weydii waxay ardaydu qoreen.
**Su'aasha 4:** 1 Korintos 6:19-20. Ee su'aasha 21.

**Hordhac u samee dersiga maanta:** shuruucda Masiixiyaddu miyay ka adagyihiin mise way ka sahlanyihiin kuwa Islaamka?
*Falanqeeya. Dadku fikirdooda ha dhiibtaan. Saddexda usbuuc ee soo socda waxaan wax ka baran doonnaa noocyo kala duwan oo shareecada ah.*

## *Falanqayn*

### Maxay dadku u raaci waayaan jidka toosan? (Su'aalaha 1-4)

**Eeg sawirka ninka sarkhaansan.**



- Muxuu ninkani khad toosan ugu socon kari laayahay? *Waayo wuu sarkhaansayahay.*
- Waa maxay macnaha ruuxiga ah ee tusaalahani? *Aadanuhu waxay hoos joogaan denbiga oo maamula. Si toos ah uma socon karaan xitaa haddii ay doonaan inay isku dayaan.*
- Salaadda la tukado, Muslimiintu waxay yidhaahdaan, 'jidka toosan igu hanuuni'. Waxay u maleeyaan in Ilaah uu kumaankun nebiyo ah u soo diray si ay dadka u hanuuniyaan. Laakiin hanuunku miyuu ku filanyahya inuu ku hayo ku socoshada jidka toosan? Waa maxay sababtu? *Salaadda iyo nebiyadu way wanaagsanyihiin, laakiin dadku waxay u baahanyiin inay si toosan u socdaan.*

**Su'aasha 3:** Akhri su'aasha.

- Buuggu waxa uu leeyahay jawaabta d) ayaa sax ah ee miyaad ku waafaqsantahay?
- Sideed qof Muslim ah ugu sharrixi doontaa in salaadda badan iyo camalka badani aanu qofka ka badbaadin karin balwadda denbiga?

*Waxyaalahani caawimaad yar ayay geystaan laakiin xal uma noqonayaan dhibaatada asaasiga ah ee aadanaha oo u baahan awoodda Ilaah.*

### Xalaal iyo Xaaraan (Su'aalaha 5-6)

**Su'aasha 5:** Akhri su'aasha.

- Ereyada sanduuqa ku dhex jira kuwee ayaad hoosta ka xarriiqday?

*'fikirrada shar leh, iyo wasmada xaaraanta ah, iyo tuuganimada. iyo dilidda, iyo damacnimada, iyo sharka, iyo khiyaanada, iyo camal xumaanta. iyo il xun, iyo cayda, iyo kibirka, iyo nacasnimada'.*

- Cuntada xalaasha ahi Farrisiinta miyay

*Maya, waayo denbiyadooda gudaha ayaa*

gudaha ka nadiifinaysay?waa maxay sababtu?

- Cuntada wasakhaysan iyo fikirrada wasakhaysan keebaa daran?

*wasakheeyay.*

*Waxa daran fikirrada wasakhaysan, waayo waxay wasakheeyaan qalbiyadeenna waxaanay dhalaan ereyo xun iyo camal xun.*

**Su'aasha 6:**Maxaad ku qortay?

- Keebaa fudud inaan gacmeheenna nadiifino iyo inaan qalbiyadeenna nadiifino?

*Marka ardaydu fikirkooda qoraan, si qoto dheer ayay uga fikirayaan waxaanay u diyaar garoobayaan falanqaynta.*

## Dawada Ilaah u hayo qalbiga aan caafimaadka qabin (Su'aalaha 7-10)

**Su'aasha 7:** Akhri su'aasha oo aayaddana ku celceliya akhrinteeda.

- Yaa inoo suurogeliya ku socoshada Jidka Toosan? Yaa middaas awood inoo siiya? *Ruuxa Ilaah.*

## Doonista Ilaah oo Loo noolaado (Su'aalaha 11-16)

**Su'aasha 15:** Wada eega jawaabaha.

- Jawaabta a) waa run, laakiin ka waran b)? denbiyada yaryari iyagu waa sidee? Sababta sheeg?
- Ka waran jawaabta d), been sheegista, ama e), ku fikirista denbiga?
- Haddii denbi aan niyadda ku qabano oo aynaan ku dhaqaaqin, tani ma denbibaa?

*Waxa laga yaabaa Islaamka dhexdiisa inaanay muhiim ahayn laakiin Masiixa shariicadiisa waa denbi.*

*Haddii shaydaanku fikirkeena geliyo shar oo aan iska hor istaagno, maaha denbi. Laakiin haddaan ku fikirno oo qorshaysano, tani waa denbi.*

**Su'aasha 16:** Akhri su'aasha.

- Jawaabaha ku jira liiska kuwee ayaad u malaynaysaa inay muhiim yihiin? Waa maxay sababtu? *Jawaabaha b), c), e) iyo g) waxay ka ahaadeen 1 Butros, markaa waxay ku jiraan sharciga Masiixa. a), d) iyo f) kamay ahaanin Injiilka, waana kuwo ku xidhan doorashada xerta Masiixa. Sidoo kale b), c), e) iyo g) waxay ku saabsanyihiin fikirradeena iyo dabeecaddeena ku waajahan dadka kale. Shareecada Masiixa marka la eego, waxyaalahani way ka muhiimsanyihiin a), d) iyo f) oo khuseeya muuqaalkeenna dibadda.*

## Xornimo Runa (Su'aalaha 17-22)

**Akhri Rooma 6:11-18:** *waa aayado adag ee labo jeer akhri amaba labo tarjumaadood oo kala duwan akhri si ardaydu u dhuuxaan macnaha.*

Yaa sharrixi kara macnaha ku duugan aayadahan?

- Aayadda 11, maxaynu ka dhaminaa isla markaana u noolaanaa?

*Denbiga ka dhintay, Ilaah u nool.*

- Aayadda 12, 13 & 14 sheeg saddex jeer oo nolosheena aan denbiga kula dagaallano. Maxay yihiin saddexdan amar?

*'denbigu yaanu idiin talin' (aayadda 12), 'xubnihiina denbiga ha siinina' (aayadda 13), 'denbigu idiinma talin doonor' (aayadda 14).*

- Sida ku xusan aayadda 14, Muxuu denbigu inoogu talin waayay?

*Kuma hoos jirno sharciga ee waxaan ku hoos jirnaa nimcada.*

- Haddaan ku hoos jirno 'nimcada' macneheedu ma waxa weeyi inaan waxaan doonno samayno? Sababta sheeg? Eeg aayadaha 15-16.

*Maya! Waayo waa inaan Ilaah isu dhiibno, waxaynu xor u nahay addeecista Ilaah, ee denbiga xor uma nihin.*

- Aayadaha 17-18 waxay leeyihiin xaqnimada ayaan addoomo u nahay. Markaad naftaada eegto, middani ma culays baa mise waa farxad?

*Waa farxad. Falanqayntu waa inay koobsato farxadda ku jirta u noolaanta doonista Ilaah, oonay ku koobnaan uun loollanka lagula jiro denbiga.*

- Joogso oo ka fikir: Ma waxaad rabtaa inaad denbiga addoon u noqoto mise inaad noqoto qof xor u ah addeecista Ilaah?


**Su'aasha 17:** Akhri su'aasha oo dhan.

- Maxaad halkan ku qortay?

*1 Butros 4:2-3 waxay inoo sheegaysaa inaynaan u noolaan nafteenna balse u noolaano Ilaah.*

**Su'aasha 19:** Eeg ninka sawirka ka muuqda.

- Ninkani ma xor baa mise maaha? Maxaad halkna ku qortay?



**Su'aasha 20:** Halkan waxa ka muuqda isla ninkii.

- Maxaa ku dhacay silsiladihii ku xidhnaa? *Iskutallaabtaa jebisay.*
- Sideen ku heleynaa xorriyad runa, ma inaynu nafteena u noolaano mise inaan Masiixa u noolaano?
  *Xorriyadda dhabta ahi waxay imanaysaa markaan Masiixa addoomo u noqono. Waa wax lala yaabo laakiin waa run.*
- Aynu isla wadaagno tusaalayaal ka mida sida nolosheena Masiixu uga xoreeyay dhaqamo iyo caadooyin xunxun.

  *Lataliyaha haddaad tahay, noloshaada ka bixi tusaale kugu saabsan oo sheeg farxadda ku jirta Ilaah oo loo noolaado.*

**Su'aasha 21:** Akhri oo xafid aayadda xifdinta loogu talogalay (1 Korintos 6:19-20). Qofkasta oo ka mida kooxdu aayadda ha u sheego qofka ku xiga isagoo magaca qofkaas adeegsanaya. Tusaale ahaan, 'Cumar, adigu isma lihid, waayo qiimo weyn baa lagugu soo iibsaday. Sidaa aawadeed, Ilaah jidhkaaga ku ammaan.'

<table>
<tr><th colspan="2">Gunaanad</th></tr>
<tr><td>Addeecista waxbarista maanta: Waa maxay waxa ugu muhiimsan eed maanta baratay? Isbeddel noocee ah ayay middani ku keenaysaa noloshaada?<br>Wada akhriyaa dhaqangelinta deriska. Waxay inaga caawinaysaa inaan iskula xisaabtano denbiga. Labo labo isula wadaaga loollanka ay naftiinu kula jirto cadhada. Usbuucan dhexdiisa eeg sida aad cadhada u xakamayso.</td><td>Isugu duceeya labo labo: Ilaah ugu mahadnaqa inuu inaga xoreeyay addoonsiga denbiga. Weydiista inuu idinka caawiyo inaad noqotaan addoomada Masiixa.</td></tr>
</table>

# Casharka 16: Qaynuunka Jacaylka

**Waxa laga rabo barte kasta:**
a. In la raadiyo Rabbiga oo laga jeclaado qalbiga oo dhan iyo in deriska loo jeclaado sida nafsaddeena o kale.
b. Ogsoonow in jacaylka Ilaah uu inoo qabaa aanu ku tiirsanayn jacaylka aan isaga u qabno.
c. Fahan in Ilaah inaga rabo inaan wax walba uga mahad celino.
d. Xafid Markos 12:30-31.

**Fahanka Dhaqanka:**
- Waxa Muslimiinta ku dhiirrigeliya addeecitaanka
- Muslimiinta, xerta asalkoodu kasoo jeedo Islaamka iyo soo dhoweynta.

**Diyaari:** kibis iyo juus loo isticmaalo Cashada Rabbiga haddii aad rabto.

## *Furitaan*

**Dhaqangelintii usbuucii hore:** Usbuucan sideed cadhadaada u xakamaysay? Labo labadii usbuucii hore aad isu qaybiseen hadana isu raaca oo isla wadaaga in arrintaasi idiin shaqaysay iyo in kale. *5 daqiiqo markaad isla wadaagtaan, ku ducaysta ducadan adigoo ardayda ka dalbanaya inay kaa daba dhahaan ducada:*

> Aabbow Ilaahow… Waxaan kaaga mahadcelinaynaa ballanqaadka aad nasiisay haddii aan qirano denbiyadayada… inaad tahay caadil… oo aad naga cafin doonto denbiyadayada isla markaana aad naga nadiifin doonto xaqdarrada oo dhan… Fadlan naga cafi ereyadii cadhada badnaa ee aan is weydaarsanay toddobaadkii hore. Na daahiri oo nagu cusboonaysii Ruuxaaga… si aan usbuucan dhexdiisa si wanaagsan kuugu adeegno. Magaca Sayidkeena Ciise Masiix, aamiin.

### Casharka 16 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:

**Su'aasha 1:** ***koobaad:***Rabbi, Ilaah, qalbi, naf, maan, xoog ***labaad***: deris, naftaada
**Su'aasha 2:** jacayl **Su'aasha 3:**a) Been; b) Run

**Hordhac ka bixi mawduuca maanta:**Imika maadaama aan raacsanahay Ciise Masiix, sharci noocee ah ayaan markaa aan ku dhaqamaynaa? *Sharciga Masiixa.* Shareecada Masiixa waxa lagu magacaabaa qaynuunka jacaylka. Maanta aynu wax ka barano jacaylka Ilaah inoo qabo, jacaylka aan inagu Ilaah u qabno iyo jacaylka dadka kale aan u qabno.

## *Falanqayn*

## Ugu horraynti Ilaah baa ina jeclaaday (Su'aalaha 1-5)

Eeg sawirka labada addoon. Labada addoon keeba ku faraxsan inuu u adeego sayidkiisa? Maxay middani inooga dhigantahay? *Ilaah baan u adeegnaa inagoo uga mahadnaqayna badbaadada uu ina siiyay. Kuwo kalena waxay ugu adeegaan baqasho ay ka qabaan ciqaabta.*


**Su'aasha 4:** Akhri su'aasha.
- Miyaan si buuxda damaanad ugu haysanaa jacaylka Ilaah?
- Markaa miyuu cadaabta ina gelinayaa?
- Goorma ayaynu Ilaah qalbigeenna oo dhan uga adeegnaa?

*Haa, haddii aan Masiixa ku jirno. Maya, Masiixa ayaa bixiyay qaantii denbiyadeenna. Muslimiinta badankoodu ma hubaan inay jannada si toosa u tegayaan iyo inay xoogaa cadaabta ku sii hakanayaan.*

## Ilaah jacaylkiisuu inoo caddeeyay (Su'aalaha 6-10)

**Su'aalaha 7-8:** Xerta Masiixa ee dunida oo dhami waxay leeyihiin labo munaasabadood oo gaar ah. Baabtiiska hore ayaan isaga usoo baranay. Midda kalena waxa la yidhaa Cashada Rabbiga. Waxa aan ka qayb qaadanaa xusidda waaqdhaca uu Masiixu daraaddeen ugu sameeyay iskutallaabta korkeeda. **Akhri su'aalaha 7-8 oo dhan.**
- Sideed uga qayb qaadataa Cashada Rabbiga? Ama weligaa jaanis ma u heshay inaad ka qayb qaadato?

*dadka qaar marwalba way sameeyaan, kuwa kalana mararka qaar ayay sameeyaan.*



*Waxa sidoo kale suurtogala in ardayda qaarkood aanay weligood ka qayb galin Cashada Rabbiga.*

- Munaasabaddan maxay kooxdaadu ku magacawdaa?
- Maxaad dareentaa markaad cunto kibista eed koobkana wax ka cabto?
- Kooxdaadu cabitaan noocee ah ayay u isticmaalaan koobka, juuska canabka mise canabka khamriga ah? Haddii uu yahay canabka khamriga, ma dhibaato ayay middaasi kugu keenaysaa?

*Dalalka Islaamka dhexdooda, kaniisaduhu badanaa waxay isticmaalaan cabitaan aan lahayn alkohol. Dalalka reer Galbeedkana way ku kala duwanyihiin madaahibta iyo kooxuhu. Kuwo ka mida xerta asalkoodu yahay Muslimku waxay cabaan khamriga, qaar kalena ma cabaan, markaa middan kooxdaadu go'aan ha ka gaadho.*

- Dadka aan rumaysadka lahayn miyaan u ogolaanaa inay ka qayb qaataan Cashada Rabbiga? *Maya. Waxa loogu talogalay oo keliya xerta raacsan Masiixa.*

## Sharciga Jacaylka (Su'aalaha 11-13)

**Akhri 1 Yooxanaa 4:7-13:**



- Aayaddee sheegaysa in Ilaah uu yahay jacayl? Maxay middani ku dareensiinaysaa? *Aayadda 8.*
- Aayaddee muujinaysaa in Ilaah ugu horreyntii ina jeclaaday ka hor inta aynaan isaga waxba u qabanin? *Aayadaha 9-10.*
- Sidee Ilaah inoogu muujiyay jacaylkiisa? *Ilaah waxa uu soo diray Wiilkiisa (aayadda.9) oo beddelkeena u dhintay (aayadda.10). (Taas kasoo horjeedkeeda, Quraanku wuxuu barayaa in Ilaah jecelyahay kuwa is daahiriya.)*
- Sideen uga fal-celinaa jacaylka Ilaah, sida ku xusan aayadaha 7 iyo 11? *Inaan is jeclaano*
- Qofna ma arki karo Ilaah, hase ahaatee maxay arki karaan marka ay is jeclaadaan?eeg aayadda 12. *Waxay arki karaan in Ilaah inagu dhex noolyahay iyo jacaylkiisa la inagu dhammays tirya.*

**Su'aasha 13: Muraajacee oo xafid aayadda xifdinta:** Maarkos 12:30-31

- Qaynuunka Masiixu waa mid kooban oo si fudud lagu xafidi karo. Laakiin in lagu dhaqmaa miyay fududahay?
- Yaa inoo suurogelin kara addeecista qaynuunkan jacaylka?*Ruuxa Ilaah ee inagu dhex nool.*

**Su'aasha 14:** Halkee ayaad goobaabtay? *La taliyuhu isna ha la wadaago aragtidiisa.*

## Jaarkeenna oon u jeclaanno sida nafteenna (Su'aalaha 15-25)

**Su'aasha 17:** eeg afarta sawir. Falanqeeya cidda addeecaysa shareecada Masiixa.

- Sawrika A, muxuu ninku u rabaa naagtiisa inuu farxad geliyo?
- Sawirka B, si uu u addeeco shareecada Masiixa, maxaa laga rabaa ninku inuu sameeyo?
- Sawirka C, sidee laga yaabaa in Ilaah uga jawaabo ducada haweenaydan?
- Sawirka D, gabadhu waxay caasinaysaa shareecada Masiixa. Natiijadu maxay noqonaysaa?

**Su'aasha 19:** akhri oo falanqee su'aasha.

**Su'aasha 22:** akhri qisada dhabta ah ee sanduuqa ku dhex jirta.

- Akhri qaybta ka danbaysa qisada. Maxaad halkan ku qortay?

**Su'aasha 24:** eeg sawirada Farida iyo Asghar.

- keebaad la mid tahay adigu?

**Su'aasha 25:** Akhri su'aasha 25 oo dhan iyo hadalka macallinka.

- Maxaad u malaynaysaa? Suurtogal miyay tahay *Qisada Farida waa dhab waxaanay ku jirtaa*

inaan jeclaano cadawgeenna? *Eeg Filiboy 4:13!*

- Miyaad tusaale ka bixin karnaa Masiixiyiin jeclaaday cadawgooda?
- Haddii dadka dunidan joogaa ay jeclaan lahaayeen cadaawayaashooda, maxaad u malaynaysaa inay natiijadu noqon lahayd?

*casharka 10. Mid kalena waxa lagu xusay Nik Ripken buuggiisa 'The Insanity of God' waxaanay ku saabsantahay nin sanado badan xabsi ku jiray, iyadoo ilaaliyaha xabsiguna six un ula dhaqmay.sanado badan markii xabsiga lagasii daayay dabadood waxa uu la kulmay ilaaliyihii xabsiga oo gaboobay isla markaana xanuunsanaya. Ninkii Masiixiga ahaa wuu u duceeyay ilaaliyihii waxaanu sidoo kale u keenay daawo.*

| **Gunaanad** | |
|---|---|
| **Addeecista waxbarista maanta:**<br>• 1 Butros 4:8 waxay leedahay "si qoto dheer isu jeclaada". Isbeddel noocee ah ayuu deriska maanta noloshaada ku keeni doonaa?<br>• **Wada akhriya dhaqangelinta dersiga.**<br>• Sii wad waxbarashada guriga iyo dhaqangelinta deriska usbuucan! | **Wada ducaysta:**<br>Wada qaata Cashada Rabbiga haddii ay suurtogal tahay. Wakhti ku wada qaata duco, idinkoo Ciise uga mahadnaqaya jidhkiisa iyo dhiiggiisa, isla markaana ku ducaysanaya inuu inaga caawin dono raacista iyo addeecista qaynuunka jacaylka. |

# Casharka 17: Soonka iyo Sakada

| **Waxa laga rabo barte kasta:** | **Fahanka Dhaqanka:** |
| --- | --- |
| a. Bilow inaad joogtayso soonka iyo sadaqad bixinta kolba sida Ilaah kuugu hanuuniyo.<br>b. ku farax inaad sidan u samayso iyadoon cidi ku qasbaynin amaba aanad ajar ku dalbaynin.<br>c.bar labo siyaabood oo ah sida Ilaah inoo hago.<br>d. Muraajacee Markos 12:30-31. | • Xerta asalkoodu kasoo jeedo Muslimka iyo shareecada ku dhaqankeeda<br>• Xerta Muslimka kasoo jeedda iyo bisha Ramadaan<br>• Muslimiinta iyo sako ama sadaqo bixinta |

## *Furitaan*

**Dhaqangelintii usbuucii hore:** Miyaad awooddayy inaad caawiso qof walaalaha Masiixiyiinta ah ka mida oo baahi qaba. Maxaad qabatay? Sidee qofkaasi uga falceliyay arrintaas? **Qof ka codso inuu u duceeyo deriska maanta.**

### Casharka 17 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:

**Su'aasha 1:** Erey, Ruux
**Su'aasha 2:** duco ama salaad
**Su'aasha 3***:* a) dhammaan; b) sida suurtogalka ah
**Su'aasha 4:** a) Ilaah, dad; b) jacayl

**Hordhac ka bixi dersiga maanta:** Maxaynu ilaa hadda ka baranay shareecada Masiixa? *Eeg hordhaca deriska.*haddaynu nahay xerta Masiixa waxaynu u soonnaa oo sadaqadda u bixinaa si ka duwan sidii aynu hore u aaminsanayn.

## *Falanqayn*

## Sidee Ilaah inoogu hanuuniyaa Jidka Toosan?(Su'aalaha 1-5)



**Su'aasha 1:** Eeg labada sawir ee idaha.

- Labada midkee metelaya shareecadeenii hore keebaa se metelaya shareecada Masiixa? Waa maxay farqiga u dhexeeyaa?

*Shareecada Islaamku waxay la mid tahay sida xerada oo si adag loo sameeyay si ay idaha ugu hayso meesha loogu talogalay. Shuruuc ayaa qofka xadaynaysa oo u kala tilmaamaysa waxa bannaan iyo waxa aan bannaanayn. Marka la eego Masiixiyaddana, waxa jirta shuruuc yar waxaana adagba xitaa in la dareemo muuqashada shuruucdaas. Laakiin waxa aan haysanaa Masiixa oo ah Adhijirkeenna. Waxa u ballanqaaday inuu idihiisa ku hoggaamiyo meelaha wanaagsan isla markaasna uu dhowro.*

**Su'aalaha 3-4:** Akhri su'aasha 3 oo dhan iyo sadarka ugu horreeya su'aasha 4.

- Sideen u maqli karnaa Masiixu inuu Ruuxiisa inagula hadlayo?*Ruuxu waxa uu nagula hadlaa Kitaabka Quduuska ah markaan akhrino maalin walba, isaga oo si aamusan damiirkeena ula hadla isla markaana fikir iyo dareen inagu abuura. Mararka qaarna waxa uu inagula hadlaa cod dheer ha ahaato riyo amaba cod baxaya. Sidoo kale waxa uu inaguala hadlaa talada aan ka helayno Masiixiyiinta kale.*
- Laakiin miyaan ku qaldami karnaa maqlitaanka codka Ruuxa? *Haa! Mararka qaar waxaan u malaynaa codka Ilaah iyadoo codka inoo baxayaa uu yahay kan nafteenna iyo doonisteena denbiga miidhan ah. Waxa Ilaah inagula hadlaa marnaba kama hor yimaaddaan waxa ku qoran Kitaabka Quduuska ah. Markaa waa inaan hubino waxa aynu maqlaynaa inuu yahay waxaan kasoo horjeedin Kitaabka Quduuska ah!*

## Soonka (Su'aalaha 6-14)



**Questions 6-7:** Akhri sadarka ugu horreeya ee su'aasha 6 iyo hadalka macallinka.

- Miyaad qabtaa su'aalo la mida kuwa Parveen? Amaba su'aalo kale oo ku saabsan s
- Sida ku xusan su'aasha 7, maxay yihiin labada waxyaalood ee ka caawinaya inay j hesho su'aaleheeda?

**Su'aasha 8: Maxaynu u soomaynaa?** *Kooxda u qaybi saddex kooxood oo koox walbana sii aayado ka caawiya inay ka jawaabaan su'aashan. Amaba aayadaha oo dhan mid mar isla akhriya.*

- Sida ka muuqata aayadahan hoos ku xusan, maxay dadku u soomaan?

**Daanyeel 9:3-5**– *qirashada denbiga, towbad keen iyo baryo.*
**Sabuurka 35:13**– *cid baahan oo loo duceeyo.*
**Falimaha Rasuullada 13:2-3**– *caabudaad, duco gaara iyo go'aan xikmadaysan oo loo baahanyahay.*

**Su'aasha 12: Goormaan soonnaa?** Akhri su'aasha.

- Goormaan soonnaa?Soonka ma inagu qasab baa mise inagaa dooran karna?*Ruuxa ayaa inagu hagi doonaa inaan soonno.*

**Su'aasha 13:** Akhri su'aasha 13 oo dhan, ilaa inta farta madow ku qoran ee 'joogso oo ka fikir'.

- Jawaabo shaqsi ahaaneed oo noocee ah ayaad su'aashan u haysaa?

**Su'aasha 14:** Akhri su'aasha 14 oo dhan, haddii middani ay khuseyso deegaankiinna iyo dhaqankiinna.

- Sababo noocee ah ayaad ku taageertay amaba kagasoo horjeesatay Parveen inay la soonto qoyskeeda bisha Ramadaan?

***Sababaha taageersan:*** *Waxay daacadnimo u muujinaysaa qoyskeeda xitaa haddii ay Masiixa raacsantahay. Waxay u soomi kartaa si ay ugu ducayso qoyskeedu inay helaan badbaadada. Haddii aanay soomin, waxa laga yaabaa inay iyaga ku sababto dhibaatooyin aan loo baahnayn qoyskeeduna waxa laga yaabaa inay u maleeyaan in xerta masiixu ay yihiin dad caajis ah.* ***Sababa kasoo horjeeda:*** *Waxay u malayn karaan inay weli Muslim tahay oo ay ku dhaqmayso diinta. Waxa saamayn ku yeelan kara qaab fikirkeedii hore iyadoo moodi karta in arrintan lagu helayo ajar iyo xasanaad.*

- Go'aanka Parveen intee in leeg ayuu ku tiirsanyahay xaaladda ay ku jirto? *Tusaale ahaan, waxay ku tiirsantahay qoyskeeda oo ah Muslimiin xooggan. Kuwa aan ku tiirsanayn qoyskoodu waxay haystaan doorashooyin kale.*
- Adiga xaaladdaadu waa sidee?

## Sako ama sadaqo bixinta (Su'aalaha 15-25)

**Su'aasha 15:** Akhri sadarka koobaad iyo hadalka macallinka.

- Miyaad is weydiinaysaa su'aalaha Khaalid kuwo la mida? Amaba su'aalo kale oo ku saabsan sadaqad bixinta?

**Su'aalaha 16-19:** Akhri su'aasha 16 oo dhan iyo qaybta hore ee su'aasha 17.



- Hantideena intee ayuu Ilaah iska leeyahay?
- Miyaan xadaynaa inta aan isaga siin karno?

**Akhri 2 Korintos 9:6-15:**

Xubnaha kooxda weydii in mid waliba akhriyo aayad ama labo si qof waliba uga qayb qaato akhrinta.

*Akhrinta dabadeed, hal daqiiqad aamusnaan ku qaato oo qof waliba ha ka fikiro macnaha ay aayadahani xanbaarsanyihiin.*

- Qof waliba ha sharraxo macnaha ay xanbaarsantahay aayadda uu akhriyay.

**Su'aasha 21:** Akhri su'aasha. Maxaad kaga jawaabaysaa su'aashan adigoo sababta sheegaya?

**Su'aalaha 24:** Akhri su'aasha.

- Maxaad halkan ku qortay? Sideed qorshe ugu samayn kartaa lacag sadaqad bixin ah oonad isticmaalin?
- Haddii aanu kusoo galin wax dakhli ahi, waa maxay siyaabaha kale eed wax u bixin kartaa? *Tusaale ahaan, waxaan bixin karnaa inaan ku deeqno wakhtigeena. Laakiin dadka badankoodu way haystaan lacag inta ay doontaba ha noqotee, markaa waa inay bartaan waxbixinta. Xitaa carruurta yaryar ayaa wax bixin karta.*

**Su'aasha 25:** Akhri su'aasha. Maxaad halkan ku qortay? *Fikradaha waxa ka mida: caawinta saboolka aan ahayn qaraabadeena oo keliya. Kitaabbo iyo buugaag ku saabsan Masiixa oo la iibiyo lana siiyo dadka danaynaya een ahayn Masiixiyiinta. Inaad ka qayb qaadato bixinta qarashaadka ku baxaya kooxdaada iyo inaad wax ugu deeqdo Masiixiyiinta ku hawlan adeegga dalka gudihiisa iyo dibaddaba.*

## Qaynuunka Jacaylka (Su'aasha 26)

**Su'aasha 26:** Akhri su'aasha.

- Sidee soonku ku noqon karaa jid lagu addeeco qaynuunka jacaylka? *Jacaylka Ilaah dartiis waxaan diidaynaa nafteena inagoo isaga ka horreysiinayna gaajada jidhkeenu qabo. Sidoo kale marka aan soonno een u ducayno kuwa baahan, waxay taasi muujinaysaa sidaan iyaga u jecelnahay.*
- Maxay sadaqad bixintu u tahay jid lagu addeeco qaynuunka jacaylka? *Waayo waxaan Ilaah jacaylkeenna ugu muujinaa inaan isaga dartiis wax u bixino, sidoo kalena waxaan dadka kale siinnaa sadaqadda inagoo u muujinayna jacaylkaas aan qabno.*

| ***Gunaanad*** | |
|---|---|
| **Addeecista waxbarista maanta:**<br>• Isbeddel noocee ah ayuu dersigani maanta ku keenayaa noloshaada?<br>• **Wada akhriya dhaqangelinta deriska.** Ha ka fikirin sadaqadii aad bixin lahayd ee maanta bilow inaad qorsheyso bishan sidii aad wax ku bixin lahayd!<br>*Haddaad rabtaan, koox ahaan maalin u wada qorsheysta maalin gaara oo soon iyo salaad aad la timaaddaan. Dhammaantiin waad wada soomi kartaan waxaanad isugu iman kartaa inaad ka ducaysaan wax gaara.* | **Ducayso**: daqiiqado aamusnaana, Ilaah ku weydiista inuu idiin muujiyio sida loo soomi lahaa iyo goortii la soomi lahaa, iyo waxa la inaga rabo inaan sadaqad ahaan ula baxno. Kadib koox ahaan ugu ducaysta idinkoo Ilaah weydiisanaya sidii aan ku noqon lahayn kuwo si deeqsinimo leh wax u bixiya. |

# Casharka 18: Qadarka iyo Faalka ama Sixirka

| Waxa laga rabo barte kasta: | Fahanka Dhaqanka: |
|---|---|
| a. Ogsoonow saddex waxyaalood oo kitaabi ah oo khuseeya qadarka iyo faalka.<br>b. Fahan in Ilaah uu ina daneeyo inoona dhow yahay.<br>c. la tacaalista waxyaabihii hore ee nolosheena weli saamaynta ku leh.<br>d. Xafid 1 Butros 5:7. | • Muslimiinta iyo sixirka<br>• Muslimiinta iyo awoodaha ruuxiga ah<br>• tacsiyeynta |

**Diyaari:** Markaad hoggaaminayso eed diyaarinayso deriskan, hubi inaad hoggaamiye ahaan si buuxda u sheegto in Masiixu ka guulaystay wax kasta. Weydii xubnaha kooxda mid ka mid ahi inuu u duceeyo deriska maanta. Falanqayntu waxa laga yaabaa inay muujiso waxyaabo dadku aaminsanyihiin oo noloshoodii hore ay ka wataan markaa waxa muhiim ah in middaas lagu baraarugsanaado.

**Derisku ku bilow kuna dhammee duco iyo cibaado idinkoo muujinaya oo sheeganaya guusha Ilaah.**

## *Furitaan*

**Dhaqangelintii dersigii usbuucii hore:** Weli miyaad go'aansatay ood ku dhaqantay intii aad lacagtaada sadaqad ahaan uga bixin lahayd? Miyaad ka fikirtay siyaabo kale ood wax u sadaqaysan karto?

**Deriska 18 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:Su'aasha1**: a) qadar; b) nacayb; c) awoodo

**Su'aasha 2:** walwalkiina iyo walaaciina oo dhan isaga saara, idin daryeela (1 Peter 5:7)

**Hordhac ka bixi deriska maanta:** Yaa adduunka ugu awood weyn? Ilaah ayaa ugu awood weyn, Wiilkiisa Ciise Masiixna waxa uu ka guulaystay oo ka adkaaday Shaydaanka iyo awoodaha mugdiga oo dhan. Maanta waxaan baran doonnaa, maadaama aan nahay dadka Ilaah doortay, inaan u baahanay inaynaan ka cabsanin waxba – haddii ay tahay jin, fal iyo isha iwm.

## *Falanqayn*

### Hordhac & Su'aasha 1

**Ku wada ducaysta ducada ka horeysa su'aasha 1.** Mawduucan ku saabsan qadarka, falka iyo sixirka, shaydaanku waxyaabo badan oo beena ayuu inooga sheegaa. Dad badanina waxa ay rumaysteen beentaas shaydaanka waxaanay ku hoos jiraan awoodda Shaydaanka. Waxa laga yaabaa in fikirradaas beenta ahi ay degaan maskaxdeenna. Haddaba maanta aynu waxyaalahaas ku jebino runta Ilaah!

**Su'aasha 1:** Akhri su'aasha. *Jaanis u sii ardaydu inay wax ka yidhaahdaan asalkooda iyo fahankoodu sida uu yahay.*

- Waa maxay fikirkaaga **dhabta** ahi: 'haa', 'maya' ama 'aan hubin'? sideed fikirkaas ku aamintay?

### Ilaahbaa haga nolosheena, ee qadarku ma hago (Su'aalaha 2-9)

**Su'aasha 2:** Akhri su'aasha oo eeg jaantuska *(dadka fikirkooda beenta ah).*

- Miyaad weligaa rumaysatay in Ilaah daryeelkiisu kaa fogyahay? Sidee fikirkani isaga kaa bedelay?

**Su'aasha 3:** eeg jaantuskan *(sidoo kalena eeg ereyada ku qoran meelaha bannaan).*

- Miyaad taqaannaa dad rumaysan in jinka, faalka iyo ishu ay noloshooda saamayn ku leeyihiin?
- Marka Kitaabka Quduuska ah la eego, waxyaalahani miyay jiraan? *Haa (in kasta oo middan ay Masiixiyiintu ku kula duwan yihiin).*

**Su'aasha 6:** eeg sawirka oo akhri su'aasha.

- Maxaad ku qortay qaybta a)? ka waran qaybta b)? maxaad ku dooratay jawaabahan?
- Marka ay adiga dhibaato kula soo deristo labada odhaahood ee 1 iyo 2 midkee qalbiga kuu qaboojinaya?

**Su'aasha 7:** akhri jaantuska: 'Ilaah muxuu la mid yahay'?.

- Muxuu jaantuskani kaga duwan yahay midka su'aasha 3? *Ilaah inagama foga waxaanu inoogu yimaaddaa Masiixa. Daryeelkiisu inagama foga.*

**Su'aasha 8:** Akhri su'aasha oo ku celceli akhrinta aayadda xifdinta. koox ahaan ama labo labo u wada sameeya sidan::

- Qofka koobaad qofka labaad ha weydiiyo "maxaad maalmahan ka walaacsan tahay?"
- Qofka labaadna ha ka jawaabo su'aasha. Qofka koobaad hadana ha yidhaahdo:" Welwelkaaga oo dhan isaga saar, maxaa yeelay, isagu dan buu idinka leeyahay (1 Butros 5:7)". Qofka labaadna sidaa si leeg ha ku yidhaahdo qofka kale oo midba midka kale ha ku yidhaahdo ereyadan.

## Ilaah wuu necebyahay sanam caabudista iyo sixirka iyo faalka (Su'aalaha 10-17)

**Su'aasha 10:** Akhri su'aasha.

- Halkan maxaad ku qortay?

*Muslimiinta ku nool dalalka reer Galbeedku inta badan ma sameeyaan laakiin qaar badan ayuu haddana dhaqankoodu saameeyaa. Dadka weydii qoysaskooda sida uu yahay dhaqankoodu.*

**Su'aasha 11-15:**

- Dhaqamo noocee ah ayaa su'aalahan lagu xusay? *Waxa laga yaabaa ereyada qaar in macnohoodu adkaado markaa sharraxaad ka bixi.*
- Ilaah kuwan siduu u arkaa? *Wuu neceb yahay waanu mamnuucay.*
- Maxay waxyaalahani ula mid yihiin sanam-caabudista (Su'aasha15)? *Dhaqamadani waxay la mid yihiin sanamyada haddii dadku ay isku halleeyaan waayo waxyaalo la abuuray ayay ku bedesheen isku hallayntii Ilaaha Khaaliqa ah.*

**Su'aasha 16:** Akhri hadalka macallinka. Talo noocee ah ayaad siin lahayd haweenaydan?
***Talo bixin:*** *Waxay u baahantay inay ogaato in Ilaah iyada daneeyo oo uu dareemayo murugadeeda. Ninkan waliga sheeganayaa iyada uugama dhowa Ilaah waxaana xaqiiqadu tahay in iyadu ay uga dhowdahay maadaama oo Masiixa ay ku jirto. Maaha inay iyadu raacdo labo sayid, Masiixa ayaa ah sayidkeeda ama waxa ah ninkan weliga ah. Waa inay xerta kale weydiisato inay u duceeyaan si Ilaah iyada u siiyo ilmo. Waxa marwalbana muhiima in Ilaah doonistiisu ay tahay waxa iyada u wanaagsan haddii ay ilmo hesho iyo haddii kaleba.*

## Ciise wuxuu ka awood sarreeyaa Awoodaha Ruuxiga ah oo dhan (Su'aalaha 18-21)

**Su'aasha 18-19: Akhri oo falanqee aayadaha.**

- **Markos 1:21-27.** Aayadda 22, maxaa ka yaabiyay ee dadku ay Ciise ku arkeen? *Waxa uu wax u baray sidii mid amar leh.*
- Sidee Ciise awooddiisa iyo amarkiisa u isticmaalay? *Waxa uu amray ruuxdii wasakhda lahayd waanay addeeceen.*
- Aayadda 24, maxay yihiin labada waxyaalood ee Ciise ku saabsan ee jinku aqoonsaday? *1. Ciise wuxuu u yimid inuu baabi'iyo ruuxda sharka leh 2. Isagu waa kan Quduuska ah oo Ilaah.*
- Sidee dadku uga falceliyaan middaas sida ka muuqata aayadda 27? *Sidii hore si ka daran ayay ula sii yaabeen.*

- Eeg jaantuska su'aasha 19 oo akhri **1 Butros 3:21b-22**(qaybta labaad ee aayadda 21) runta ku jirta aayadahan kuwoodee ayay tilmaamaysaa fallaadha kor u jeeddaa?
  *'sarakicista Ciise Masiix, 'samada aaday', 'joogo gacanta midig ee Ilaah'.*




- Meesha bannaan ee goobaabta beedka u eeg maxaad ku qortay?
  *Malaa'igaha, amarro, awoodo.*
- Sida ka muuqata jaantuska, keebaa sarreeya jinka iyo awoodaha ruuxiga ah?
- Xaggee ayaan inagu kaga suganahay jaantuska? *Waxaan la fadhinaa oo wax la xukunaa Masiixa, Efesos 2:6.*
- Haddii qof ku habaaro, yaa ka awood badan habaarkaas?

**Su'aasha 21:** ma jirtaa cid inaga mida oo aragtay sida Masiixu uga awood sarreeyo ruuxda sharka leh iyo jinka?

- ***Akhri qaybta ku dhex jirta labada qaws.*** Qaarkiin waxa laga yaabaa inay ka walwalsanyihiin jinka, qaarna waxa laga yaabaa inaanay walaac ka qabin. Haddii aad walaac ka qabto fadlan deriska dabadii aan is aragno amaba la sheekayso qof ka mida Masiixiyiinta oo kaa waayo aragnimo badan.

## Labo Sayid ma u adeegi karnaa?? (Su'aalaha 22-24)

**Su'aasha 23:** Akhri qisada. Jawaab noocee ah ayaad qortay?

- Xasuuso odhaahda ah, 'haddii Ciise aanu ahayn sayidka wax walba, mabaha aha sayid!'
- Maanta waxaan ka hadalnay saddex xaqiiqo oo muhiima oo ku saabsan jebinta beenta shaydaanka. Maxay ahaayeen saddexdaas waxyaalood?

*1. Ilaahbaa haga nolosheena, ee qadarku ma hago. 2. Ilaah waxa uu necebyahay falka, sixirka iyo sanam caabudista. 3. Ciise wuxuu ka awood sarreeyaa awoodaha ruuxiga ah oo dhan.*

- Maxaad dareemaysaa dhammaadka deriska maanta?

<table>
<tr><th colspan="2">Gunaanad</th></tr>
<tr>
<td>Addeecista waxbarista maanta:<br>• Isbeddel noocee ah ayaa dersigani maanta uu ku keenayaa noloshaada?<br>Wada arkhriya dhaqangelinta deriska: Si taxadar leh u kor mar su'aalaha. Ilaah weydiiso inuu ku xasuusiyo haddii ay jiraan dhacdooyin hore oo waxyaalahani ay noloshaada saamayn ku yeesheen. Haddii ay saamayntaasi kulasoo deristay, weydiiso mid ka mida xertu inuu kaaga duceeyo arrimahaas.</td>
<td>Wada ducaysta oo wada cibaadaysta:<br>Wada istaaga oo shaydaanka ku hor istaaga saddexdan xaqiiqo: Ilaahbaa nolosheena haga, ee qadarku ma hago. Ilaah wuu necebyahay sixirka iyo sanamcaabudka. Sayid Ciise wuu ka amar sarreeyaa awoodaha ruuxiga ah oo dhan.</td>
</tr>
</table>

# Casharka 19: Isu-adeegis

| Waxa laga rabo barte kasta: | Fahanka dhaqanka: |
|---|---|
| a. u heellanaanta in qof waliba ku adeego hadiyadihiisa.<br>b. Taageeridda hoggaamiyayaasha kaniisadda iyo fahanka masuuliyadohooda.<br>c. xifdinta 1 Butros 4:10. | • Dhaqanka Muslimiinta iyo cago isu dhaqsita<br>• Arrimaha hoggaaminta ee xerta asalkoodu kasoo jeedo Islaamka.<br><br>**diyaari:** tuwaallo, saabuun, sixniga wax lagu dhaqo iyo biyo diirran. |

## *Furitaan*

**Dhaqangelintii usbuucii hore:** Miyaad hubisay in wax saamayna ay kugu leeyihiin noloshaada weli faaliyayaasha iyo awliyadu? Miyaad la ducaysatay qof kale? Haddii arrintan aad weli walaac ka qabto, si gaara aan isu aragno.

**Casharka 19 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**
**Su'aasha 1**: a) ka duwan; b) midkasta; c) adeeg
**Question 2:**" Sida mid waluba u helay hadiyad, idinku isu adeega*"* (1 Butros 4:10).

**Hordhac u same mawduuca maanta:** Ilaah waxa uu bixiyay kartiyo iyo hadiyado kala duwan. Maanta waxaan baran doonnaa sida loo isticmaalo hadiyadahan aynu ugu adeegayno Ilaah inaguna isugu adeegayno. Hoggaamiye waliba waa inuu u adeego dadkiisa!

## *Falanqayn*

## Isu-adeegis (hordhaca iyo su'aalaha 1-3)

**Faallaynta sawirka furitaanka:** Ciise xertiisa ayuu cagaha u dhaqay habeenkii ka horreeyay ku qodbitaanka iskutallaabta. **Akhri Yooxanaa 13:3-5,12-17**. *Kadibna aayar waxaad tidhaahdaa:*



"*eeg gacmaha ka muuqda sawirka. Malee inay yihiin gacmihii Masiixa."*
*"Eeg cagaha sawirka ka muuqda oo malee inay yihiin lugahaagii. Masiixa ayaa dhaqaya cagahaaga!!"*
*"Maxay middani ku dareensiinaysaa? Rabbigaaga wax arrintan ku saabsan imika qalbigaaga kagala hadal."*
**Maxaynu dareenay markaan malaynay in Masiixu dhaqayo cageheena?**

**Su'aasha 2:** Akhri su'aasha.

- Dhaqamada aan ka nimid, hoggaamiyayaashu miyay dadka cagohooda u dhaqaan?
- Laakiin hoggaamiyeheena ugu weyn oo ah Masiixu waxa uu hoos isugu dhigay inuu cagaha inoo dhaqo. Maxaa markaa inagana inala gudboon oo aan samaynaa?
- Hoggaamiyayaashu miyay ixtiraamkooda ku waayaan haddii ay sida Masiixa oo kale u adeegaan?

*Eeg sanduuqa Su'aasha 1. Waxa uu leeyahay, "tusaale ayaan idiin dejiyay". Waxaan uga mahadnaqaynaa inuu noo adeego, inaguna sidiisa oo kale waa inaan isu adeegno. Ugu danbayntana, hoggaamiyayaasha adeegaa waxay heli doonaan ixtiraam.*

## Hadiyadda isu adeegga (Su'aalaha 4-8)

**Akhri 1 Butros 4:10-11 oo muraajecee ayaadda xifdinta (1 Butros 4:10).**

- Aayadda 10, sideen u adeegsanaa hadiyadaha Ilaah ina siiyay? *Inaan dadka kale ugu adeegno*
- Maxaad u malaynaysaa in la inooga baahanyahay inaan noqono "wakiillo wanaagsan"? *waa*

*inaan noqono sidii maamule aammin ah oon iska lahayn waxa sayidkiisa, balse isticmaala isaga oo metelaya sayidkiisa.*

- Aayado kala duwan oo ku sugan Kitaabka Quduuska ah waxay ka hadlaan hadiyadaha kala duwan. Maxay yihiin labada hadiyadood ee inooga muuqanaya aayadda 11?
- Sidee labada qof ee ku sugan aayadda 11 ay tahay inay u isticmaalaan hadiyadohooda?
- Waa inaan hadiyedeheena u isticmaalno ammaanta Ilaah. Aan qaybta ugu danbeysa aayadda 11 kor u wada akhrino.

## Dadku waxay leeyihiin hadiyado kala duwan (Su'aalaha 9-10)

**Su'aasha 9:** Akhri qisada ku dhex qoran sanduuqa iyo sadarka la socda.

- Maxaad halkan ku qortay? *Tusaale ahaan, dhamaanteen waxaan leenahay meelo aan ka xoogganahay iyo meelo aan ka taag daranahay. Dhammmaanteen waxa jirta meelo aan ka indho laanahay oo ka liidano. Ma jiro qof dhammaystiran oo kaamil ahi. Laakiin meesha aan ka liito adigaa ka xoog badan. Sidaas aawadeed dhammaanteen koox ahaan ayaan isugu baahanahay.*

## Midkeen Waliba waxa uu leeyahay hadiyad (Su'aalaha 11-14)

**Su'aasha 11:** Eeg sawirka.



- Hadiyad adeeg oo noocee ah ayuu Ilaah siiyay Fosiya?
- Sidee Layla ay Fosiya uga caawisay garashada hadiyaddeeda?

**Su'aasha 13:**

- Sideen ku ogaan karnaa waxay hadiyaddeenu tahay? *Eeg saddexda arrimood ee arrintaas muujin kara.*
- Mid ka mida kooxdu ha sheego mid ka mida adeegyada. Qof kalena ha sheego mid kale oo aynu liis garayno adeegyada loo baahan yahay. *Tusaale ahaan, hoggaaminta kulamada, barista kitaabka, garaacista muusikada, hoggaaminta ducada, dhiirrigelinta, gaadhista dadka aan rumaysadka lahayn, taageero muuqata ama caawimaad dhaqaale, cunto karinta iwm.*
- Sidee adeegyada noocan ahi ay u caawin karaan koox Masiixiyiin ah?

## Waa inaan hadiyadeheenna u adeegsano si is-hoosaysiini ku jirto (Su'aalaha 15-18)

**Su'aasha 15:** Akhri su'aasha.

- Jawaabo noocee ah ayaad ku taageertay Samir oo ah hoggaamiye kooxeed? Maxaad kagasoo horjeedsatay?
- Sidee kooxdu Samir uga caawin kartaa inuu ku koro hoggaaminta isagoon is faaninaynin?

*Oday ka mida xerta ayaa Samir kala talin kara fikirka isla weynida ah ee ku jira. Sidoo kale, Samir waxa la siin karaa masuuliyad uu kaga amar qaato hoggaamiyaha. Haddii si wanaagsan uu ugasoo baxo isaga oo is hoosaysiinaya, waxa la siin karaa masuuliyado dheeraad ah. Sidoo kale haddii uu noqdo hoggaamiye, waa inaanu keli noqonin, balse waa inuu la shaqeeyo koox ka kooban labo ama saddex hoggaamiye.*

**Su'aasha 17:** Akhri su'aasha.

- Qorka ereyga dadka ku wacdiya iyo kan cuntada diyaariya midkoodee Ilaahay hortiisa muhiim ku ah?

*Labaduba si isku mida ayay Ilaahay hortiisa muhiim ugu yihiin. Waa inaan u mahadcelino kuwa ina wacdiya iyo kuwa cuntada inoo diyaariya.*

## Adeegga Hoggaaminta (Su'aalaha 19 -25)

**Su'aasha 21:** eeg liiska astaamaha su'aashan dhammaadkeeda.

- Astaamahan hoggaamiyanimo kuwoodee ayuu Ciise oo ah Adhijirka ugu sarreeyaa muujiyay? *a), b) & e).*
- Sidee hoggaamiyaha Masiixa ku daydaa ficil ahaan u muujin karaa astaamahan?

**Akhri 1 Butros 5:1-6:**

- Aayadda 2-3, sheeg saddex siyaabood oo hoggaamiyayaasha Masiixa ku daydaa ay uga duwanyihiin hoggaamiyayaasha dunida. *Haddaad ka shakido, eeg su'aasha 22.*
- Aayadda 4 ballanqaad noocee ah ayay siinaysaa hoggaamiyayaashaa noocaas ah?
- Sidee ayay rumaystayaashu hoggaamiyayaashooda uga caawin karaan shaqada adage e ay hayaan?. *Addeeca iyaga (aayadda.5a), u duceeya, ixtiraama ama maamuusa,dhiirrigeliya, u mahadnaqa, ha xamanina.*
- Aayadda 5b iyo 6, fikir noocee ah ayaa la inaga rabaa markaan isticmaalayno hadiyadeheena?

**Su'aasha 25:** Akhri sadarka labaad.

- Maxaad halkan ku qortay?

**Aan wada akhrino dhammaanteen hadalka macallinka ee dhammaadka su'aasha 25.**

*Tusaale ahaan, hoggaamiyaha adeegaa weli waa hoggaamiye. Waxay amar u leeyihiin inay hoggaamiyaan dadkuna waa inay ku maamuusaan middaas. Maamuuskooda maaha mid ka imanaya cabsi ee waa mid ku imanaya jacayl. Hoggaamiyuhu wuxuu ugu adeegaa inuu iyaga aawadood naftiisa u huro.*

## *Gunaanad*

| **Addeecista waxbarista maanta:** | **Ku dhaqma isu-adeegista:** |
| --- | --- |
| • Isbeddel noocee ah ayuu deriska maanta ku keenayaa noloshaada?<br>• **Wada akhriyaa dhaqangelinta dersiga.**<br>• Miyaad haysaa fikrado aad hadiyadahaaga ugu adeegi karto dadka kale? | Midkiinba midka kale cagaha ha u dhaqo (rag iyo dumarka ha la kala sooco). Hoggaamiyuhu ha ku bilaabo!<br>**Isu duceeya:** Mar kale ka fikir Masiixa oo dhaqaya cageheena. Weydii sida uu u rabo inaan dadka ugu adeegno, iyo inuu inaga caawiyo sidii uu isaguba inoogu adeegay oo kale inaan inaguna ugu adeegno dadka kale. |

# Casharka 20: U Xajitaankeennna Jannada

**Waxa laga rabo barte kasta:**
a. Hubi ku kalsoonaanta gelitaanka jannada iyo in xiise lagu sugo.
b. Baro aqoonsashada iyo iska caabitanka weerarada shaydaanka.
c. Xafid 1 Butros 5:10-11.

**Fahanka dhaqanka:**
- Muslimiinta, xashka iyo jannada
- Yerusaalem iyo Siyoon

**Diyaari:** qor ama daabac xigashada (eeg su'aasha 22) oo aad raaciso 'inaga'. Diyaar inaad dabbaal degtaan dhammaadka koorsada. Tusaale ahaan waxaad samayn kartaan inaad kulan ku wadaagtaan cunto iyo markhaatifur.

## *Furitaan*

**Ku bilow duco kadibna muraajacee dhaqangelinta:** Miyaad qof saaxiibkaa ah weydiisay hadiyadaha uu leeyahay? Maxuu kuugu jawaabay? Miyaad usbuucan jaanis u heshay inaad dadka kale u adeegto? *Qof waliba ha hadlo.*

**Casharka 20 muraajacada barashada shaqsi ahaaneed:**

**Su'aasha 1:** a) Yerusaalem; b) janno **su'aasha 2:** a) inaga; b) Masiix
**Su'aasha 3:** Haddaba Ilaaha leh nimcada oo dhan oo idiinku yeedhay amaantiisa daa'imkaa oo Masiixa ku jirta, markii aad in yar xanuunsataan ka dib isagu wuu idin kaamili doonaa, oo idin adkayn doonaa, oo idin xoogayn doonaa. Weligiis iyo weligiisba xoogga isagaa leh. Aamiin. (5:10-11)
**Su'aasha 4:** jawaabo shaqsi ahaaneed. *Ilaah waxa uu inaga rabaa inaan si buuxda kalsooni u yeelano. Ma mari doono ciqaab balse waxaan si toosa u gali doonnaa jannada markaan dhimano! Haddii dadka qaar weli shakisan yihiin, waxaad tusisaa Luukos 23:39-43 in Ciise uu xitaa denbille u ballanqaaday inuu isaga jannada la gali doono!*

**Hordhac ka bixi dersiga maanta:** Waxaan socdaal dheer ugu jirnaa jannada. Waxa inaga horreeya jid ammaan mudan laakiin la dagaallano cadawga shaydaanka. Maanta waxaan wax ka baran doonnaa xajka ama socdaalka ruuxiga ah.

## *Falanqayn*

### Xajkeenna Ruuxiga ah (Su'aalaha 1-5)

**Su'aalaha 2-3:** Akhri su'aasha 2 oo dhan iyo sadarka ugu horreeya su'aasha 3.
- Xaj noocee ah ama socdaal noocee ah ayaan galnaa haddii aan nahay xerta Masiixa? *Xash ruuxi ah oo soconaya inta aan noolnahay oo dhan. Waxaan u socdaalaynaa gurigeenna ku yaalla jannada.*
- Marka ay xerta Masiixu ducaysanayaan, maxay qiblo uga dhigan waayaan oo ugu jeedsan waayaan Yerusaalem? *Waayo ducadeena maaha in lagu jiheeyo magaalo ku taalla dunida balse waa inay Ilaah laftiisa ku jihaysnaato.*

**Su'aasha 4:** Akhri su'aasha, adigoo raacinaya 'joogso oo ka fikir'.
- Miyaad arrintan ka fikirtay, maxaadse go'aansatay?

### Horjoogsada Shaydaanka (Su'aalaha 6-16)

**Akhri 1 Butros 5:6-11**
- Sidee aayadda 6 inoo caawin kartaa markaan isku qanacsanahay?
- Sidee aayadda todaba inoo caawin kartaa markaan walaacsanahay?
- Sida ku xusan aayadda 8, yaa ah sida libaaxa?
- Sida ay inoo sheegayso aayadda 9, miyaan awoodnaa inaan iska caabbino isaga?
- Wada akhriya aayadaha 10-11ilaa inta qof waliba ka xafidayo.



*Waxay inaga caawinaysaa inaan is hoosaysiino.*
*Waxay ina siinaysaa ballanqaad culus oo ah in Ilaah ina daneeyo!*

*Shaydaanka.*
*Haa, haddii aan xoogganaano.*

**Su'aasha 7:** Akhri su'aasha oo dhan oo la wadaag waxa aad ku qortay saddexda qaybood:

- Maxaa xerta Masiixa taag darrayn kara? *Tusaale ahaan, hadday joojiyaan tukashada iyo akhrinta ereyga Ilaah way taag darraanayaan. Sidoo kale haddii ay iimaankooda ay ku qabaan Masiixa qariyaan muddo dheer way taag darraanayaan (inkasta oo ay caadi tahay in muddo la is qariyo).*
- Maxaa Masiixiyiinta ka dhigi kara kuwo aan baraarugsanayn? *Tusaale ahaan, marka aanay ogsoonayn in shaydaanku jarribayo. Waxa markaa dhacaysa inay ku dhacaan denbiyada ay ka midka yihiin kibirka, cadhada iyo sinadu.*
- Maxaa xerta Masiixa ka sooci kara xerta kale? *Haddii aanay is weheshi la samaynin xerta kale amaba aanay ku biirin kaniisad.*

**Su'aasha 11:** Akhri sadarka koobaad.

- Mararka qaar waxaan u malaynaa in dhibaatooyinka ina haystaan badan yihiin oo ay inagu adagtahay xamilitaankoodu! Laakiin **akhri 1 Korintos 10:13**. Rajo noocee ah ayay aayaddani ina siinaysaa?
- Miyaad tusaale ka bixin kartaa xaalad aad quus istaagtay? Sidee Ilaah kaaga caawiyay inaad adkaysato oo markale cagaha ku istaagto? *Qof walba jaanis u sii inuu waayo aragnimadiisa sheego iyadoon cidna cadaadis lagu saaraynin middaas.*

**Su'aasha 12:** Eeg sawirrada su'aasha 12.

- Waa kuwee labada xerta ah ee caqabado dibadda ahi soo waajeheen? *Gul (b) iyo Iftikhar (d)*.
- Kuwee ayay soo waajeheen jarribaado xagga gudaha ahi? *Akhtar (a) iyo Shireen (c).*
- Sheeg xilli uu shaydaanku kugu soo weeraray jarribaado xagga gudaha ama dibadda ah. Maxaa dhacay? Maxaad dhacdadaas ka baratay? *Middani waa muhiim ee qof walba jaanis u sii inuu hadlo.*

**Su'aasha 15-16:** Eeg sawirka su'aasha 15. Akhri su'aasha 16 oo dhan.

- Marka aan soo gaadhno jid kala leexda, doorasho noocee ah ayaa horteenna taalla?
- Shaydaanku waxa uu inagu jarribaa inaan jidkiisa raacno. Yaa ay tahay inuu qaato doorashada ah iska caabinta jarribaadda- inaga mise Masiixa? *Waa inaan doorasada inagu samayno. Haddii aan doorano inaan jidka shaydaanka raacno, taasi waa qaladkeena ee maaha qaladka Masiixa.*
- Akhtar iyo Shireen sida ku xusan su'aasha 12, yaa ay tahay inuu doorto ka fogaanshaha jarribaadda? *Waa inay iyagu doortaan.* Yaa iyaga ka caawin doona inay sameeyaan doorashada saxda ah?*Masiixa.*
- Marka shaydaanku ina jarribo, waan iska caabbin karnaa jarribaadda haddii aan sidaas dorano. **Akhri 1 Yooxanaa 4:4,** Masiixa ayaa inagu jira isaga ayaana ka xoog badan Shaydaanka!

## Halkaan u soconnaa waa Jannada (Su'aalaha 17-22)

**Su'aasha 19:** Akhri su'aasha.

- Sideen u hubin karnaa in Ilaah jannada ina gelinayo?

*Ciise laftiisa ayaa jannada inoo kaxaynaya. Isaga ayaan kalsooni ku qabnaa, oo weligeena inama dayrin doono!*

**Su'aasha 21:** Akhri qisada dhabta ah ee Cumar *(sanduuqa dhexdiisa).*

- Intee in leeg ayaad filanaysaa inaad galayso jannada: in yar mise in badan?
*Falanqeeya arrintan. Way wanaagsan tahay inaan ku faraxno adeegga aan Ilaah dunida guudkeeda ugu adeegayno, lakaiin waa inaynaan marnaba illaawin socdaalkeenna dhabta ah oo ah jannada! Waa inaan sida Cumar oo kale in badan filano oo sugno!*

**Su'aasha 22:** Akhri su'aasha oo dhan.

- Aayadahan erayada ay koobsanayaan kuwee aad kuu soo jiitay?
- Ballanqaadyo cajiiba oo noocee ah ayaan aayadahan ka helaynaa! Aan

*Qof waliba dadka ha la wadaago aragtidiisa.*

***Si aad ardaydaada u caawiso, aayadaha marka hore warqad kusoo daabac oo soo diyaari.*** *Tusaale ahaan, "oo isna wuu inala deganaan doonaa, oo waxaan ahaan doonnaa dadkiisa, oo waxa uu indheheena ka tiri doonaa*

markale wada akhrino inagoo meesha iyaga ah ku bedelayna 'inaga'.

*ilmada" iwm.*



**Su'aasha 22:** eeg sawirka bogga ugu danbeeya oo akhri ereyada.

- Waa sidee dareenkaagu?
- Malee iyada oo Ilaah ilmada inagaga tirayo jannada!

<table>
<tr><th colspan="2">Gunaanad</th></tr>
<tr>
<td>Addeecista waxbarista maanta:<br>• Isbeddel noocee ah ayuu dirsigani maanta ku keenayaa noloshaada?<br>• Wada akhriya dhaqagelinta dersiga. Usbuucan dhexdiisa maalin walba weedhan ku celceli oo dhadhanso macaankooda.<br>• Dabbaaldeg: Sidee kooxdu ugu dabbaal degaysaa dhamaystirka koorsada? Tusaale ahaan, usbuuca soo socda waxaad wadaagi kartaan cunto iyo sidoo kale markhaatifurka iyo waxyaalaha aad ka barateen koorsadan. Falanqeeya arrintan oo isla qorsheeya.<br>• Falanqee. Sidee xernimada iyo wax wada barashadu halkan uga sii socon kartaa, haddii koox ahaan loo sii wadayo iyo haddii shaqsi ahaan loo sii wadayo.</td>
<td>Wada ducaysta:<br>Qof walib aha furo 1 Butros 5:8-11. Qof waliba ha duceeyo duco ku salaysan qaybaha kala duwan ee aayadahan..<br>Si gaara ugu duceeya qoysaskeena Masiixiyiinta ah iyo Masiixiyiinta dunida oo dhan ku silcaysa (aayadda.9)</td>
</tr>
</table>